



Qaamuuska Erayada Doorashada



Guddiga Kaalmada Doorashada Mareykanka (U.S. Election Assistance Commission)
633 3rd Street NW, Suite 200 | Washington, DC 20001
www.eac.gov

Tusmada

Ujeedada	3
Qaamuuska Erayada Doorashada	4
A	4
B	10
C	17
D	29
E	34
F	42
G	46
H	47
I	49
J	50
K	50
L	50
M	52
N	56
O	60
P	64
Q	75
R	77
S	84
T	93
U	97
V	99
W	110
X	112
Y	112
Z	112

Ujeedada

Qaamuuskaan waxaa ku jira 1299 eray iyo weedh loo isticmaalo maamulka doorashooyinka Mareykanka. Ujeedada ugu weyn ee laga leeyahay qaamuuska erayada waxay tahay in sarakiisha doorashada la siiyo ilo dhamaystiran oo ku saabsan erayada iyo weedha caadiga ee ku jirto maamulka doorashooyinka. Dhisidda erayada doorashada midaysan waxay u roon tahay hubinta fikradaha wada socda marka dadweynaha lagala xariiro doorashooyinka iyo cod bixinta. Hase ahatee, bacdamaa hababka doorashada iyo erayada ku xeran yahiin maamulka, waxaa ugu fiican in mar kasta in lala xariiro saraakiisha doorashada gobolka iyo deegaanka marka eray ka duwan yahay sifeynta qaamuuska erayada.

Qaamuuska Erayada Doorashada

A

Abandoned Ballot - Warqadda Cod Bixinta Laga Tagay

Warqadda cod bixinta uusan cod bixiyaha gelinin sanduuqa cod bixinta ama aan loo gelinin diiwaanka sida cod laga dhiibtay qalabka diiwaan gelinta elataroonigga tooska (direct elataroonig recording device) (DRE) ka hor inta aan laga tagin goobta cod bixinta.

Absentee Application - Arjiga Maqanaha

Arjiga lagu dalbado warqadda cod bixinta maqanaha.

Absentee Ballot - Warqadda Cod Bixinta Maqanka

Warqadda doorashada uu dhiibto cod bixiyaha marka laga reebo maalinta doorashada qofka yimaado. Maamulada qaar waxay adeegsadaan erayga isla macno halkaas oo warqadaha lagu soo dirro boostada inta maamulada erayga u isticmaalaan cod bixin hore.

Absentee Ballot Request Form - Foomka Codsiga Warqadda Doorashada Maqanaha

Foomka uu isticmaalo cod bixiyaha si uu u cadsado warqadda cod bixinta maqanka.

Absentee Mail Process - Hawsha Boostada Maqanaha

Taxanaha falalka ama talaabadaha la qaado marka loo jeesto doorashada lana isticmaalo warqadda cod bixinta maqanaha.

Absentee Procedures - Hababka Maqanaha

Taxanaha falalka uu qaaday sarkaalka doorasahada si uu uga shaqeeyo warqadaha cod bixinta maqanaha.

Absentee Vote - Codka Maqanaha

Dhiibashada codka warqadda maqanaha.

Absentee Voter - Cod Bixiyaha Maqanaha

Cod bixiyaha isticmaala warqadda maqanaha sii uu u dhiibto codkiisa.

Absentee Voter Status - Xaaladda Cod Bixiyaha Maqanaha

Eray ay isticmaalaan saraakiisha doorashada marka ay rabaan in ay ogadaan in ocd bixiyaha uu xaq u leeyahay, dalbaday ama codkiisa ku dhiibtay warqadda cod bixinta maqanaha.

Absolute Majority - Tirada Ugu Badan

In ka badan 50%

Acceptance Testing - Tijaabinta Ogolaashada

Baarista siistemka cod bixinta uu fulliyo maamulka doorashada iibka si loo saxo waxqabadka qalabka la geeyo si loo hubsado in ay la kulmaan sharuudaha iibka, iyo in siistemka la geeyo uu, dhab ahaan, siistemka la siiyay shahaadada la iibsaday. Badanaa tani waxay ka dhacdaa jawi isticmaalkiisa la tijaabiyay.

Access Control - Kantaroolidda

Habka lagu bixiyo ama lagu diido codsiyada qaar ee lagu helo iyo lagu isitcmaalo macluumaad, iyo adeegyada shaqada laga qabto macluumaadka la xariiro, kaddibna la geliyo meelo u gaar ah.

Access Board - Guddiga Helitaanka

Wakaalad federaalka madax banaan taasoo ujeedadeeda tahay helitaan/la siiyo dadka itaalka darran iyo ilo u horseedo macluumaadka ama handasada helitaanka.

Accessibility - Helitaanka

Sifooinka la cabbiri karo ee muujiya ilaa heerka sistemka la heli karo, ay dadka itaalka darran isticmaali karaan. Itaal darrida ugu badan waxaa ka mid ah kuwa la xariira aragga, maqalka iyo dhaqaqa, iyo sidoo kale itaal darrida garashada.

Accessibility Requirements - Sharuudaha Helitaanka

Sharciyada, xeerarka iyo hababka maamula habka cod bixinta si loo hubiyo in cod bixinta ay heli karaan dadka itaalka darran.

Accessible Facility - Hay'adda Helitaanka

Goob la kullanta dhamaan sharciyada iyo qaunuunka si loo hubiyo in la heli karo iyo ay isticmaali karaan dadka itaalka darran.

Accessible Voting Station - Goobta Cod Bixinta la Heli Karo

Saldhigga cod bixinta ee loo qalabeyay dadka itaalka darran.

Accreditation - Aqoonsiga

Aqoonsiga rasmiga uu shaybaarka ku filan yahay si ay u fulliyaan baaritaano ama cabbiro.

Accreditation Body - Hay'adda Aqoonsiga

(1) Ururka awoodda u leh ee fullisa aqoonsiga. (2) Ururka madax banaan oo mas'uul ka ah helitaanka shaqada ururada kale ee ka soo horjeedo heer la aqoonsan yahay, iyo xaqijinta rasmiga xaaladda kuwa la kulma heerka.

Accuracy - Sax Ahaanta

(1) Ilaa inta cabbirka la bixiyay waafaqsan yahay heerka loo ogol yahay cabbirkaas. (2) Sida heshiiska ugu dhaw yahay natijada ka soo baxda cabbirka iyo runta qiimaha qiyaasta la cabbiro. Sax ahaanta waa fikrad ku saleysan tayada mana lagu baddali karo cabbir toosan.

Accuracy For Voting Systems - Sax Ahaanta Siistemyada Cod Bixinta

Awoodda siistemka in uu qabto, qoro, keydiyo, habeeyo iyo soo sheego xullashada qaar iyo maqnaashada xullashada, uu cod bixiyaha ka sameeyo warqadda cod bixinta, qalad la'aan. Sax ahaanta loo baahan yahay waxaa lagu sifeyaa qadarka qaladka ee xagga tijaabinta mattasho tirada ugu badan qaladaadka inta laga shaqeeynaayo xogta cayiman.

Activation Device - Qalabka Shididda

Qalab la geliyay brograamka ee abuura aqoonsiga loo baahan yahay si loo bilaabo kullanka cod bixinta lana isticmaalo nooc cayiman oo ka mid aha warqadda cod bixinta. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah buugaagta cod bixinta elatarooningga ee laga helo macluumaadka aqoonsiga loo baahan yahay si loo ogaado nooca warqad bixinta cod bixiyaha.

Active Registered Voter - Codbixiyaha Sida Firfircoon Diiwaanka ugu Jiro

Cod bixiyaha diiwaankiisa iminka shaqeeyo ee loo aqoonsan yahay madaxtinimada doorashada ku habboon iyo xaq u yeesho in uu dhiibto codkiisa.

Active Status - Xaaladda Socota

Eray ay isticmaalaan sarakiisha doorashada marka diiwaanka cod bixiyaha muujiyo in cod bixiyaha uu xaq u leeyahay in uu dhiibto codkiisa. Waxaa dhici karto in xaaadda firfircoon aysan ahayn sax haddii xaqiqada isbaddashay laga bilaabo marka uu cod bixiyaha casriyeyay diiwaankiisa.

Adjudication - Go'aaminta

Habka xallinta warqadaha cod bixinta si loo muujiyo rabitaanka cod bixiyaha. Asbaabta caadiga ay warqadaha cod bixinta u baahan yahiin in go'aan laga gaaro waxaa ka mid ah: magaca lagu qoro warqadda cod bixinta, codadka dheeraadka ee la dhiibto, calaamadda geeska uu mashiinka akhrin karo, in aan la haysanin xullahada tartan la'aanta warqadda cod bixinta oo idil, ama marka mashiinka skiaanka uusan akhrin karin warqadda cod bixinta.

Adjudicated Ballot - Warqadda Cod Bixinta Go'aan Laga Gaaray

Warqadda cod bixinta ee laga helo xulashada tartanka u baahan in go'aan laga gaaro.

Advance(d) Ballot - Warqadda Cod Bixinta Hore

Warqadda codka la dhiibto maalinta doorashada ka hor.

Advisory Board Member - Xubinta Guddiga La Tallinta

Xubin ka tirsan guddiga la tallinta ama fullinta.

Advisory Panel - Guddiga La Tallinta

Koox dadka iyo ururada bixiya waanada sharuud la'aanta la bixiyo lana siiyo maamulka shirkadda, ururka, ama mu'asasada.

Affidavit - Warqadda Dhaarta

Oraah qoran oo lagu xaqiijiyay dhaar ama caddeyn.

Affidavit For Absentee Ballot - Affidafitka Warqada Cod Bixinta Maqanaha

Foomka uu isticmaalo cod bixiyaha si uu u cadsado warqadda cod bixinta maqanaha taasoo lagu xaqiijiyo dhaar ama caddeyn.

Affidavit of Circulator - Affidafitka Wareejiyaha

Oraah qoran oo lagu xaqiijiyay dhaar ama caddeyn uu sameeyo qofka soo aruuriyo saxiixa cod bixiyeyaasha ku qoran cadsiga.

Affidavit of Identity - Affidafitka Aqoonsiga

Warqad ay ku qoran tahay maclumaadka lagu aqoonsan karo qofka oo loo isticmaalo in lagu xaqiijiyo aqoonsigaada ama saxiixaada.

Affidavit of Registration - Affidafitka Diiwaan Gelinta

Warqad laga helo maclumaadka lagu aqoonsan karo qofka oo loo isticmaalo in lagu xaqiijiyo aqoonsigaada ama saxiixaada.

Affiliation - Ka Tirsanaanta

Rasmi ahaan la xariira urur. Tan ku saabsan cod bixinta, tani waxay badaana tixraacdaa cod bixiyeyaasha iska diiwaan geliyay in ay codkooda dhiibtaan iyo rasmi ahaan naftooda la xariiriya xisbi siyaasi oo la aqoosan yahay.

Air gap - Duleelka hawada

Kala saaridda u dhixeyso siistemyada u baahan in xogta lagu dhaqaajiyo habka gacanta, dibadda. Ma jiro heshiis kala dhixeyso internetka ama shabakada jadwalka kale.

Alert time - Waqtiga digniinta

Qiyaasta waqtiga uu qalabka cod bixinta sugi doono hawsha cod bixiyaha la ogaan karo kaddib marka la soo saaro digniin, ka hor inta aan la gelin xaalad aan shaqeyn oo u baahata faragelinta doorashada rasmiga.

Alternative Format - Qaabka Kale

Bixinta siyaabo ka duwan oo lagu helo macluumaad, sida helitaanka warqadda cod bixinta.

Americans With Disabilities Act (ADA) - Sharciga Mareykanka Itaalka Darran

ADA waa sharciga xuquuqda madaniga oo mamnuuca takoorka ka soo horjeedo dadka itaalka darran xagga dhamaan nolosha dadweynaha iyo dhamaan goobaha dadweynaha iyo goobaha gaarka ee u furan dadweynaha guud.

Anonymous Contributions - Ku Biirinta aan la Aqoonin

Deeqda maaliyadda la siiyo obole habbeysan, aan u baahneen kashifaadda qofka ama ururka bixiyay deeqda.

Appeal - Racfaanka

(1) Marka dhinacyada ku lugta leh talaabo ay cadsadaan in madax sare fiiriyaan go'aanka rasmiga. (2) Hab rasmi ah halkas oo EAC laga cadsado in ay dib ugu noqoto Go'aanka Wakaaladda.

Appeal Authority - Awoodda Racfaanka

Qofka ama dadka loo magacaabay in uu u shaqeeyo sida madaxda go'aanka gaarto marka dacwadda laga qaato racfaan.

Appeals Process - Habka Racfaanada

Habka lagu fiiriyo go'aanada kaddib marka la cadsado racfaanka laga qaato go'aanka.

Application for Ballot By Mail (ABBM) - Arjiga Warqadda Cod Bixinta Lagu Dirro Boostada

Warqadda loo isticmaalo in lagu cadsada in codka boostada loogu diro cod bixiyaha.

Appointed At Large - Magacaabid Balaaran

Xubin ka tirsan hay'ad xukunta ee loo magacaabay in ay mattasho xubnaha oo idil ama dad (badanaa magaalo, dagmo, gobol, gobol, qaran, naadi ama urur), baddalkii qeyb hoose.

Appointed Incumbent - Magacaabidda Haayaha Xafiiska

Musharax iminka ka shaqeeya xafiis loo magacaabay oo musharax ka ah in loo doorto isla xafiiska.

Appointed Member - Xubinta la Magacaabay

Xubin ka tirsan Kongreeska ee haaya xafiis loo magacaabay, iyagana iminka yahiin musharax ka qeybgala doorashada isla xafiiska.

Appointed To Serve Until Next General Election - Magacaabay in uu ka Shaqeeyo Ilaa Doorashada Guud ee Xigta

Qofka ay madaxda u magacaawday in uu boos banaan ka buuxiyo xafiis la soo gelin doono cod bixinta doorashada Guud ee xigta.

Appointee - Qofka Loo Magacaabo Shaqo

Qofka madaxda magacaabidda u magacaawday boos ka banaan dawladda.

Appointing Authority - Madaxda Magacaabidda

Sarkaal ama wakaalad awood u leh in ay magacaawdo boosaska adeegga dadweynaha.

Apportionment - Qeybinta

Habka qeybinta xubinimada ama cod bixiyeyaasha.

Appropriation - Qorshaha Maaliyadda

Iskudarka lacagta ama isugeynta hantida loogu talogalay ujeedo khaas ah.

Approval Voting - Ogolaashada Cod Bixinta

Siistemka doorashada halkaas uu cod bixiye kasta xullan karo musharaxiinta, iyo midka ku guuleysto yahay musharaxa ay ogol yahiin tirada ugu bdan cod bixiyeyaasha. Waa ka duwan tahay musharax qaata codadka ugu badan, halkaas uu cod bixiyaha uu hal qorshe ka dooran karo dhowr qorshe, kaddibna la xullan doono qorshaha ugu cod badan.

Assembly - Isu imasha

Magaca la siijo sharci dajinta, khaas ahaan aqalada hoose ama sharci dajinta buuxda ee ka jira gobolada ka tirsan siistemyada federaalka dawladda.

Assembly District - Shirka Dagmada

Mid ka mid ah tiro go'an dagmooyinka uu gobolka u qeybsamo, dagmo kasta hal xubin u doorato sharci dajinta gobolka.

Assembly Member - Xubinta Shirka

Qofka loo doorto ama loo magacaabo aqalka hoose sharci dajinta gobolka.

Assistance to Vote - Kaalmada Cod Bixinta

Cod bixiyeyaasha itaalka darran waxaa loo ogol yahay in ay kaalmo ka qaataan qofka ay doonaan hase ahatee waxaa jira waxyaboo kooban oo ka reeban.

Assistant of Voters - Kaalmeynta Cod Bixiyeyaasha

Shaqaalaha cod bixinta ama qofka uu cod bixiyaha u doorto in uu kaalmeeyo hawsha cod bixinta.

Assistive Technology - Farsamada Taakuleynta

Shay loo isticmaalo in lagu kordhiyo, xajiy, ama lagu hagaajiyo kartida shaqada dadka itaalka darran.

Asymmetric Cryptography - Qarsoodiga Cryptography

Siistemka qarinta loo isticmaalo furaha dadweynaha iyo gaarka si loo qariyo furaha saxiixa digitalka Guud ahaan, furaha gaarka waxaa lagu keydiyyaa shahaadada digitalka isticmaalaha iyo waxaa caadi ahaan loo adeegsadaa in lagu furfuro ama digital ahaan lagu saxiixo xogta. Caadi ahaan, furaha dadweynaha waxaa loo adeegsadaa in lagu qariyo (encrypt) xogta ama in lagu xaqijiyo saxiixa digitalka. Fureyaasha waxaa loo isticmaali karaa in leysku baddalo hadba sida loo baahado, macnaha, furaha dadweynaha waxaa loo adeegsan karaa in lagu furfuro xogta kaddibna furaha gaarka loo leeyahay waxaa loo adeegsan karaa in lagu qariyo (encrypt) xogta.

At Large - Balaaran

Xubnaha idil ama dadka (magaalada, dagmada, gobolka, deegaanka, qaranka, naadiga ama ururka), baddalkii qeyb hoose.

Attest - Marqaati furka

Ahaw marqaati am si rasmi ah u caddeey.

Audio Ballot - Codeynnta Maqalka

Warqadda cod bixinta halkaas oo tiro ka mid ah xafiisyada loo bandhigo cod bixiyaha qaab lagu hadlo.

Audio Format - Qaabka Maqalka

Qaabka muujinta warqadda cod bixinta halkaas oo fursadaha tartanka iyo maclummaadka kale loogu gudbiyo dhawaaqa iyo hadalka.

Audio Function with Headset And Earphones - Shaqada Maqalka ee Madax la Surto iyo Dhagaha Lagu Cubo

Qaabka muujinta warqadda cod bixinta halkaas oo fursadaha tartanka iyo maclummaadka kale loogu gudbiyo dhawaaqa iyo hadalka.

Audio-Tactile Interface (ATI) - Isticmaalka Maqalka-Taabashada

Isku xerka cod bixiyaha ee loo samayay in aan loo baahanin in indhaha lagu akhriyo warqadda cod bixinta. Maqalka waxaa loo adeegsadaa in maclummaad loogu gudbiyo cod bixiyaha, halka kantaroolka taabashada u ogoladaan cod bixiyaha in xullahada warqadda cod bixinta u gudbiyo siistemka cod bixinta.

Audit - Xisaabinta

(1) Habka nidaamsan, madax banaan, qoraal laga reebo ee lagu ogaado ilaa inta sharuudaha la cayimay la buuxiyo. (2) Fiirinta siistemka iyo siyaabaha loo kantaroolo si loo ogaado xaaladda hawlaha iyo sida ay sax u yahiin waxa la soo saaro.

Audit Device - Qalabka Xisaabinta

Qalabka loo xil saaray in si madax banaan loo xaqijiyo ama loo qiimeeyo waxqabadka siistemyada cod bixinta.

Audit Trail - Warqadaha Xisaabinta

Maclummaadka la diiwaan geliyo waqtiyada ay socdaan doorashooyinka si dib loogu dhiso talaabadaha la raaco ama goor dambe loo xaqijiyo talaabadaha la qaaday xagga hababka doorashada iyo siistemka cod bixinta.

Audit Trail for Direct-Recording Equipment - Warqadaha Xisaabinta Qalabka Diiwaan Gelinta Tooska

Daabacaadda warqadaha cod bixinta, ay soo saaraan mashiinada cod bixinta diiwaan gelinta elataroonigga tooska (direct recording electronic) (DRE), ay sarakiisha cod bixinta u adeegsan karaan in ay elataroonig ahaa iyo si dadban u hubiyaan iskudarka xisaabta ku qoran jadwalka.

Auditor - Xisaabiyaha

Qofka ka shaqeeyo xisaabinta qeyb ka mid ah hawsha doorashada.

Authentication - Hubinta

Xaqijinta aqoonsiga isticmaalaha, hawsha, ama waxa uu ka kooban yahay siistemka, badanaa ah shay loo baahan yahay si loogu ogolaado helitaanka ilaha ku jira siistemka maclummaadka balse sidoo kale tixraaca xaqijinta jiritaanka xod bixiyaha ama warqadda cod bixinta.

Authorized Poll Agent - Authorized Poll Agent - Wakiilka Codeynnta la Fasaxay

Gobolada qaar, madaxa guddiga xisbiga habeysan, musharaxa ama guddiga xaafadda ee loo magacaabo in uu kor ka eego doorashada.

Automated Voter Registration - Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha Tooska

Sistemka diwaan gelinta cod bixiyaha halkas cod bixiyeyaasha la ogol yahay la siiyo fursad ay isku diwaan geliyan in ay elataroonig ahaan dhiibtaan codkooda mar kasta ay xariir la sameyaan wakaaladaha dawladda.

Automatic Voter Registration (AVR) - Diwaan Gelinta Tooska Cod Bixiyaha

Sida hoos timaado siistemka diwaan gelinta cod bixiyaha automaatigga, cod bixiyeyaasha xaqa u yeesh waxaa loo diwaan geliya si toos ah in ay dhiibtaan codkooda mar kasta ay la xariiraan wakaaladaha dawladda (tusaale, waaxyada baabuurga).

Availability - Helitaanka

Boqolkiiba waqtiga marka siistemka u shaqeeyo si sax ah lana heli karo si loo isticmaalo.

B

Ballot - Warqadda Cod Bixinta

Bandhigga rasmiga ee dhamaan tartanka loo baahan yahay in go'aan laga gaaro doorashada gaarka. Warqad ama elataroonig ahaan, habka ay cod bixiyeyaasha ku muujiyaan rabitaanka cod bixiyaha.

Ballot Access - Helitaanka warqada cod bixinta

Awoodda lagu calameeyo, dhiibto, si gaar ah loogu xaqijiyo warqadda cod bixinta iyo si madax banaan.

Ballot Board - Guddiga Warqadda Cod Bixinta

Koox dad ay magacaabeen madaxda deegaanka oo loo xil saaray kantaroolka doorashooyinka iyo habka cod bixinta.

Ballot Box - Sanduuqa codadka

Weel niiban ee laga helo warqadaha cod bixinta ay soo gudbiyaan cod bixiyeyaasha.

Ballot Card - Kaarka Warqadda Cod Bixinta

Kaarka ama tirada kaararka lagu daabaco, ama lagu aqoonsado marka la tixraaco warqadda cod bixinta, magacyada musharaxiinta magacaabidda ama doorashada hal xafiis ama ka badan ama magacyada warqadda hal talaabo ama ka badan.

Ballot Cast - Dhiibashada Warqadda Cod Bixinta

Talaabada ugu dambeysu uu cod bixiyaha qaado xagga xullahada qorshooyinka kaddibna ku xaqijiyo rabitaanka cod bixinta sia uu xushay. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah marka cod bixiyaha uu warqadda cod bixinta ku riddo sanduuqa warqadda cod bixinta, sanduuqa warqadaha boostada lagu riddo, sanduuqa lagu riddo ama elataroonig ahaan la gudbiyo si loo geliyo jadwalka.

Ballot Configuration - Qaabka Warqadda Cod Bixinta

Tartanada qaar ee ka muuqda warqadda cod bixinta la xariirta dagmada doorashada, sida ay isugu xigaan, liiska boosaska cod bixinta tartan kasta iyo isku duubidda magacyada boosaska warqadaha cod bixinta.

Ballot Counter - Tiriyya Warqadda Cod Bixinta

Farsamo ku jirta qalabka cod bixinta oo tirisa codadka la dhiibtay doorashada. Tani waxay kaloo tixraaci kartaa qofka gacanta ku tiriya codka.

Ballot Counting Logic - Tirinta Loojigga Warqadda Cod Bixinta

Loojigga ee sifeysa isu keenidda qalabka cod bixiyaha, kuwa shaqeeyaa iyo kuwa aan shaqeeyin ee la xariira warqadda cod bixinta iyo loo adeegsado sida leysugu darro xullahada cod bixinta doorashada.

Ballot Data - Xogta Warqadda Cod Bixinta

Liiska tartanada iyo fursadaha la xariira ee ka muuqan kara warqadda cod bixinta doorashada.

Ballot Designation - Nidaamka Warqadda Cod Bixinta

Sharaxaadda, magaca ama mansabka rasmiga lagu daabacay meesha ka hooseyso magaca musharaxa warqadda cod bixinta. Waxaa ka mid noqon kara xisbiga siyaasadda musharaxa ama xaaladda sarkaalada iminka haaya booska

Ballot Drop Box - Sanduuqa Lagu Rido Warqadda Cod Bixinta

Weel xeran, ha ahaado gudaha ama dibadda, halkaas ay cod bixiyeyaasha ku soo noqon karaan warqadda cod bixinta maqanaha si uu sarkaalka doorashada uu toos u soo aruuriyo.

Ballot Envelope - Bakhshadda Warqadda Cod Bixinta

Gudaha iyo Dibadda bakhshadaha loo adeegsado in lagu qaado warqadaha cod bixinta maqanaha iyo lagu diro boostada.

Ballot Exhaustion - Dhamaadka Warqadda Cod Bixinta

Waxay tixraacdaa xullah sho la kala saareysiyyat tartanka warqadda codbixinta, marka warqaddaas codbixinta aysan shaqeeyin kaddibna aan loo gudbin karin jadwalka tartanka maxaa yeelay ma jiraan kala sareysiin shaqeyn karto oo lagu sameeyo warqadda codbixinta si loo sii wado fursadaha tartanka sii socda.

Ballot Fatigue - Daalka Warqadda Cod Bixinta

Dhacdo lala kulmo marka cod bixiyeyaasha go'aan ku gaaraan in aysan codkooada ka dhiibarin tartanada ama arrimaha goor dambe ka soo baxa warqadda cod bixinta.

Ballot Format - Qaabka Warqadda Cod Bixinta

Bandhigidda rasmiga waxa ku jira warqadda cod bixinta ku habboon farsamada cod bixinta la isticmaalo. Waa la hagaajin karaa waxa ku jira marka la isticmaalo habab kala duwan oo lagu soo bandhiggo (muuqaal ama maqal), luqadda, ama graafig.

Ballot Harvesting - Soo Saaridda Warqadda Cod Bixinta

Falka aruurinta warqadaha cod bixinta, caadi ahaan uu sameeyo xisbi siyaasi ama urur aan fa'iido doonin, oo loogu talogalay cod bixiyeyaal badan kaddibna warqadahaas cod bixinta lagu soo celiyo xafiiska doorashooyinka iyadoo la mattalaayo cod bixiyeyaashaas. Sharciga dhaqankaan waxay ku kala duwan yahiin gobolka, gobolada qaar waa ogol yahiin dhaqanka, kuwaasoo yareyay cidda soo celin karta warqadaha cod bixinta dad kale ama si dhamaystiran u joojiya dhaqanka.

Ballot Image - Sawirka Warqadda Cod Bixinta

Xogta elataroonig ahaan la soo saaro ee dhamaan codadka uu dhiibtay hal cod bixiye. Sidoo kale, macnaha wuxuu noqon karaa sawirka digitalka ee warqadda cod bixinta la dhiibtay uu qabtay siistemka cod bixinta ama qalabka jadwal gelinta warqadda cod bixinta.

Ballot Instructions - Tilmaamaha Warqadda Cod Bixinta

Macluumaadka la siiyo cod bixiyaha ee sharaxa hababka calaameynta warqadda cod bixinta. Macluumaadkaan wuxuu toos uga muuqan karaa warqadda cod bixinta ama elataroonigga ama waxaa loo bixin karaa si gaar ah.

Ballot Label - Sumadda Warqadda Cod Bixinta

Qeypta qoraalada cod bixinta ee laga helo macluumaadka ku saabsan cod bixiyeyaasha, musharaxiinta, warqadaha

cod bixinta, tartanada xogta doorashada kale.

Ballot Layout - Qaabka Warqadda Cod Bixinta

Sida habboon ee loo bandhigo waxa ku qoran warqadda cod bixinta ku habboon farsamada cod bixinta la isticmaalo. Qoraalada waxaa lagu muujin karaa waxa ku qoran marka la isticmaalo hababka kala duwan ee loo bandhigo (muuqaalka ama maqalka), luqadda ama sawirada.

Ballot Manifest - Muujinta Warqadda Cod Bixinta

Kataloogga ay diyaariyaan sarakiisha doorashada ee soo qora dhamaan warqadaha cod bixinta iyo meelaha laga helo oo isku xiga. Tani waa qodob loo baahan yahay si loo fulliyo Xisaabinta Yareysa Halista (Risk Limiting Audit) balse waxaa loo isticmaali karaa in lagula socdo warqadaha cod bixinta kaddibna xisaabinta xogta lagu fulliyo noocyada kale xisaabinta xogta.

Ballot Marking Device - Qalabka Warqadda Cod Bixinta

Qalab ogolaada suurtogeliya in fursadaha tartanka lagu fiiriyo xariirinta elataroonigga, wuxuu soo saaraa warqadda cod bixinta aadanaha-akhri karo, mana ka sameeyo qoraal weligii jira oo ku saaabsan xulashooyinka cod bixiyaha.

Ballot Measure - Cabbirka Warqadda Cod Bixinta

(1) Su'aasha ka muuqata warqadda cod bixinta si loo ogolaado ama loo diido. (2) Tartanka cod bixinta halkaas uu cod bixiyaha dhiibin karo haa ama maya.

Ballot on Demand - Warqadda Cod Bixinta La Dalbaday

Habka soo saara warqadda cod bixinta ee nooca warqadda loo baahan yahay iyo tartanka iyo musharaxiinta u gaarka ah cod bixiyaha. Habkaan wuxuu u baahan yahay siistem iyo mashiinka daabaca oo samayn karo warqadaha cod bixinta iyo qalabka iyo dhamaan xogta loo baahan yahay si loo daabaco warqadda cod bixinta la xariirta cod bixiyaha. Xasuusin: "warqadda cod bixinta la dalbado" waa shabadda ganacsiga ku jirta diiwaanka ee ES&S, balse waa eray badanaa loo isticmaalo siitemyada la midka ah.

Ballot Order - Dalabka Warqadda Cod Bixinta

(1) Nidaamka ay tartanada iyo musharaxiinta uga muuqdaan warqadda cod bixinta. Waa isbaddali karaa habka musharaxiinta iyo arrimaha uga muuqdaan warqadda cod bixinta gobol ilaa gobol. (2) Erayga la adeegsado marka sarkaalka doorashada codsado daabacaadda warqadda cod bixinta si uu u daabaco tiro cayiman warqadaha cod bixinta.

Ballot Pamphlet - Buugyarahaa Warqadda Cod Bixinta

Macluumaad rasmi ah oo ku saabsan warqadaada cod bixinta lagana soo saaro xafiiska doorashooyinka, badanaa loo yaqaan hoggaaminta macluumaadka cod bixiyaha.

Ballot Pickup - Qaadashada Warqadda Cod Bixinta

Waxaa loola jeedaa falka lagu soo aruuriyo warqadda cod bixinta maqanka ama warqadda cod bixinta lagu soo diro boostada, baddalkii lagu soo celin lahaa sanduuqa lagu riddo.

Ballot Position - Booska Warqadda Cod Bixinta

Meel ka cayiman gudaha warqadda cod bixinta halkaas oo xullahada cod bixiyaha tartan khaas ah la tilmaamo. Waxaa dhici karto in boosaska la xariiraan nambarada safka iyo tiirka ee ku yaal wijiga mashiinka cod bixinta ama warqadda cod bixinta, gaar ahaan boosaska "bit" marka laga hadlo diiwaanka labo labada (binary) ee warqadda cod bixinta (tusaale ahaan, sawirka warqadda cod bixinta elataroonigga ama mid si kale ula mid ah. Boosaska warqadda cod bixinta waxay ku xeran yahiin tartanada qaar iyo magacyada musharaxa ku qoran warqadda cod bixinta.

Ballot Preparation - Diyaarinta Warqadda Cod Bixinta

Xullahada tartanada qaar iyo su'aalaha la geliyo qaabka warqadda cod bixinta iyo tilmaaaha la xariira; diyaarinta iyo

tijaabinta brograamka u gaarka ah tijaabinta doorashada ee laga helo xullashadaan; soo saarka dhamaan qaababka warqadda cod bixinta; iyo hubinta in ay sax yahiin warqadaha cod bixinta iyo brograamyada laga helo xullashooyinkaan la xariira doorashada soo socoto.

Ballot Production - Soo Saarka Warqadda Cod Bixinta

Habka lagu soo saaro warqadaha cod bixinta ee loo soo bandhigo cod bixiyeyaasha, tusaale ahaan, daabacaadda warqadaha cod bixinta, ama habeynta bandhigga warqadaha cod bixinta si loo muujiyo bandhigga elataroonigga.

Ballot Question - Su'aasha Warqadda Cod Bixinta

Taloooyinka la soo jeediyi si loo hirgeiyo sharchiyo cusub ama wax lagaga baddalo dastuurka si ay u ogoladaan ama diidaan cod bixiyeyaasha.

Ballot Remake - Dib u Samaynta Warqadda Cod Bixinta

Warqadda cod bixinta lagu baddalo warqadda cod bixinta hallowday ama qeyb ahaan shaqeynin - badanaa dib loo sameyay hab la sharchiyeay halkas oo codadka laga soo qaaday warqadda cod bixinta halowday ama qeyb ahaan aan shaqeynin laga sameeyo koobi loo wareejiyo warqad cod bixin kale uu skaanarka ku buuxin karo jadwalka.

Ballot Rotation - Wareegga Warqadda Cod Bixinta

Habka baddalaadda nidaamka magacyada musharaxiinta ku jira tartanka. Dhaqankaan wuxuu isku baddalaa gobol.

Ballot Scanner - Skaanka Warqadda Cod Bixinta

Qalabka loo adeegsado in lagu akhriyo xogta xullahada cod bixiyaha lagana soo qaado.

Ballot Secrecy – Qarsoodiga Warqadda Cod Bixinta

Sharchiyyada iyo hababka lagu dhiso xuquuqda aasaasiga ay leeyahiin cod bixiyeyaasha Mareykanka in ay si qarsoodi au dhiibtaan codkooda. Hababkaan waxay hubiyaan in aysan jirin warqad lala xariirin karo cod bixiyaha, taasoo u ogolaata in cod bixiyeyaasha in ay si madax banaan u calameyaan warqadahooda iyagoo aan ka cabsanin in laga daba qaato ama laga aar goosto.

Ballot Stub - Ballot Stub Jeexa Warqadda Cod Bixinta

Jeex yar, badanaa ku taal dhanka kore warqadda cod bixinta, oo dulleesha kuna qoran macluumaad ku saabsan warqadda cod bixinta sida nambarka serialka, taariikhda cod bixinta, iyo maamulka meesha lagu qabto doorashada.

Ballot Stuffing – Buuxinta Warqadda Cod Bixinta

Ficilka dhiibashada codadka sharci darrada ama gudbinta in ka badan hal warqad cod bixin marka la ogol yahay hal warqad cod bixin halkii cod bixiye.

Ballot Style - Habka Warqadda Cod Bixinta

Warqadda cod bixinta la raaciyo tartanada iyo musharaxiinta xaafadda. Noocyada warqadda cod bixinta waa isbaddalaan taasoo ku saleysan isku keenidda tartanada iyo xisbiga qofka raacsan yahay (doorashooyinka musharaxiinta xisbiyada), ee loo ogol yahay in laga qeybgalo. Noocyada warqadda cod bixinta ku saleysan tartanada cod bixiyeyaasha loo ogol yahay in ay codkooda ka dhiibtaan iyo, doorashooyinka musharaxiinta xisbiyada, xisbiga ay raacsan yahiin.

Ballot Title - Magaca Warqadda Cod Bixinta

(1) Soo koobidda gaaban ee rasmiga ah ee warqadda cod bixinta ee ka muuqata warqadda cod bixinta. (2) Magaca warqadda cod bixinta waxaa ka mid ah taariikhda cod bixinta iyo nooca (Khaas, Doorashada Musharaxiinta Xisbiyada, ama Guud) ee doorashada.

Ballot Types - Noocyada Warqadda Cod Bixinta

Warqadda cod bixinta la raaciyo tartanada iyo musharaxiinta xaafadda. Noocyada warqadda cod bixinta waa

isbaddalaan sida ku saleysan isku keenidda tartanada iyo ka tirsanaanta xisbiga (doorashada musharaxiinta xisbiga), ay cod bixiyeyaasha xaq u leeyahiin in ay ka qeybgalaan.

Barcode

Bandhigga aragga iyo mashiinka akhrin karo lana xariira xogta sida xariiqan iyo boosas isku xiga oo waafaqsan heerarka la ogol yahay. Koodka QR waa tusaale ku waabsan "barcode".

Barcode Reader - Akhriyaha Barkoodka

Qalab loo isticmaalo in skaan la marriyo barkoodyada kaddibna macluumaadka ku jira koodka u baddala qaab la isticmaali karo. Akhriyaha barkoodka waxaa loo adeegsadaa in skaanka la marriyo koodka qoraalo kala duwan oo ku saabsan doorashada kana mid ah warqadaha cod bixinta, shattiyada wadaha, kaararka aqoonsiga cod biyaha (ID), kaararka cod bixiyaha (ID), warqadaha macluumaadka cod bixyaha, bakhshadaha, iyo warqadaha kale ee doorashada.

Baseline Voting - Cod Bixinta Aasaasiga

Isbaddalka codka uu ku guuleysto musharaxa helo codadka ugu badan. Tartanada halka kursi, cod bixiyaha wuxuu xullan karaa hal tartan keliya. Tan ku saabsan tartanada kuraasta badan, cod bixyaha wuxuu dooran karaa ilaa tirada taranada lagu tilmaamay warqada cod bixinta.

Batch - Tirada

Isku keenidda warqadaha cod bixinta oo koox ahaan loo soo aruuriyo si loo geliyo jadwalka lonaa xisaabo.

Batch-fed scanner - Skaanka la Geliyo Warqadaha Badan

- Qalabka cod bixinta elataroonigga oo;
- qabta xermooyin ka kooba warqadaha gacanta lagu calameyay ama warqadaha cod bixinta BMD soo saartay kaddibna si toos ah looga shaqeeyo ilaa xermada ka dhamaato;
- badanaa waxaa loo isticmaalaa goobta dhexe maamulka doorashada;
- waxaa inta badan loo isticmaalaa in laga shaqeeyo warqadaha cod bixinta maqanaha.
- badanaa wuxuu leeyahay weelasha lagu shubo ama laga shubo warqadaha cod bixinta;
- wuxuu skaan ku sameyaa kaddibna diidaa haddii aan la akhrin karin ama aan laga shaqeyn karin;
- arka, tarjama, iyo xaqiijiya xulashooyinka tartanka;
- arka iyo kala saara (ha ahaato digital ahaan ama muuqaal ahaan) warqadaha cod bixinta aan la akhrin karin ama aan laga shaqeyn karin, ama
- laga helo xulashooyin aan la ogaan karin, calaameeyo waxyaabaha laga dhaaf, ama waxa lagu qoro warqadda cod bixinta; iyo
- jadwalka ku qoraa kaddibna soo gudbiyaa natijadaha tartanka hadba sida loogu baahdo.

Benchmark - Bartilmaameed

Tirada dhibicda tixraaca ee la barbar dhigi karo waxqabadka la cabbiray ee siistemka ama qalabka.

Bicameral - Labo qol

Ururuka sharci dajinta ee ka kooban labo laan ama qol.

Biennial - Labo sanno kasta

La fulliyo sannad ku dhaaf. Doorashooyinka federaalka waxaa la qabtaa labadii sanno hal mar sanooyinka tabanaha.

Biennium - Muddo labo sanno

Muddo labo sanno oo la cayimay.

Bilingual Requirements - Sharuudaha Labada Luqad

Liiska sharciyada iyo xeerka go'aan ka gaara qoraalada doorashada u baahan in lagu diyaariyo luqado aan ahayn Ingiriisi.

Blank Ballot - Warqadda Cod Bixinta Banaan

Warqadda cod bixinta la soo saaro iyadoo aan la haysanin xullasho.

Blank Space - Booska Banaan

Caadi ahaan meel ka tirsan warqadda cod bixinta ay cod bixiyeyaasha u isticmaalaan in ay ku qoraan magaca aan horay magaca musharaxa kale loogu daabiciin warqadda cod bixinta tartankaas.

Blanket Primary - Ruqsadda Cod Bixinta Musharaxiinta Xisbiyada

Doorashada musharaxiinta xisbiyada, halkaas uu cod bixiyaha u codeyn karo musharaxiinta xisbi kasta, iyadoo aan la fiirinin xisbiga siyaasiga uu raacsan yahay cod bixiyaha ama ay raacsan yahiin musharaxiinta.

Blind - Cammo

Aad u kooban ama la'aanta aragga.

Block Voting - Cod Bixinta Koox

Sistemka cod bixiyaha ku xullan karo musharaxiin badan sida kuraasta furan.

Board (Election) - Guddiga (Doorashada)

Koox dad oo wada shaqeeyo si ay u dhamaystiraan hawsha doorashada. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah Guddiyada Xaafadda (Precinct Boards), Guddiyada Canvassing, Guddiyada Xisaabinta (Auditing Boards), iyo kuwo kale.

Board of Canvassers - Guddiga Aruurinta Fikradaha Dadka

Koox dad oo wada shaqeeyya, oo raaca shariyo gaar ah iyo habab, in ay buuxiyaan, fiiriyaan, iyo hubiyaan qoraalada doorashada.

Board of Commissioners - Guddiga Guddoomiyeyaasha

Qeyb ka tirsan dagmada gobolo badan oo ku yaal Mareykanka, khaas ahaan gobolada dhexe iyo Bariga, oo ka kooban xubnaha ay doorteen cod bixiyeyaasha.

Board of Directors - Guddiga Agaasimeyaasha

Guddiga maamusha arrimaha hay'adda ama dawladda hoose.

Board of Elections - Guddiga Doorashooyinka

Caadi ahaan, koox ay magacaabeen madaxda deegaanka, oo loo xil saaray kantaroolka doorashooyinka iyo hababka doorashada.

Board of Registrars - Guddiga Diiwaan Geliyeyaasha

Caadi ahaan, koox dad ay magacaabeen madaxda deegaanka, oo loo xil saaray kantaroolka doorashooyinka iyo cod bixinta.

Board of Supervisors - Guddiga Kormeereyaasha

Dawladda dagmada ee ka jirta gobolo badan oo ku yaal Mareykanka, khaas ahaan Galbeedka, oo ka kooban xubno ay doortaan cod bixiyeyaasha.

Bond - Damaanadda

Deybta uu soo saaraha loo fasaxay ka qabo kuwa qaataay deyn oo waajib laga dhigay in taariikh dambe la bixiyo raasumaalka iyo kor socodka. Su'aalaha damaanadda waxaa lagu qori karaa warqadaha codbixinta si loo ogolaado ama loo diido damaanadda iyo, haddii ay ogoladaan cod bixiyeyaasha waa in dib loo bixiyo taasoo loo adeegsado aruurinta canshuurta hantida ma guuraanka ee ku yaala maamulka, dugsiga dagmada, ama dagmada khaaska. Su'aalaha ku saabsan warqadaha cod bixinta waxaa la gelin karaa warqadaha cod bixinta Gobolka oo idil, deynta dib

loogu bixiyo canshuurta ama khidmadaha laga aruuriyo Gobolka.

Bond Election - Doorashada Damaanadda

Doorashada marka la soo jeediyu talo u ogolaata gobolka ama dawladda hoose in ay ogolaato kharash dheeraad ah halkas oo deynta iyo waajibka saaran dib loo bixiyo lana raaciyo korsaarka la soo geliyo warqadda cod bixinta cod bixiyeyaasha si ay go'aan uga gaaraan.

Bond Issue - Arrinta Damaanadda

Talo u ogolaato gobolka ama dawladda hoose in ay ogolaato kharash dheeraad oo dib loogu bixiyo deynta iyo waajibka iyo korsocodka.

Bond Proposition - Soo Jeedinta Damaanadda

Marka gobolka ama dawladda hoose ay codbixiyeyaasha soo hordhigto su'aal sida talaabada warqadda codbixinta, oo iyaga weydiisa in ay ogoladaan kharashka dheeraadka la soo jeediyay marka la isticmaalo damaanad.

Bond Referendum - Aftida Deynta

Soo jeedin si looga noqdo sharci gasaxa damaanad ay horay u hirgelisay dawladda, iyo lagu soo qoray warqadda cod bixinta si ay cod bixiyeyaasha u ogolaadaan ama diidaan.

Borough - Tuulada

Tuulo, magaalo, ama qeyb ka tirsan magaalo weyn oo qabta dawlad u gaar ah.

Boundary Line - Xariiqanta Xadka

Khadka kala qeybiya xaafadda, magaalada, ama unug kasta oo siyaasad ku dhisan.

Braille Voting Instructions - Tilmaamaha Cod Bixinta Braille

Tilmaamaha cod bixinta ku qoran xarfaha lagu mattalay dhibcaha kor u soo baxsan ee lagu akhriyo taabashada.

Butterfly Ballot - Warqadda Cod Bixinta Nooca Tixsiga

Warqadda cod bixinta halkas ay musharaxiinta ku qoran yahiin dhanka hoose labada dhinac warqadda cod bixinta, iyo hal tiir oo ku yaal bartamaha laguna qoro kuwa la xusho.

C

Call an Election - Dalabka Doorashada

Marka madaxda dawladda loo fasaxay ku dhawaqdo in la qaban doono doorashada waqtii cayiman.

Campaign - Ololaha

Taxane hawlaho dimoqraatiga oo qalqaalisa codka siyaasadda oo taageersan ama ka soo horjeeda musharaxiinta ama su'aalaha warqadda cod bixinta.

Campaign Contributions - Ku Biirinta Ololaha

Shay kasta oo qiimo leh oo la bixiyay, la deymiyay, ama la hormariyay si loo qalqaaliyo codka siyaasadda raacsan ama ka soo horjeedo musharaxiinta ama su'aalaha warqadda codbixinta.

Campaign Disclosure - Kashifaadda Ololaha

Ficilka soo sheegidda ku deeqidda ololaha.

Campaign Expense Report - Warbixinta kharashka Ololaha

Warbixin tafatirta kharashka siyaasadda oo loo baahan yahay in ay gudbiso maamulka dawladda.

Campaign Finance - Ololaha Maaliyadda

Ficilka kor u kicinta iyo maaliyadda oo loo isticmaalo ujeedooyinka siyaasadda.

Campaign Finance Disclosure Statements - Wararka Kashifaadda Maaiyadda Ololaha

Warbixinada ee tafatira ku biirinta siyaasadda iyo kharashka loo baahan yahay in ay gudbiyaan madaxda.

Campaign Finance Laws - Sharciyada Maalgelinta Ololaha

Sharciyo tafatira sharciyada iyo xeerka lagu soo aruuriya maaliyadda iyo kharashka iyo deeqda loo adeegsado ujeedooyinka siyaasadda.

Campaign Finance Report - Warbixinta Maaliyadda Ololaha

Warbixinada ee tafatira ku biirinta siyaasadda iyo kharashka loo baahan yahay in ay gudbiyaan madaxda.

Campaign Finance Reporting Requirements - Sharuudaha Sheegidda Maaliyadda Ololaha

Sharuudo tafatira sharciyada iyo xeerka lagu soo aruuriya maaliyadda iyo kharashka iyo deeqda loo adeegsado ujeedooyinka siyaasadda.

Campaign Materials - Qoraalada Ololaha

Warqadaha, ilaha iyo qoraalada kale ee loo isticmaalo in la qalqaaliyo codka siyaasadda lagu taageero ama ka soo horjeedo musharaxiinta ama su'aalaha warqadda cod bixinta. Qoraalada ololaha waxaa ka mid noqon kara shaararka-t, battanada, stikarada bambarka, calaamadaha deydka, iyo qoraalada kale ee la daabacay.

Campaign Signs - Calaamadaha Ololaha

Calaamad xayysiiso cod gaar ah.

Cancellation Notices - Ogeysiisyada Joojinta

Fariimaha qoran oo loo diro cod bixiyeyasha si loo ogeysiyo in laga saaray liisaska diiwaan gelinta cod bixiyaha.

Cancellation of Registration - Joojinta Diiwaan Gelinta

Ficilka cod bixiyaha laga qaado liiska diiwaan gelinta cod bixiyaha.

Cancelled Voter Status - Joojinta Xaaladda Cod Bixiyaha

Eray ay isticmaalaan sarakiisha doorashada marka diiwaanka cod bixiyaha muujiyo in cod bixiyaha laga saaray liisaska cod bixinta.

Candidacy - Musharaxnimo

Xaaladda ahaashada musharax.

Candidate - Musharax

Qof raadsada magacaabid ama in loo doorto xafiis oo la kulmay sharuudaha sharciga in magaciisa/magaceeda lagu daabaco warqadda cod bixinta ama xaq u leh in magaciisa ama magaceeda lagu qoro warqadda cod bixinta lana tiriyo sida cod bixiyaha u doort tartanka. Xasuusin - maaliyadda ololaha federaalka iyo gobolada qaar ma u baahna in qofka uu soo gudbiyo codsiyo uu musharaxa u baahan yahay in uu tixgeliyo. Aruurinta lacag keli ahaan waxay kaa dhigi kartaa musharax.

Candidate Committee - Guddiga Musharaxa

Koox dad oo loo abaabulay ujeedooyin la xariira siyaasadda si loo taageero ama looga hor yimaado musharaxiinta xafiiska dadweynaha.

Candidate Nomination Procedures - Hababka Magacaabidda Musharaxa

Hababka rasmiga ee lagu soo jeediyo in qof uu qabto xafiiska dadweynaha.

Candidate Petitions - Codsiyada Musharaxa

Warqad rasmi ah oo qoran ay soo saxiileen cod bixiyeyaasha si ay u cadsadaan in magacyada musharaxiinta lagu qoro warqadaha cod bixinta.

Candidate Registration - Diiwaan Gelinta Musharaxa

Ficilka dhamaystirka warqadaha loo baahan yahay si qofka uu u noqdo musharax la caddeeyay oo u taagan xafiis dadweyne.

Candidate Roster - Diiwaanka Musharaxa

Liiska rasmiga musharaxiinta

Candidate Statement - Bayaanka Musharaxa

Soo koobid qoran oo ku saabsan maclumaadka ku saabsan musharaxa u taagan xafiiska dadweynaha si loo qalqaaliyo cod bixiyeyaasha.

Candidate Withdrawal - Ka Noqoshada Musharaxa

Marka qofka ku dhawaalo musharaxnimo ama doono in la soo doorto balse goor dambe go'aan ku gaaro - sida uu doorto - in uusan ka soo qeyb gelin warqadda cod bixinta ugu dambeyso.

Candidate Withdrawal Periods - Waqtiyada Ka Noqoshada Musharaxa

Muddada waqtiga marka qofka uu magaciisa ka saari karo liiska musharaxiinta u taagan xafiiska dadweynaha.

Candidates List - Liiska Musharaxiinta

Liiska rasmiga ee dhamaan musharaxiinta xafiiska dadweynaha ee loo diyaariyay doorashada.

Canvass - Doonista Codadka

(1) Ka daridda ama xaqijinta warqad codbixin kasta oo la tiriyo, kana mid ah maqanaha, cod bixinta hore, Maalinta Doorashada, ku meel gaarka, ka hortagga, iyo mideynta iyo muwaadinka dibadda. (2) Raadso codad.

Canvass Report - Warbixinta Raadinta Codadka

Warbixin tafatiran oo ku saabsan hawlaho iyo maclumaadka la xariira tirinta doorashada.

Canvassing Board - Guddiga Xariirka Tooska

Koox dad oo wada shaqeeyaa, raaca sharchiyo iyo habab cayiman, in ay diyaariyaan, fiiriyaan iyo ansixiyaan qoraalada doorashada.

Carry an Election - Doorashada Sii Socoto

Si aad ugu guuleysatid doorashada.

Cast - Dhiibashada

Talaabada ugu dambeyso uu cod bixiyaha qaado xagga xullashada qorshooyinka kaddibna ku xaqijiyo rabitaanka cod bixinta sia uu xushay.

Cast Ballot - Dhiibashada Warqadda Cod Bixinta

Cod bixiyaha wuxuu waqadda cod bixinta ku riday sanduuqa warqadda cod bixinta, sanduuqa warqadaha, sanduuqa lagu riddo ama elataroonig ahaan loo gudbiyay si loo geliyo jadwalka.

Cast Vote Record - Xogta Dhiibashada Cod Bixinta

Qoraalka joogtada ee dhamaan codadka uu soo saaro halka cod bixiye, ha ahaado elataroonig ama qaab kale. Waxaa kaloo loo yaqaan sawirka warqadda cod bixinta marka loo isticmaalo in lagu tixraaco warqadaha cod bixinta elataroonigga.

Cast Your Ballot (Cast Your Vote) - Dhiibo warqadaada Cod Bixinta (Dhiibo Codkaada)

Ficilka cod bixiyaha in uu warqadda cod bixinta oo dhamaystiran ku riddo sanduuqa warqadda cod bixinta, si uu u xaqiijiyo kaddibna xullashooyinka ku qoro shaashadda la taabto ee laga helo goobta cod bixinta, si uu warqadda cod bixinta oo dhamaystiran ugu diro boostad ama sanduuqa lagu riddo ama warqadda cod bixinta oo dhamaystiran uu habka elataroonigga ugu dirro xafiiska doorashooyinka. Marka warqadda cod bixinta la dhiibto, badanaa lama baddali karo.

Catastrophic System Failure - Musiibada Siistemka aan Shaqeeyin

Luminta hawsha ama hawlaha oo idil, sida luminta ama khasaarada aan laga soo kabsan karin ee xogta ama waxtar la'aanta battariyada saaran ee xasuusta yar.

Caucus - Shir

(1) Shir xeran ay isugu yimaadaan koox ka tirsan isla xisbi siyaasi ama koox badanaa isugu yimid in ay xushaan musharaxiinta ama go'aan ka gaaraan siyaasadda. (2) Koox dad oo ku midoobay horumarinta xaajo lagu heshiyay.

Caucus Election - Shrika Doorashada

Shirka ay xubnaha deegaanka ee xisbiga siyaasadda uu diiwaan geliyo waxa ay rabaan marka loo fiiryo musharaxiinta u tartanta xafiiska ama ergada la soo xullay in ay tagaan shirka.

Caucus System - Siistemka Shirka

Sharciyada iyo xeerarka ka dambeeyo habka loo qabto shirka halkaas ay xubnaha deegaanka ee xisbiga siyaasadda iska diiwaan geliyan rabitaankooda musharaxiinta u tartama xafiiska ama xusha ergada timaada shirka.

Central Absentee Precinct - Xaafadda Maqanaha Bartamaha

Xaafadda maganaha bartamaha (central absentee precinct) (CAP) waa xaafad laga dhisay gudah maxkamadda ama dhismo dadweyne kale oo kutaal dagmada ama magaalada si loo tiriyo iyo loo qoro diiwaan gelinta iyo qoraalka warqadaha maqanaha laga dhiibtay dagmada ama magaalada.

Central Committee - Guddiga Dhexe

Abaabulka guddiyada dhexe ama guddiyada fullinta ee xisbiyada siyaasiga dagmada, gobolka, ama qeybaha hoose siyaasadda.

Central Count - Tirinta Dhexe

Falka jadwal gelinta warqadaha laga keeno xaafado badan ee ku sugar goob dhexe.

Central Count Process - Hawsha Tirinta Dhexe

Sharciyada iyo xeerka la raaco marka jadwalka lagu qoro warqadaha cod bixinta laga soo qaaday xaafado badan oo ku yaal goobta dhexe.

Central Count Voting System - Siistemka Cod Bixinta Tirada Dhexe

Siistemka cod bixinta ee jadwalka geliya warqadaha cod bixinta laga soo qaaday xaafado badan ee ka sugar goobo dhexe. Warqadaha codkooda la dhiibtay waxaa dhigaa meel sugar oo ku taal goobta cod bixinta. Warqadaha cod bixinta la keydiyay waxaa loo qaadaa ama loo gudbiyaa goobta tirinta dhexe taasoo soo saarta warbixinta tirada cod bixinta.

Central Counting Station - Goobta Tirinta Dhexe

Goob loo isticmaalo in lagu hubiyo, laga shaqeeyo ama codadka lagu qoro jadwalka laga soo qaado xaafada badan sida goob dhexe.

Central Reporting Device - Qalabka Warbixinta Dhexe

Qalabka cod bixinta elataroonigga oo isu keena kaddibna soo gudbiya iskudarka codka laga soo qaaday xaafado badan oo ku yaal goob dhexe.

Central Voter Register List - Liiska Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha Dhexe

Liiska cod bixiyeyaash ku jira xogta la geliyay kombuyutarka rasmiga, mideysan, kelgii ee cod bixiyeyaasha ku jira diiwaanka.

Centralized Voter Registration Database (CVR) - Xogta Diiwaan Gelinta Xod Bixiyaha Dhexe (Centralized Voter Registration Database) (CVR)

Hal xog, mideysan, rasmi ah, gobolka, oo ku shaqeyso kombuyutar ku saabsan cod bixiyeyaasha ku jira diiwaanka.

Certificate - Shahaado

Warqad rasmi ah oo caddeysa xaqiijo jirta.

Certificate of Circulator - Shahaadada Wareegaha

Oraah qoran uu lagu xaqiijiyo dhaar ama qof uu marqaadi ka yahay kaaso soo aruuriyay saxiixOyada codsiga cod bixiyeyaasha.

Certificate of Election - Shahaadada Doorashada

Oraah qoran oo xaqiijisa in musharaxa loo doortay xafiiska dadweynaha.

Certificate of Error - Shahaadada Qaladka

Bayaan qoran oo tafatira qaladka doorashada.

Certificate of Nomination - Shahaadada Magacaabidda

Oraah qoran oo xaqiijisa in musharaxa uu qaatay mid ka mid ah nambarada ugu sareeyo codadka u tartama xafiiska dadweynaha, taaso badanaa muujisa in ay u gudbi doonaa doorashada guud ama doorashada xad dhaafka.

Certificate of Permanent Disability - Shahaadada Itaal Darrida Joogtada

Foomka uu dhamaystiro aqoonyaanka shattiga haysta ama la caddeeyay, ama wakaaladda loo xil saaray xaqiijinta itaal darrida qofka

Certificate of Registration - Caddeynya Diiwaan Gelinta

Bayaan rasimi ah uu ku dhaartay xafiiska doorashooyinka si uu uga marqaati furo in muwaadinka yahay cod bixiye ku jiro diiwaanka.

Certificate of Restoration - Shahaadada Hagaajinta

Shahaadada ay soo saarto siistemka maxkamadda si loo soo celiyo xuquuqda cod bixinta.

Certification - Caddeyn

Habka uu dhinac saddaxaad ka bixiyo hubaal qoran in badeecada, habka, ama adeegga waafaqsan yahiin sharuudaha la cayimay.

Certification of Election - Shahaadada Doorashada

Oraah qoran oo xaqiijisa in buuxinta jadwalka iyo xariirinta doorashada waa dhamaystiran tahay iyo waa sax.

Certification of Official Election Results - Shahaadeynta Natijadaha Doorashada Rasmiga

Oraah qoran, oo ka marqaati furta in natijadaha ka soo baxay doorashada ahayeen run iyo sax sida waafaqsan dhamaan codadka laga dhiibtay doorashada.

Certification of Signatures - Caddeynta Saxiixa

Oraah qoran oo ka marqaati furta in tirada saxiyyada ku qoran codsiyada ee loo qaataay in ay sax yahiin ama la soo diiday yahiin run iyo sax sida waafaqsan xaqqiqaada

Certification Requirements - Sharuudaha Shahaadada

Sharciyada iyo xeerara xakuma xaaladaha lagama maarmaanka ah si loo caddeeyo doorashooyinka ama hawsha cod bixinta.

Certification Testing - Shahaadada Tijaabinta

Tijaabinta la fulliyo sida hoos timaado hababka qaranka iyo gobolka si loo xaqqiyo waafaqsanaanta sharuudaha siistemka cod bixinta.

Certified Election Results - Natijadaha Doorashada la Caddeyay

Tirinta codbixinta ugu dambeyso uu sarkaalka mas'uulka rasmiga xaqqiyyay in ay tahay run iyo sax si uu u xaqqiyyo in ay yahiin sax.

Certify - Caddeyn

Ficilka dhinac saddaxaad oo hubaal qoran siisa in shayga, habka, ama adeegga waafaqsan yahiin sharuudaha la cayimay.

Chad - Gabal warqad

Gabal yar oo ah warqadda qashinka oo lagu duleeliyo godka kaarka ama sharotada.

Chain of Custody - Sheegashada Haynta

Habka la isticmaalo si loola socdo dhaqaaqa iyo kantaroolka hanti wareegga nolosheeda marka qoraal laga reebo qof kasta iyo urur kasta oo gacanta ku haaya hantida, taariikhda/waqtiga la soo aruuriyay ama la wareejiyay, iyo ujeedada wareejinta.

Challenge - Taxadi

Su'aalidda xaq u yeelashada cod bixiyaha in uu dhiibto warqadda codbixinta, ama in la ogolaado warqadda lana tiriyo.

Challenged Ballot - Taxadiga Warqadda Cod Bixinta

Warqadda codbixinta qofka xaq u yeelashadiisa codka uu su'aal ka soo jeediyay qof kale (caadi ahaan sarkaalka doorashada). Warqadda cod bixinta waxaa la haaya ilaa sababta taxaddiga laga xalliyoo.

Challenged Voter - Cod Bixiyaha Lala Tartamay

Cod bixiyaha xaq u yeelashadiisa in uu dhiibto warqadiisa cod bixinta la su'aalay.

Challenger - Taxadiga

Qofka ama sarkaalka su'aala xaq u yeelashada cod bixiyaha in uu dhiibto warqadda codbixinta, ama in uu ogolaado warqadda codbixinta si loo tiriyo.

Change in Political Affiliation - Isbaddalka Raacidda Siyaasadda

Ficilka cod bixiyaha dib loo diiwaan geliiyay si uu codkiisa u siiyo siyaasadda ama ururka uu jecel yahay oo ka duwan.

Change of Address - Baddalaadda Cinwaanka

Falka diiwaan gelinta cod bixiyaha si uu codkiisa u dhiibto si uu u casriyeyo gurigiisa ama cinwaanka emailka. Cod

bixiyeyaasha waxay kaloo cinwaankooda ka casriyeyn karaan wakaaladaha dawladda la ogol yahay sida Waaxda Baabuurta (Department of Motor Vehicles) iyo Adeegga Boostada Mareykanka (United States Postal Service).

Change of Party - Baddalaadda Xisbiga

Ficilka cod bixiyaha dib loo diiwaan geliyay si uu codkiisa u siiyo siyaasadda ama ururka uu jecel yahay oo ka duwan.

Charter - Dastuur

Warqad ay soo qoreen madaxda sharci dajinta, sida Magaalada ama Dagmada, oo sifeysa sharyada iyo xeerarka hay'addaas.

Charter Amendment - Baddalaadda Dastuurka

Baddalaad lagu sameeyo warqad qoran ay qaateen madaxda sharci dajinta, sida Magaalada Dagmada, oo baddasha habeynta dastuurkeeda.

Check the Box - Calaamee Sanduuqa

Ficilka codka lagu calameeyo warqadda codka

Chief Election Officer - Sarkaalka Madaxa Doorashada

Sarkaalka mas'uulka ka ah kor ka eegidda doorashooyinka maamulka.

Chief Inspector - Madaxa Fattashaadda

Sarkaalka mas'uulka ka ah nidaamka cod bixinta habboon ee ka jira goobta cod bixinta ama hawsha doorashada.

Chief State Election Officer - Sarkaalka Madaxa Doorashada Gobolka

Sarkaalka mas'uulka ka ah kor ka eegidda doorashooyinka gobolka.

Circulate - Wareejin

Ficilka iskudayidda si saxiixyada looga soo aruuriyo cod bixiyeyaasha xagga dadaalka, referendumyada, ama musharaxiinta.

Circulation - Wareejinta

Habka loo soo aruuriyo saxiixyada la xariira dadkaalka, referendumyada ama musharaxiinta.

Circulator - Wareejiyaha

Qofka soo codsiyo u soo bandhigo cod bixiyeyaasha si ay u soo aruuriyaan saxiixyada dadaalka, aftida, ama musharaxiinta.

Circulator Statement - Bayaanka Wareejiyaha

Oraah qoran uu lagu xaqijiyo dhaar ama qof uu marqaadi ka yahay kaaso soo aruuriyay saxiixyada codsiga cod bixiyeyaasha.

Citizen - Muwaadin

Qofka, meesha uu ku dhashay, waddaniyadda, mid ka mid ah ama labada waalid, ama qaadashada dhallashada, la siiyo xuquuq buuxda iyo mas'uuliyad sida xubin ka tirsan qaranka ama bulshada siyaasadda, kana mid ah xaqaa uu u leeyahay cod bixinta haddii si kale uusan u ahayn qof aan xaq u lahayn.

Citizen Initiatives - Dadaalka Muwaadinka

Habka ay muwaadiniinta si toos ah sharciga ugu soo jeedin karaan hay'adda xakunta.

City - Magaalo

Urur ka tirsan isutagga dawladda hoose oo ka tirsan gobol.

City Charter - Dastuurka Magaalada

Warqad qoran ay soo saarto Magaalada taasoo sifeysa sharchiyada iyo xeerka hay'addas.

City Clerk - Karaaniga Magaalada

Sarkaalka magaalada ee mas'uulka ka ah maamulka doorashada magaalada.

City General Municipal Election - Doorashada Guud Dawladda Hoose ee Magaalada

Doorashada caadiga musharaxiinta iyo talaabadaha laga qaado gudaha magaalada.

City Ordinance - Ammarka Magaalada

Sharciga ay magaalada soo gudbiso.

City Special Municipal Election - Doorashada Khaaska Dawladda Hoose ee Magaalada

Doorashada la qabtay marka laga reebo doorashada musharaxiinta xisbiyada ama doorashada guud ee ka jira gudaha magaalada,

Claim of Conformance - Sheegashada la Kullanka Heerarka

Bayaanka iibiyaha ku dhawaaqa in maadada waafaqsan tahay heerka ama heerarka; xagga siistemyada cod bixinta, sifooinka NASED ama caddynta EAC waxay bixisaa xaqiijin madax banaan oo ku saabsan sheegashada.

Clerk - Karaani

Sarkaalka mas'uulka ka ah in uu maamulo doorashada ama hawsha doorashada.

Clerk of Absentee Voting - Karaaniga Cod Bixinta Maqanaha

Sarkaal mas'uul ka ah in uu kormeero cod bixinta maqanaha ama qeyn ka mid ah cod bixinta maqanaha.

Close of Registration - Xeritaanka Diiwaan Gelinta

Maalinta ugu dambeyso uu muwaadinka isdiiwaan gelin karo si uu codkiisa u dhiibto ama u casriyeyn karo diiwaan gelinta codkiisa ka hor inta aan la qabanin doorashada.

Closed Primary - Xeritaanka Doorashada Musharaxiinta Xisbiyada

Doorashada musharaxiinta xisbiyada ee cod bixiyeyaasha la siiyo liiska warqadda codbixinta musharaxiinta u tartanta xafiiska xisbiga siyaasiga ay cod bixiyeyaasha ka tirsan yahiin. Gobolada qaar, waxaa lagu darri karaa tartanada aan xisbiga ku dhisneen iyo arrimaha la xariira warqadda cod bixinta.

Code of Conduct - Xeerka Asluubta

Sharchiyo soo taxa nidaamka, sharchiyada, iyo mas'uuliyadda ama dhaqanka habboon qofka ama ururka.

Code of Conduct of Elected Officials - Xeerka Asluubta Sarakiisha la Doortay

Sharchiyo soo taxa nidaamka, sharchiyada, iyo mas'uuliyadda ama dhaqanka habboon saraakiisha doorashada.

Combined Precinct - Xaafadda Leysu Geeyay

Labo xaafad ama ka badan oo loola dhaqmo sida hal xaafad u taagan doorashada.

Commercial Off-The-Shelf (COTS) - Tijaarada Badeecada Dukaanka Taal (Commercial Off-The-Shelf) (COTS)

Brograamka, qalabka ku shaqeeyo brograamka, qalabka, ama qeybta ay dad badan ama urururo kala duwan adeegsadaan Mareykanka xagga brograamyo badan oo kala duwan marka laga reebo siistemyada cod bixinta la xaqiijiyay ee la geliyay siistemka cod bixinta iyadoo aan waxba laga baddalin brograamka ama soo saaraha.

Common Data Format - Qaabka Xogta Caadiga

Heerka iyo ku celcelinta keydinta iyo abuurista xogta, loo sharaxay qaab ay akhrin karaan siisteymyada kale.

Common Industry Format (CIF) - Qaabka Heerka Ganacsiga Caadiga

Wuxuu tixraacaa qaabka lagu sharaxay ANSI/INCITS 354-2001 "Qaabka Warshadaha Caadiga" ("Common Industry Format) (CIF) oo loo adeegsado Warbixinta Tijaabinta Iisticmaalka (Usability Test Reports").

Component - Qeyb

Shayga ku jiro siistemka balaaran; qeybta waxay ahaan kartaa qalab ama brograam. Xagga qalabka, waa qeyb ka tirsan siistem hoose oo loo isticmaali karo in lagu dhiso siistemyo balaaran (tusaale, boorarka fiilada, modeemyada gudaha, maskaxda, xasuusta kombuyutarka). Xagga brograamka, waa luqad ka tirsa koodka la fullin karo ee fullin karo shaqo si wanaagsan loo cayimay iyo la shaqeeyo qeybo kale.

Computer Judge - Garsooraha Kombuyutarka

Shaqaalah doorashada xarunta ee hubiya aqoonsiga cod bixiyaha (ID) iyo saxixa, iyo ka shaqeeyo cod bixiyaha buugga doorashada elataroonigga.

Conditional Voter Registration - Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha ku Xeran Shardi

Gobolada qaar waxay isticmaalaan erayaan si ay u sifeyaan talaabada qofka iska diiwaan geliya iyo dhiibta cod ku meel gaar ah kaddib marka waqtiga dhamaado, balse xaq u yeelashadiisa ama xaaladda diiwaan gelinta aan la xaqijin karin marka ay u yimaadaan in ay codkooda dhiibtaan.

Conduct an Election - Fullinta Doorashada

Ficilka maamulka, socodsiinta, iyo kor ka eegidda doorashada.

Configuration Management - Maamulka Qaabka

Dishibiliinka loo adeegsado ammarada farsamada iyo maamulka iyo kormeerridda si loo aqoonsado iyo si qoraal looga sameeyo sifooyinka hawsha shayga, baddalaadda kantaroolka sifooyinkaan, ka shaqeeynta qoraalka iyo baddalaada warbixinta iyo fullinta xaaladda, iyo xaqijinta u hoggaansamida sharuudaha la cayimay.

Configuration Management Plan - Qorshaha Maamulka Qaabka

Warqadda tafatirta hawsha lagu aqoonsado, kantaroolka iyo maamulka waxyabaha la shaaciay ee kala duwan (sida koodhka, qalabka iyo warqadaha).

Configuration Status Accounting - Isku Toosinta Xaaladda Xisaabinta

Shay ku saabsan maamulka qaabka, oo ka kooban diiwaan gelinta iyo soo sheegidda macluumaadka loo baahan yahay si loo maamulo qaabka Tani waxaa ka mid ah liiska aqoonsiga qaabka la ogolaaday, xaaladda isbaddalada la soo jeediyay in lagu sameeyo qaabka, iyo xaaladda fullinta isbaddalada la ogolaaday.

Confirmation Mailing - Xaqijinta Dirista Warqada Boostada

Ogeysiiska loo diro cod bixiyaha si uu u xaqijiyo isbaddalada lagu sameeyo macluumaadkooda liiska codka bixiyaha. Ogeysiiska wuxuu codsan karaa in cod bixiyaha uu talaabo ka qaado si loo xaqijiyo in macluumaadka ku jiro ogeysiiska sax yahay.

Confirmation Notice - Ogeysiiska Xaqijinta

Ogeysiiska loo diro cod bixiyaha si loo xaqijiyo sibaddalada loo sameeyo macluumaadkooda ku jira liiska cod bixiyaha. Ogeysiiska wuxuu codsan karaa in cod bixiyaha uu talaabo ka qaado si loo xaqijiyo in macluumaadka ku jiro ogeysiiska sax yahay.

Conformance - Waafjinta

Buuxinta sharuudaha la xariira shayga, habka, ama adeegga.

Conformance Testing - Tijaabinta Waafajinta

Habka tijaabinta fullinta marka loo fiiriyo sharuudaha ku qoran mid ka mid ah ama ka badan heerarka. Natijadaha iyo waafaqsanaanta tijaabada, guud ahaan, waa natijjo gudub ama dhicid, waxaase laga yaabaa in ay ku jirto warbixin ku saabsan masalooyinka lala kulmo waqtiga fullinta. Sidoo kale loo yaqaan sida tijaabinta caddeynta.

Congressional District - Dagmada Kongreeska

Meel ku taal gudaha xuduudda gobolka laga soo doorto xubinta Aqalka Wakiilada Mareykanka (U.S. House of Representatives).

Congressional Election - Doorashada Kongreeska

Doorashada marka cod bixiyeyaasha ka qeybgalaan doorashada Aqalka Wakiilada Mareykanka.

Connect the Arrow - Ku Xer Falaarta

Qaar ka mid ah warqadaha codbixinta waxaa la faraa in ay sawiraan hal xariiqan oo isku xera madaxa iyo dabada falaarta tilmaanta xullahada in codka la siiyo musharaxa ama sharciga, baddalkii lagu buuxin lahaa xumbada ama lagu calaameyn lahaa X.

Consolidated Election - Doorashada Leysu Geeyay

Doorashada marka hal maamul uu qabto doorasho isla maalinta, kaddibna maamulada ka-qeybgalo qaadaan talaabo firfircooni si ay isugu keenaan doorashooyinka isla warqadda cod bixinta.

Consolidated Precinct - Xaafadda Leysu Geeyay

Labo xaafad ama ka badan oo loola dhaqmo sida hal xaafad u taagan doorashada.

Consolidated Primaries - Doorashada Musharaxiinta Xisbiyada Leysu Geeyay

Doorashada marka soo jeedinta in ka badan hal maamul qabato doorasho isla maalinta, mid ka mid ahna yahay doorashada musharaxa xisbiga, halkaas ay maamulada ka qeybgala talaabo rasmi ah ka qaataan si ay isugu keenaan doorashooyinka isla warqadda codbixinta.

Constituent - Xubinta

Qofka siyaasad ahaan uu mattalo sarkaal ka tirsan dawladda ama qof haaya xafiiska, khaas ahaan marka sarkaalka yahay mid in qofka la mattalo fursad u haysto in uu ka qeybgalo xullahada cod bixinta.

Constitution - Dastuurka

Maba'diida aasaasiga iyo shariyada u dagsan qaranka, gobolka ama koox bulsho ee go'aan ka taara awoodaha iyo waajibaadka saaran dawladda iyo ballan qaada xuquuqda qaar ay leeyahiin dadweynaha ku sugar meesha.

Contest - Tartan

(1) hal go'aan ama dhowr go'aan la soo hordhigo cod bixiyeyaasha (tusaale ahaan, fursadda musharaxiinta in ay buuxiyaan xafiis dadweyne ama ogolaashada ama diidmada baddalaadda dastuurka). Eraygaan wuxuu isu keenaa erayo kale sida "isirka," "su'aasha," iyo "arrinta" ee marmar loo adeegsado in lagu tixraaco tartanada qaar. (2) Taxaddiga sharciga ee lagu sameeyo natijadha doorashada.

Contested Races - Tartanka Leysku Haysto

Tartanka doorashada musharaxiin badan in ay jiraan boosas ka banaan doorashadaas.

Continue Voting - Sii Wad Cod Bixinta

Ereyo lala isticmaalo qaar ka mid ah siistemyada cod bixinta elataroonigga ama qalabka calaameynta warqadda cod bixinta si loo muujiyo in cod bixiyaha uu qabo xullahoojin badan ama uusan dhiibarin codkiisa.

Contribution - Deeqda

Shay kasta oo qiimo leh oo la bixiyay, la deymiyay, ama la hormariyay si loo qalqaaliyo codka siyaasadda raacsan ama ka soo horjeedo musharaxiinta ama su'aalaha warqadda codbixinta.

Contribution Limit - Xadka Deeqda

Qiyaasta ugu badan uu qofka ama ururka bixin karo, deymin karo ama hor marrin karo si uu u qalqaaliyo codka siyaasadda lagu taageero ama looga soo horjeesto musharaxiinta ama su'aalaha la xariira warqadda cod bixinta.

Contributions and Expenses Reports - Warbixinta Deeqda iyo Kharashka

Warbixinada ee tafatira ku biirinta siyaasadda iyo kharashka loo baahan yahay in ay gudbiyaan madaxda.

Contributions and Spending Limits - Ku Biirinta iyo Xuduudda Kharashka

Sharciyada maamula xisaabta ugu badan uu musharaxa ama guddiga gelin karaan ama soo hormarin karaan si ay saamayn ugu yeeshaan codka siyaasadda iyo in qofka ama ururka uu bixin karo, deymin karo ama hormarin karo codka siyaasadda raacsan ama ka soo horjeedo musharaxiinta ama su'aalaha warqadda cod bixinta.

Controls - Kantaroolo

Qalab, hab, ama siistem hoose, oo marka si wanaagsan loo sameeyo loona fulliyo, hubiya in ay sax yahiin hawlahi siistemka. Kantaroolada caadiga waxaa ka mid ah dhamaystirka jeegagga laga shaqeeyo, xaqijinta kuwa isticmaala, iyo sax ahaan shaqada laga qabto. Kantaroolada waxay ahaan karaan kuwa ka hortagga (in aysan dhicin cilladaha ka hortagga) ama kantaroolada isla socda iyo kantaroolada sixidda).

Corrective Action - Falka Sixitaanka

Talaabo la qaado si meesha looga saaro asbaabta ka dambeysa cilado jira ama xaalad kale aan la jecleeen si looga hortago in ay mar kale dhacdo.

Council District - Guddiga Dagmada

Goobta ku dhex jirta xuduudda gobolka ee xubinta Guddiga Magaalada ama Tuulada loo doorto.

Count - Tiri

Hawsha iskudaridda codadka

Counted Ballot - Warqadda Cod Bixinta La Tiriay

Waa laga shaqeyay warqadda cod bixinta kuwa codkooada lagu darray kuwa musharaxiinta iyo cabbirada iskudarka codka.

County - Dagmo

Qeyb ka tirsan siyaasadda iyo maamulka gobolka, oo bixisa adeegyada dawladda deegaanka.

County Auditor - Xisaabiyaha Dagmada

Sarkaal ka tirsan dagmada, gobolada qaar, oo mas'uul ka ah maamulka doorashada dagmada.

County Board of Election - Guddiga Doorashada Dagmada

Koox ka mid ah dadka mas'uulka ka ah kantaroolka doorashooyinka iyo hababka cod bixinta dagmada.

County Board of Supervisors - Guddiga Kormeereyaasha Dagmada

Qeybta xakunta dagmada gobolo badan oo ka tirsan Mareykanka, khaas ahaan Galbeedka, oo ka kooban xubnaha ay doorteen cod bixiyeyaasha.

County Clerk - Karaaniga Dagmada

Sarkaal ka tirsan dagmada oo mas'uul ka ah maamulka doorashada dagmada.

County Commission - Guddiga Dagmada

Qeyb ka tirsan dagmada gobolo badan oo ku yaal Mareykanka, khaas ahaan gobolada dhexe iyo Bariga, oo ka kooban xubnaha ay doorteen cod bixiyeyaasha.

County Election Commission - Guddiga Doorashada Dagmada

Koox dad ay magacaabeen madaxda deegaanka oo loo xil saaray kantaroolka doorashooyinka iyo habka cod bixinta.

County Election Officer - Sarkaalka Doorashada Dagmada

Sarkaal mas'uul ka ah maamulka doorashada waddanka.

County Election Precinct - Xaafadda Doorashada Dagmada

Qeybta maamulka doorashada ee u dhiganta joqraafiyada ee aasaaska u ah ogaanta tartanada ay cod bixiyeyaasha sharci ahaan daggan xaafaddaas loo ogol yahay in ay codkooda ka dhiibtaan.

County Elections Officials - Sarakiisha Doorashooyinka Dagmada

Sarakiisha mas'uulka ka ah maamulka doorashada dagmada.

County Measure - Cabbirka Dagmada

Sharci, arrin, ama su'aal ka muuqata warqadda cod bixinta la siiyo cod bixiyaha dagmada in uu go'aan ka gaaro.

County Recorder - Qoraha Dagmada

Sarkaal ka tirsan dagmada, gobolada qaar, oo mas'uul ka ah maamulka doorashada dagmada.

County of Residence - Daghada la Daggan Yahay

Dagmada ku taal dagmo ama gobol halkaas uu, marka uu qofka ama qaato adeegyo, qofka la daggan yahay kana samaystay joogitaan muddo joogto ah ama aan dhamaad lahayn.

County Special District - County Special District

Qeyb hoose dagmada loo sameyay hal adeeg dadweyne (sida saadka bixiyaha ama nadaafadda) gudaha qeyb joqraafi.

Competency Order - Ammarka Isku Filnaanta

Ammar ay soo saarto maxkmadda oo go'aan ka gaaro haddii qofka uu awood u leeyahay in uu codkiisa dhiibto.

Critical Infrastructure - Hawlaha Muhiimka ah

Siistemyada waxa jira iyo internetka iyo hantida muhiimka u ah Mareykanka ilaa heerka in la'aantooda ama burburintooda ay saamayn burburin ku yeelan doonto jiritaanka ama sekuritiga dhaqaalaha ama caafimaadka iyo ammaanka dadweynaha.

Cross-Filing – Iska Diiwaan Gelinta Musharaxa Dhowr Xisbi

Aqbaladda hal musharax ama tiro musharaxiin in ka badan hal xisbi siyaasi. Musharaxa ama daboolka ka muuqda warqadda cod bixinta ee mattasha xisbiga siyasadda ogolaatay. Waxaa kaloo loo yaqaan ogolaashada axsaabta.

Cross-party endorsement - Waa marka axsaabta iskudarsadaan codadka

Aqbaladda hal musharax ama tiro musharaxiin in ka badan hal xisbi siyaasi. Musharaxa ama daboolka ka muuqda warqadda cod bixinta ee mattasha xisbiga siyasadda ogolaatay.

Crossover Voting - Ka Cod Bixinta Xisbi Aan Laga Tirsaneen

Ficilka cod bixiyaha ka qeybqaata doorashada musharaxa xisbiga in aysan rasmi ahaan ku jirin diiwaanka ama aysan ka tirsaneen.

Cryptographic Key - Furaha Kryptograafingga

Qiimaha loo adeegsado kantaroolka hawlah crypto graphic, sida furfuridda, qarinta, soo saarka saxiixa ama xaqijinta saxiixa.

Cryptography - Kriptograafiga

Dishibiliinka la xariira mabaadiida, hababka, iyo siyaabaha loo baddao xogta si loo qariyo waxa ku jira, si looga hortago isticmaalka aan la fasixin, si looga hortago isbaddalkooda aan la ogaanin iyo si loo hubiyo in ay dhab yahiin.

Cumulative Voting – Wadarta Cod Bixinta

Isbaddalka codka ee loo isticmaalo tartanka kuraasta badan marka cod bixiyaha loo ogolaado in tiro cod u qeybiyo hal ama ka badan tartan. Waxaa la isticmaalaa labo isbaddal waaweyn xagga doorashooyinka US, mid ka mid ah wuxuu dhallin karaa qeybo ka mid ah codadka.

Curbside Voting - Cod Bixinta Dhinaca Jidka

Marka cod bixiyaha uusan geli karin goobta codbixinta, maamulada qaar saraakiisha doorashada waxaa loo fasaxay in ay cod bixiyaha ku kaalmeyaan codbixinta iyo dhibashada warqada codbixinta oo dibadda ka ah goobta codbixinta.

Cure - Daweey

Hawsha hagaajinta qalad ama bixinta macluumaadka la siiyo xafiiska doorashooyinka marka warqaddaada cod bixinta asal ahaan la soo diido in la tiriyo.

Cured Ballot - Xaqijinta Codadka Aan La Tirinin

Warqadda cod bixinta oo asal ahaan loo soo diiday qalad ku jira ama maxaa yeelay waxaa ka maqnaa macluumaad loo baahan yahay balse markii ugu dambeysay la tiriay maxaa yeelay cod bixiyaha wuxuu saxay qaladka ama wuxuu bixiyay macluumaadka loo baahan yahay.

Cure Period - Waqtiga La Siiyo Xisbiyada Si Ay Isu Saxaan

Muddada waqtiga uu sharciga ama xeerka ogol yahay in cod bixiyaha looga baahan yahay in uu keeno macluumaadka si loogu ogolaado warqadda cod bixinta in la tiriyo oo asal ahaan la diiday. Badanaa habkaan waxaa la fasaxaa marka saxiixyada ku yaal bakhshadaha warqadda cod bixinta aan la barbar dhigi karin saxiixyada kaararka diiwaan gelinta cod bixiyaha, ama haddii cod bixiyaha uu halmaamo in uu saxiixo bakhshadda cod bixinta.

Current Resident Address - Cinwaanka Dagganaha Iminka

Cinwaanka meesha aad iminka daggan tahay.

Custodian - Haaye

Qofka mas'ulka ka ah badbaadinta hatida macluumaadka.

Cybersecurity - Ammanka Internetka

Talaabadaha la qaaday si siistemyada kombuyutarka iyo xogta looga badbaadiyo weerar iyo in ruqsad la'aan la galo ama la isticmaalo.

D

Damaged Ballot - Warqadda Cod Bixinta La Haleyay

Araqadda cod bixinta la jeexay, la laabay, ama si kale loo haleyay ama laga dhigay wax aan la akhrin karin sida in aysan ka shaqeeyn karin qalabka buuxinta jadwalka warqadda cod bixinta ee loo sameyay in lala isticmaalo warqadda cod bixinta

Data Accuracy – Sax Ahaan Xogta

(1) Sax ahaanta xogta waxaa lagu sifeyaa hadba sida qadarka qaladka booska warqadda cod bbixinta tahay. Qadarkaan waxaa lagu dabaqaa hawla cod bixinta iyo qalabka taageersan ee qabsada, diiwaan geliya, keydinta, isu keenidda iyo soo sheega xullashada, iyo maqnaashada xullashada, uu sameeyo cod bixiyaha booska warqadda cod bixinta. (2) Awoodda siistemka u leeyahay in uu ka shaqeeyo xogta cod bixinta, aysan jirin qaladaadka gudaha uu siistemka soo saaro. Waa ka soocan tahay xogta, taasoo laga helo qaladaadka ka soo galo ilo dibadda uga yimaada.

Data Integrity - Jiritaanka Xogta

Ka hortagga waxyeelada siistemka faragelinta shilka ama ku talogalka, faragelinta khayaanada ee dhallin doonto qaladaadka la xariira ka shaqeynta xogta. Waa ka duwan tahay sax ahaanta xogta kana mid ah qaladaadka siistemka gudaha soo saaro.

Data Security - Ammaanka Xogta

Dhaqanka badbaadinta maclumaadka digitalka in aysan gelin dad aan loo fasixin, musuq, ama xattooyo loo geysto nolosheeda oo idil.

Deadline for Voting - Taariikhda Ugu Dambeeyo Cod Bixinta

Waqtiga iyo taariikhda ugu dambeeyo uu muwaadinka dhiibto codkiisa.

Deaf - Dhagoole

Maqalka oo si darran loo lumiyo kaddibna aad u yaraato ama uusan jirin maqal.

Decertification - Ka Qaadidda Shahaadada

Ka noqoshada caddeyntra qaranka ama gobolka ee siistemka cod bixinta iyo brograamka.

Declaration of Assistance to Vote - Bayaanka Kaalmada Cod Bixinta

Foomka uu buuxiyo qof codeeyo oo itaal darran in cadsado ama diido kaalmo inta ay socoto hawsha cod bixinta.

Declaration of Candidacy - Ku Dhawaaqidda Musharaxnimada

Falka dhamaystirka warqadaha loo baahan yahay si loogu dhawaaqo rabitaanka qofka in uu musharax ka noqdo xafiiska dadweynaha.

Declaration of Intent - Bayaanka Ujeedada

Ficilka dhamaystirka warqadda loo baahan yahay si loogu dhawaaqo rabitaanka qofka in uu musharax ka noqdo xafiiska dadweynaha.

Declaration of Intent to Solicit and Receive Contributions - Bayaanka Rabitaanka Raadinta iyo Qaadashada Ku Biirinta

Warqad loo gudbiyay madaxda dawladda si loogu dhawaaqo rabitaanka qofka in uu soo aruursado iyo bixiyo kharashka siyaasadda.

Declaration of Write-in Candidate - Bayaanka Codka La Siiyo Musharaxa Aan Liiska Ku Jirin

Warqad loo gudbiyo madaxda maamulka si loogu dhawaaqo rabitaanka qofka in uu raadsado doorashada xafiiska halkas oo magaca aan horay loogu daabiciin warqadda cod bixinta balse looga baahan cod bixiyaha in uu ku qoro magaca musharaxa meel ka banaan tartankaas.

Decryption - Furfuridda

Hawsha qoraalka "encrypted" ee loo baddalo qoraalka "plain."

Defective Ballot - Warqadda Cod Bixinta Cilladeysan

Warqadda cod bixinta la jeexay, la halleyay, ama loo calaameyay markaasna aan la gelin karin mashiinka skaanka.

Defense-In-Depth - Difaaca-Qotada-Dheer

Heerar badan oo la xariira sugidda loojikada iyo shayga ee diida in hal meel uu ka fashilo ammaanka siistemka. Waxaa kaloo lagu magacaabaa habka "Castle".

Delegate - Ergada

Qofka loo fasaxay ee loo dirray in uu mattalo dad kale, gaar ahaan wakiilka la doortay.

Democracy - Dimoqraasiyada

Dawlad oo awoodda ugu sareyso ku jirto gacanta dadweynaha, toos ama si dadban u maamulaan, iyagoo isticmaala siistemka mattalaadda oo badanaa ku lug leh in doorashooyin madax banaan la qabto muddo ka muddo.

Deputy - Ku Xigeenka

Qofka la xoojiyay ama loo fasaxay in uu mattalo awoodda qof kale. Sarakiisha codbixinta waxay qofka siin karaan dhaarta loo marro muwadiiniinta in ay fulliyaan waajibaadka doorashada rasmiga sida in ay yahiin dadka iyaga ku mattala Mareykanka.

Designation - Magacaabidda

Sharaxaad, magac, ama mansab rasmi ah. Maamulada qaar, musharaxa wuxuu soo gudbin karaa sharaxaad la rabo in lagu daabaco meesha ka hooseyso magaca warqadda codbixinta.

Device - Qalab

Shay fulliya hawlaha loo diray sida shay midaysan oo buuxa.

Digital Certificate – Shahaadada Digitalka

Farsamada ay siistemyada iyo kuwa isticmaala adeegsan karaan brograamyada sugidda ammaanka Qalabka Dadweynaha (Public Key Structure) (PKI). PKI waa kaalinta, siyaasadaha, iyo hababka loo baahan yahay si loo abuuro, loo maamulo, loo qeybiyo, isticmaalo, keydiyo, loola noqdo shahaadooyinka iyo sida loo maamul qarsoodiga furah-dadweynaha.

Digital Signature - Saxiixa Digitalka

Hawsha furaha kala badan marka furaha gaarka loo adeegsado in digital ahaan la saxiixo warqad elataroonig kaddibna furaha dadweynaha la isticmaalo si loo xaqiijiyo saxiixa. Saxiixa digitalka waxaa laga helaa aqoonsiga xogta iyo badbaadinta xogta.

Digitize - Loo baddalo nambaro

Si xogta analog loogu baddalo qaabka digitalka si loogu keydiyo iyo loo isticmaalo kombuyutar. Foomka Digitalka xarafka "A" waa cabbirka ugu yar "byte": 01000001 (ASCII qiimaha 65). Xog kasta oo ku keydsan kombuyutar waa in laga dhigo dijital.

Direct Democracy - Dimoqraatiyada Tooska

Nooc ka mid ah dimoqraasiyada halkas ay muwaadiniinta go'aan ka gaaraan dadaalka siyaasadda, sida marka cod bixiyeyaasha go'aan ka gaaraan dadaalka, soo jeedinta iyo referendumka.

Direct Primary - Doorashada Tooska Musharaxiinta Xisbiyada

Doorashada musharaxa xisbiga halka xubnaha xisbiga magacaawdo musharaxiinteeda una adeegsado cod bixinta tooska.

Direct Recording Electronic (DRE) - Elataroonigga Diiwaan Gelinta Tooska Direct Recording Electronic (DRE)

Qalabka qabta codka oo suurtogeliya bandhigga elataroonigga warqadda cod bixinta, xullahada fursadaha tartanka shaqeeyo, iyo keydinta elataroonigga xullahadooyinka tartanka sida in ay yahiin cod bixinta qofka. Waxaa kaloo laga

helaa soo koobidda xullashooyinkaan tartanka.

Direct Recording Electronic (DRE) Voting System - Siistemka Cod Bixinta Qorista Elatarooningga Tooska

Siistemka codbixinta ee isticmaasha qeybaha elatarooningga ee la xariira hawlaha bandhigidda warqadda codbixinta, qabashada codka, diiwaan gelinta codka, iyo gelinta jadwalka kuwaas, loojig iyo qalab ahaan, u mideysan sida hal qeyb. DRE soo saarta jadwalka xogta cod bixinta ku keydsan qalabka xasuusta la saari karo iyo koobiga daabacan.

Directly Verifiable – Toos Loo Xaqijin Karo

Sifada siistemka cod bixinta ee u ogolaata cod bixiyaha in uu xaqiijiyo ugu yaraan hal mattalaad oo ku saabsan warqadooda cod bixinta u gaarka ah, iyagoo aan isticmaalin brograam ama qalab dhexe. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah warqadda cod bixinta Marksense iyo DRE iyo diiwaanka warqadda la xaqijin karo.

Directory - Liis

Keydinta faylka halka lagu keydiyo faylada galal kala gaar ah oo isku xigxiga. Tilmaanta waa khariidada meesha faylka lagu keydiyo. Inta badan siistemyada waxay toos faylada ugu keydin doonaan gal haddii aan si kale loo caddeynin

Disability - Itaal Darrida

Tan la xariirto qofka: (1) itaal darrida jirka ama madaxa taasoo si la taaban karo u yareysa hal ama ka badan hawlaha waaweyn nolosha qofkaas; (2) qoraalka laga sameeyo itaal darrida noocaas; (3) in loo qaato in qofkaas yahay qof itaal darran (sifeynta Sharciga Mareykanka Itaalka Darran).

Disabled - Itaal darran

Qofka itaalka darran waxay ADA ku sifeysaa in uu yahay qof qaba itaal darrida jirka ama madaxa oo si la taaban karo u yareysa mid ama ka badan hawlaha waaweyn nolosha, qofka qaba taariikh ama diiwaan ku saabsan itaal darrida noocaas, ama qof ay dadka kale u arkaan in uu qabo itaal darrida noocaas.

Disabled Voters - Cod Bixiyeyaasha Itaalka Darran

Cod bixiyeyaasha waxay u baahan karaan kaalmo inta ay socoto doorashada si ay ula xariiraan siistemyada aan loo sameynin isticmaalka handasada guud.

Discrimination - Takoorka

Dhaqanka sinaan la'aanta

Disenfranchise - Fogeynta

Si qof looga qaado xaqa uu u leeyahay in uu codkiisa dhiibto.

Displaced Voters - Cod Bixiyeyaasha la Barakiciyay

Cod bixiyeyaasha waxay qasab ku noqotay in ay ka tagaan guryahooda, caadi ahaan maxaa yeelay waxaa jira musiibo dabiici ah.

Disqualification - Ka Joojinta

Ficilka lagu kala tuuro musharax ama cod bixye si uusan uga qeybgelin hawsha doorashada.

Disqualify - Ka joojin

Qofka lagu tilmaamo in aan loo ogolaan karin in uu qabto xafiis ama uusan awoodin in uu ka qeybgalo hawsha doorashada.

Disqualifying - Bannad

Falka ama gaf ka dhigta musharaxa ama cod bixiyaha qof aan awoodin in uu ka qeybgalo hawsha cod bixinta.

Distribution of Contributions - Qeybinta Deeqda

Kharashka tafatiran uu galo musharaxa siyaasiga ama ololaha.

District - Dagmo

Qeyb hoos siyaasadda oo laga aasaasay dhul joqraafi ahaan cayiman.

District Lines - Xariiqmanka Dagmada

Xariiqmanka kala qeybiya Dagmooyinka midba midka kale.

District Number - Nambarka Dagmada

Nambarka la siiyay dagmada siyaasadda.

District Office - Xafiiska Dagmada

Xafiis ka tirsan dawladda federaalka ama gobolka aan weli laga dhiibarin codka gobolka.

Double Voting – Cod Bixinta Labo Laabka

Marka cod bixiyaha uu codkiisa ku bixiyo in ka badan hal warqad cod bixin.

Download - Dajin

Falka ama dhacdada marka shay (sida xogta ama faylasha) caadi ahaan laga wareejiyo kombuyutar weyn loona wareejiyo xasuusta qalab kale (sida kombuyutar yar) si (xog, faylasha, iwm.) looga wareejiyo hal goob (sida kombuyutar weyn ama keydka "cloud") loona wareejiyo mid kale (sida kombuyutar yar, smartphone, ama qalabka keydinta).

Dox - Internetka oo laga raadiyo xumaanta qofka

Daabacaadha maclumaad khasaaro geysta ama dacaayad ka bixiya qof ama urur ku jira internetka.

Drop Box - Sanduuqa lagu rido

Weel xeran, gudaha ama dibadda, halkas ay cod bixiyeyaasha soo celin karaan warqadda cod bixinta si uu toos u soo aruuriyo sarkaalka.

Duplicate Ballot - Koobiga Warqadda Cod Bixinta

Warqadda cod bixinta lagu baddalo warqadda cod bixinta hallowday ama aan shaqeynin. Warqadaha koobiga cod bixinta waa wax uu nidaamka dib u sameeyo halkas oo codadka la khasaariyay ama qeyb ahaan aan shaqeynin laga sameeyo koobi kaddibna skaanka ka sameeyo jadwal.

Duplicate Records - Diiwaanada Labo Labada

Safaf la mid ah oo ku saabsan maclumaadka ama warqadaha.

Duplicate Registrations - Diiwaan Gelinta Labo Labada

Arjiga lagu diiwaan geliyo codka qof horay ugu jiray diiwaanka in uu codkiisa ka dhiibto isla cinwaankaas, isla magaca iyo madlummaadka qofka.

Duty Station - Goobta Laga Shaqeeyo

Goobta shaqada loo xil saaray.

Dynamic Password - Erayga Lagu Galo Hal Mar

Erayga lagu galo (password) ee is baddasha marka la gaaro waqtii cayiman ama dhacdo.

Dynamic Voting System Software - Brograamka Siistemka Codbixinta Socda

Brograamka baddala waqtii kaddib marka la geliyo qalabka cod bixinta.

E

E-pollbook - Buugga Doorashada-E

Qalabka qeyb ahaan isku toosiya hawsha hubinta cod bixiyeyaasha, siinta nooca warqadda cod bixinta saxsan, iyo calaameynta cod bixiyeyaasha la siiyay warqadda cod bixinta. Hiddo ahaan, waxaa la isticmaali karaa bedelkii warqadda buugga cod bixinta. Buugga doorashada-e wuxuu ahaan karaa mid keligii ka taagan xaafadda oo xajiyaa koobi gaar ah liiska diiwaan gelinta ama laga qeybgelin karo siistemka diiwaan gelinta cod bixiyaha dhexe halkaas ay waqtidhab ah ku hubin karaan iyo casriyeyn karaan diiwaanada cod bixiyaha.

Early Voting - Cod Bixinta Waqtii Hore

Cod bixinta ka horeysa maalinta doorashada marka cod bixiyaha uu warqadda cod bixinta ka dhamaystiro xafiiska doorashooyinka iyo goob kale oo loo xil saaray ka hor inta aan la gaarin maalinta doorashada. Cod bixinta hore waxaa sidoo kale ka mid nocqon karo codka lagu dhiibto warqadda cod bixinta lagu diro boostada ama warqadda cod bixinta maqanaha, maalinta doorashada ka hor.

Early Voting Ballot Board - Guddiga Warqadda Doorashada Hore

Koxd dad, ay madaxda deegaan fasaxeen, kuwaasoo lagu eedeyay in ay ka qeybgaleen ama kor ka eegeen doorashooyinka iyo hababka doorashada, maainta doorashada ka hor.

Early Voting Clerk - Karaaniga Cod Bixinta Waqtii Hore

Sarkaalka mas'uulka ka ah kor ka eegidda cod bixinta hore.

Elect - Dooro

Ficilka doorashada qofka in uu qabto xafiiska dadweynaha loona adeegsado doorashada dadweynaha.

Elected – Doortay

Musharaxiinta qaata nambarka ugu sareeyo ama loo baahan yahay lana xariirta doorashada xafiiska dadweynaha.

Elected Office - Xafiiska la Doortay

Xafiis aasaasiyan ama keliya lagu buuxiyo internetka.

Elected Officials - Saraakiisha la Doortay

Dadka loo doortay in ay qabtaan xafiiska dadweynaha ama musharaxiinta loo magacaabay baddalkii loo dooran lahaa xafiiska dadweynaha.

Elected to Fill Unexpired Term - Loo Doortay in uu Buuxiyo Muddada aan Dhamaanin

Boosaska la doortay waxay badanaa qabaan muddo gaarta labo, afar, ama lex sanno. Haddii uu jiro boos banaan inta lagu dhex jiro xilliga, waxaa la dooran doonaa musharaxa kaasoo hayn doono xafiiska ilaa laga gaaro muddada asalka. Tusaale ahaan, haddii sarkaalka la doortay uu hawl gab noqdo hal sanno kaddib, muddada xafiiskana tahay afar sanno, musharaxa xiga waxaa loo dooran doonaa in uu buuxiyo saddaxda sanno hartay.

Election - Doorashada

Hab rasmi ah oo lagu doorto qof in uu qabto xafiis dadweyne ama in uu ogolaado ama diido qorsho siyaasad oo la doorto.

Election Administration Process - Hawsha Maamulka Doorashada

Ficilka maamulka, socodsinta, iyo kor ka eegidda doorashada.

Election Assessment - Qiimeynta Doorashada

Qiimeynta iyo falanqeynta doorasho ama hawsha cod bixinta.

Election Assistance Commission - Guddiga Kaalmada Doorashada

Guddiga Kaalmada Doorashada (Election Assistance Commission) Waxaa abuuray Sharciga Kaalmee Doorashada Mareykanka (Help America Vote Act) (HAVA) si gobolada loogu kaalmeeyo u hoggaanasmida HAVA iyo si maaliyad loogu qeybiyo gobolada. EAC waxaa kaloo lagu eedeyaa abuurista tilmaamaha siistemka cod bixinta iyo ku shaqeynta siistemka cod bixinta kowaad ee dawladda federaalka.

brograamka shahaadeynta. EAC waxay kaloo mas'uul ka tahay xajinta foomka Diiwaan Gelinta Codbixiyaha Qaranka (National Voter Registration), fulinta cilmi baarista, iyo maamulka wararka doorashada qaranka kana mid ah dhaqanka la wadaago, maclummaadka la siiyo cod bixiyeyaasha, iyo ilo kale oo lagu hagaajiyo doorashooyinka.

Election Authority - Madaxda Doorashada

Sarkaalka mas'uulka ka ah kor ka eegidda doorashooyinka maamulka.

Election Ballot - Warqadda Cod Bixinta

Bandhigga rasmiga ee dhamaan tartanka loo baahan yahay in go'aan laga gaaro doorashada gaarka. Warqad ama elataroonig ahaan, habka ay cod bixiyeyaasha ku muujiyaan rabitaanka cod bixiyaha.

Election Board - Guddiga Doorashada

Koox dad ay magacaabeen, badanaa madaxda deegaanka, oo loo xil saaray kantaroolka doorashooyinka yo habka cod bixinta.

Election Calendar - Jadwalka Doorashada

Liiska rasmiga taariikhda muhiimka iyo taariikhda ugu dambeeyso doorashada.

Election Campaign - Ololaha Doorashada

Taxane ka kooban hawlaha dimoqraatiyada si loo qalqaalio codka siyaasadda oo lagu taageero ama looga soo horjesto musharaxiinta ama su'aalaha ku saabsan warqadda cod bixinta.

Election Certification - Shahaadada Doorashada

Ficilka xaqijinta natijadaha rasmiga ugu dambeeyo ee doorashada ka socoto maamulka. Munaasabaddaan waxaa la qabtaa kaddib marka la tiriyo warqadaha cod bixinta la ansixiyay ee laga helo dhamaan ilaha (maalinta doorashada cod bixinta maqanaha, cod bixinta waqtii hore, warqadaha cod bixinta ku meel gaarka, iwm.) kaddibna natijadaha ay ansixiyaan kaddibna ogladaan kuwa sharci ahaan mas'uulka ka ah.

Election Clerk - Karaaniga Doorashada

Qof kasta oo ku lug leh maamulka ama fullinta doorashada, kana mid ah shaqaalaha dawladda iyo shaqaalaha doorashada ku meelgaarka. Tani waxaa ka mid noqon kara karaaniga iyo diiwan geliyaha dagmada, garsooraha doorashada, xubin ka tirsan boorka tirada cod bixisay, sarkaal ka socdo doorashada bartamaha, shaqaalaha maalinta doorashada, xubin ka tirsan boorka guddiga dagmada, xubin ama xogheynta guddiga agaasimeyaasha loo fasaxay in ay fulliyaan doorashooyinka dadweynaha, wakiil ka socdo dawladda xakunta, ama qof kale oo ku lug leh shaqada waajibaadka doorashada sida uu rabo sharciga doorashada.

Election Code - Koodka Doorashada

Sharciyada rasmiga ee xakuma hawsha cod bixinta.

Election Commission - Guddiga Doorashada

Koox dad lay magacaabeen, badanaa madaxda deegaanka, oo loo xil saaray kantaroolka doorashooyinka yo habka cod bixinta.

Election Contest - Tartanka Doorashada

Hal go'aan ama go'aan la xariira oo la horgeeyo cod bixiyeyaasha (tusaale ahaan, fursadda in musharaxiinta buuxiyaan xafiis dadweyne gaar ah ama ogolaashada ama diidmada baddalaadda dastaruurka). Eraygaan wuxuu isu keenaa erayo kale sida "isirka," "su'aasha," iyo "arrinta" ee marmar loo adeegsado in lagu tixraaco tartanada qaar. Warqad kaliya ayaa laga heli karaa hal tartan ama ka badan.

Election Contribution - Deeqda La Siiyo Doorashada

Shay kasta oo qiimo leh oo la bixiyay, la deymiyay, ama la hormariyay si loo qalqaaliyo codka siyaasadda raacsan ama ka soo horjeedo musharaxiinta ama su'aalaha warqadda codbixinta.

Election Databases - Xogta Doorashada

Faylka xogta ama faylasha laga heo macluumaadka joqraafiyada ku saabsan qeybaha hoose iyo xuduudaha, dhamaan tartanada iyo su'aalaha loo baahan yahay in lagu darro doorashada, iyo mursharaxiinta tartan kasta.

Election Day - Maalinta Doorashada

Maalinta ugu dambeysa ay musharaiinta dhiibin karaan codkooda. Warqadaha codbixinta maqanaha iyo warqadaha codbixinta waxaa loo dhiibin karaa horay Maalinta Doorashada.

Election Definition - Sifeeynta Doorashada

Sifeeynta tartanka iyo su'aalaha ka muuqan doono warqadda cod bixinta doorashada.

Election District – Doorashada Dagmada

Meelaha joqraafi ahaan deriska ah uu mattalo sarkaal u shaqeeyo dadweynaha ay doorteen cod bixiyeyaasha daggan gudaha xuduudda dagmada. Waxaa dhici karto in dagmada daboosho gobol idil ama qeyb siyaasi, waxay ahaan kartaa qeyb ka tirsan gobolka ama siyaasadda, ama waxaa ka mid noqon kara qeybaha in ka badan hal qeyb siyaasi.

Election Division - Qeybta Doorashada

Waaxda dawladda ee lagu eedeyay doorashooyinka maamulka.

Election Equipment - Qalabka Doorashada

Dhamaan waxyabaha loo baahan yahay si loo fulliyo doorashooyinka iyo cod bixinta. Tani waxaa ka mid noqon kara farsamada sida buugaagta goobta elataroonigga, mashinada cod bixinta, iyo qalabka kale aan farsamada ahayn sida qolalka cod bixinta iyo calaamadaha cod bixinta.

Election Fraud - Khayaanada Doorashada

Sida qaldan u sheegidda ama baddalaadda natijadaha runta ee doorashada.

Election Inspector - Fattashaadda Doorashada

Sarkaalka mas'uulka ka ah nidaamka cod bixinta habboon ee ka jira goobta cod bixinta ama hawsha doorashada.

Election Integrity - Asluubta Doorashada

Doorasho ku dhisan aqoon, aan dhinacna jirin, oo daah furan, xagga diyaarinta iyo maamulka muddada wareegga doorashada.

Election Judge - Garsooraha Doorashada

Sarkaalka mas'uulka ka ah nidaamka cod bixinta habboon ee ka jira goobta cod bixinta ama hawsha doorashada.

Election Jurisdiction - Maamulka Doorashada

Gobol oo joqraafi ahaan la siiyay awood dhab ah ay ku fulliyaan doorashooyinka xafiisyada siyaasadda ama maamulka. Meelaha maamulka waxay quseyaan heerarka deegaanka, gobolka, iyo federaalka. Gobolada, dagmooyinka, magaaloooyinka, tuuloooyinka, iyo xaafadaha dhamaan waa tusaalooyin la xariira maamulka.

Election Kit - Qalabka Doorashada

Waxyabaha ay sarakiisha doorashada u baahan yahiin si ay u taageeraan goobta codbixinta.

Election Law - Sharciga Doorashada

Sharchiyada rasmiga ee xakuma hawsha cod bixinta.

Election Management System - Siistemka Maamulka Doorashada

Ka shaqeynta hawlaha iyo xogta ku jirta gudaha siistemka cod bixinta ee sifeysa, soo saarta iyo ku shaqeysa xogta doorashada, fullisa sifeynta doorashada iyo hawlaha diyaarinta, habeysa warqadaha cod bixinta, tirisa codadka, isu keenta iyo natijadaha warbixinta, iyo xajisa raadadka xisaabinta.

Election Materials - Qoraalada Doorashada

Waxyabaha loo baahn yahay si loo taageero cod bixiyeyaasha loona fulliyo doorashada.

Election Night Tabulation - Buuxinta Jadwalka Habeenka Doorashada

Ficilka jadwal gelinta codadka habeenka doorashooyinka, kaddib marka la xero goobaha cod bixinta.

Election Officer - Sarkaalka Doorashada

Sarkaalka mas'uulka ka ah in uu maamulo doorashada ama hawsha doorashada.

Election Officials - Sarakiisha Doorashada

Dadka la xariira maamulidda iyo fullinta doorashooyinka, kana mid ah shaqaalahaa dawladda iyo shaqaalahaa goobta cod bixinta.

Election Order - Ammarka Doorashada

Eray sharci oo la isticmaalo marka dawladda loo fasaxay awoodda ku dhawaaqdo in doorasho la qaban doono waqtig'o'an.

Election Precinct - Xaafadda Doorashada

Qeypta maamulka doorashada ee la shaqeyso qeyb joqraafi ahaan ku dhaggan ee aasaas u ah go'aanka laga gaaro tartanada iyo cod bixiyeyaasha sharci ahaan adaggan deegaankaas waxay xaq u leeyahiin in ay codkooda ka dhiibtaan.

Election Precinct Officer - Sarkaalka Xaafadda Doorashada

Sarkaalka mas'uulka ka ah nidaamka cod bixinta habboon ee ka jira goobta cod bixinta ama hawsha doorashada.

Election Programming - Brograamka Doorashada

Habka ay sarakiisha doorashada ama dadka mattala ay brograamka siistemka cod bixinta u isticmaalaan in ay si xikmad ley u sifeyaan warqadaha cod bixinta doorashada.

Election Registrar - Diiwaan Geliyaha Doorashada

Sarkaalka mas'uulka ka ah maamulka doorashada.

Election Results - Natiijadaha Doorashada

Tirinta codadka laga dhiibtay doorashada kaddib marka xero goobaha cod bixinta.

Election Returns - Soo Celinta Doorashada

Tirinta codadka laga dhiibtay doorashada kaddib marka xero goobaha cod bixinta.

Election Seals - Sugidda Ammaanka Doorashada

Habka sekuritiga marka la isticmaalo alaabta sida wanaagsan loo dhigo ama alaabta laga ilaaliyo faragelinta ee saraakiisha uga digga haddii qalabka la isticmaalo hawsha dooraashada sida suurtogalka ah la baddalay ama la galay iyadoo aan loo haysanin ruqsad.

Election Supervisor - Kormeeraha Doorashada

Sarkaalka mas'uulka ka ah in uu maamulo doorashada ama hawsha doorashada.

Election System - Siistemka Doorashada

Siistemka ku saleysan farsamada ee loo isticmaalo in lagu soo aruuriyo, laga shaqeeyo, iyo lagu keydiyo xogta la xariirta doorashooyinka iyo maamulka doorashada. Siistemyada diiwaan gelinta cod bixiyaha iyo bogagga internetka dadweynaha kaddib, siistemyada doorashada waxaa ka mid ah siistemyada doorashada, siistemyada jadwalka codbixinta, buugaagta goobaha elataroonigga, siistemyada gudbinta natiijadaha doorashada, iyo qalabka xisaabinta. Waxaan kaloo loo isticmaali karaa in loola jeedo dhamaan hababka, dadka, ilaha, qalabka iyo goobaha la xariira fullinta doorashooyinka.

Electioneer - Ololeen

Hawsha iskudayidda qancinta dadka in ay codkooda siiyan ama ka soo horjeestaan musharaxa, qorshe ama xisbi siyaasi.

Elections Administrator - Maamulaha Doorashooyinka

Sarkaalka mas'uulka ka ah maamulka doorashada.

Elective Office - Xafiiska Doorashada

Xafiis aasaasiyan ama keliya lagu buuxiyo internetka.

Elector - Doortaha

(1) Qofka aqoonta u leh in uu codkiisa ka dhiibto doorashada. (2) Qofka gobol ka tirsan Mareykanka u magacaawday Mareykanka in uu codkiisa siiyo madax weynaha iyo ku xigeenka madax weynaha ku jira kulliyadda doorashada.

Elector Candidates - Doortaha/Musharaxiinta

Masharax u baahan in uu gobol ku yaal ku yaal Mareykanka ka helo magacaabidda madax weynaha iyo ku xigeenka madax weynaha dadka ka qeyb gala doorashada.

Electoral Board - Guddiga Doorashada

Koox dad ay magacaabeen, badanaa madaxda deegaanka, oo loo xil saaray kantaroolka doorashooyinka yo habka cod bixinta.

Electoral College - Xildhibaanada Doorta Madax Weynaha

Koox dada mattasha gobolada Mareykanka, ee rasmi ahaan codkooda ka dhiibta doorashada madax weynaha iyo ku xigeenka madax weynaha.

Electoral Cycle - Wareegga Doorashada

Muddada u dhixeyso sharciga rasmiga kowaad doorashada ilaa sharciga ugu dambeeyo. Wareegga doorashada wuxuu u qeybsan yahay saddax muddo: mudda ka horeyso doorashada, muudada doorashada, iyo muddada ka dambeyso doorashada.

Electoral Votes - Codadka Doorashada

Codadka ay dhiibtaan xubnaha kulliyadda doorashada.

Electorate - Cod bixiyaha

Dhamaan dadka ku jira maamulka siyaasadda ee xaqa u yeeshaa in ay codkooda ka dhiibtaan doorashada.

Electronic Ballot Delivery - Geynta Warqadda Doorashada Elataroonigga

Geynta warqadda cod bixinta iyo warqadaha maclummaadka elataroonigga. Sharciga MOVE (MOVE Act) wuxuu gobol kasta uga baahan yahay in uu keeno dirrista elataroonigga (via fax, email, ama brograamka ku tiirsan Internetka) ee warqadaha cod bixinta iyo maclummaadka la xariira ee laga soo qaado xafiiska doorashada deegaanka lana siiyo cod bixiyeyaasha Madaniyiinta Dibadda Mideysan (Uniformed and Overseas Civilian). Maamulada qaar waxay u ogol yahii cod bixiyeyaasha itaalka darran, cod bixiyeyaasha la barakiciyay ama daruufo kale marka cod bixiyaha daggan maamulka doorashada in uu warqadda cod bixinta ku helo elataroonig ahaan.

Electronic Ballot Return - Soo Celinta Warqadda Doorashada Elataroonigga

Soo celinta warqadda cod bixinta ama warqadaha maclummaadka cod bixiyaha marka la isticmaalo hababka elataroonigga. Tani waxaa lagu sameyn karaa faks, email, ama isticmaalka brograam ku shaqeeyo internetkka. Marmar loo yaqaan "Doorashada Internetka."

Electronic Cast Vote Record - Diiwaanka Codka Lagu Dhiibtay Elataroonigga

Diiwaan joogto ah ee dhamaan codadka uu cod bixiye keliya ku soo saaro qaabka elataroonigga.

Electronic Poll Book - Buugga Doorashada Elataroonigga

Qalabka qeyb ahaan toos uga shaqeeyo habka hubinta cod bixiyeyaasha, siiya nooca warqadda codbixinta saxsan, iyo calameeya cod bixiyeyaasha la siiyay warqadda codbixinta. Hiddo ahaan, waxaa la isticmaali karaa bedelkii warqadda buugga cod bixinta. Buugaagta doorashada-e waxay ahaan kartaa mid keligeed ka taagan xaafadda oo haysata koobi gaar ah oo ku saabsan liiska diiwaan gelinta ama shabakad lala wadaagi karo siistemka diiwaan gelinta cod bixiyaha dhexe halkas ay ka hubin karaan kana casriyeyn karaan diiwaanada cod bixiyaha waqtidhab ah.

Electronic Record - Diiwaanka Elataroonigga

Maclummaadka uu qoray kombuyutarka oo la soo saaray ama la helay bilaabidda, fullinta ama dhamaystirka wakaaladda ama hawsha qofka. Tusaalooyinka xogta elataroonigga waxaa ka mid ah: fariimaha email, warqadaha "word Processing", warqadaha xisaabaadka elataroonigga, sawirada digitalka, iyo xogta.

Electronic Reporting And Tracking System (ERTS) - Sheegidda Elataroonigga iyo Siistemka la Socoshada

Siistemka ERT waxaa loo isticmaalaa elataroonig ahaan si loo abuuro ilo laga helo qorshooyinka tijaabinta iyo warbixin. ERT waxay xisaabaadka natijadaha ka soo baxo tijaabinta lagana soo qaado xogta ama gacanta ligu geliyo, waxaana ka mid ah qoraalo si loo abuuro warbixin elataroonig oo dhamaystiran oo loo gudbiyo wakaaladda sharci dajinta.

Electronic Storage - Keydka Elatarooningga

Keydinta xogta elatarooningga isticmaalaha kombuyutarka, shabakada kombuyutarka, ama siistemka kombuyutarka, iyadoo aan la fiirinin haddii xogta hoos timaado celin, ka shaqeyn, tirtirid, ama gudbin. Keydeinta elatarooningga waxaa ka mid ah keydin kasta ama isgaarsiinta elatarooningga uu fulliyo adeegga isgaarsiinta elatarooningga ama adeegga xisabaadka fog.

Electronic Voter Interface - Xariirinta Cod Bixiyaha Elatarooningga

Sistemka hoose gudaha siistemka cod bixinta ee maclumaadka warqadda cod bixinta u gudbiya cod bixiyaha una adeegsada fiidiyow, maqal, qaab kale oo u ogolaada cod bixiyaha in uu doorto musharaxiinta iyo arrimaha marka uu isticmaalo hadal ama falal.

Electronic Voting - Cod Bixinta Elatarooningga

Cod bixinta isticmaasha elatarooningga waxaa loola jeedaa in lagu taageero ama lagu dhiibto codka iyo tirinta codadka.

Electronic Voting Accessibility – Helitaanka Cod Bixinta Elatarooningga

Sistemka cod bixinta elatarooningga oo laga helo sifooyin lagu galo, kana mid ah taabashada muraayadda iyo maqalka, ee siiyaa cod bixiyeyaasha itaalka darran awood ay ku dhiibtaan warqadda cod bixinta iyadoo aan lagu kaalmeynin

Electronic Voting Machine - Mashiinka Cod Bixinta Elatarooningga

Sistem kasta oo isticmaasha qeyb elataroonig. Erayga waxaa guud ahaan loo adeegsadaa DREyada.

Electronic Voting System - Siistemka Doorashada Elatarooningga

Sistemka cod bixinta elatarooningga (An electronic voting system) waa mid ama ka badan qalabka midaysan ee isticmaala qeyb elataroonig ah si loo fulliyo mid ama ka badan hawlaho soo socdo: bandhigga warqadda cod bixinta, qabashada codka, diiwaan gelinta codka, iyo gelinta jadwal. DRE waa siistem cod bixin oo ku shaqeysa elataroonig mideysan oo elataroonig ahaan laga helo dhamaan afarta shaqo ee ku jira hal qalab. Siistemka skaanka aragga (loona yaqaan Marksense) halkas uu cod bixiyaha adeegsado qalabka calaameyn ta si uu u calaameeyo warqadda codbixinta kaddibna warqadda codbixinta ku riddo qalabka jadwalka taasoo qeyb ahaan ah elataroonig bacdamaa warqadda codbixinta fulliyo bandhigga, qabashada codka, iyo hawlaho diiwaan gelinta codka. Siistemka skaanka aragga oo ku shaqeeyo warqadda cod bixinta oo calaameeyo qalabka ku dara elataroonig labaad oo loo adeegsado bandhigga warqadda cod bixinta iyo hawlaho codka.

Electronically Tabulated Totals - Iskudarka Jadwalka Elatarooningga

Jadwalka natijadaha doorashada lagu qoray qalabka elatarooningga.

Eligibility for Office - Xaq u Yeelashada Xafiiska

Dhamaan sharuudaha sharciga si loo qabto xafiiska dadweynaha.

Eligible Candidates - Musharaxiinta Xaqa u Yeeshaa

Musharaxiinta dhamaystiray dhamaan waxyaabaha loo baahan yahay iyo la kulma dhamaan sharuudaha sharciga si ay uga qeybgalaan hawsha doorashada.

Eligible Citizens – Muwaadiniinta Xaq u Yeeshaa

Dhamaan cod bixiyeyaasha guud, haddii ay dhiibtaan codkooda waxay xaq u leeyahiin in ay qabsadaan tartanada ay xaqa u leeyahiin xagga warqadda cod bixinta la geliyay jadwalka. Tani waxaa ka mid ah kuwa aan ka muuqanin liiska cod bixiyeyaasha la ogol yahay maxaa yeelay waxay ku nool yahiin diiwaan gelinta isla-maalinta ama gobol aan la diiwaan gelinin iyo aan la diiwaan gelinin ama la diiwaan gelin karin waqt hore.

Eligible to Vote - Xaq u Yeelashada Cod Bixinta

Qofka la kulma sharuudaha ku jira qeyb hoose siyaasadda bacdamaa uu awoodo in uu codkiisa dhiibto.

Eligible Voters - Cod Bixiyeyaasha Xaqa u Yeeshaa

Dhamaan cod bixiyeyaasha guud, haddii ay dhiibtaan codkooda waxay xaq u leeyahiin in ay qabsadaan tartanada ay xaqa u leeyahiin xagga warqadda cod bixinta la geliyay jadwalka. Tani waxaa ka mid ah kuwa aan ka muuqanin liiska cod bixiyeyaasha la ogol yahay maxaa yeelay waxay ku nool yahiin diiwaan gelinta isla-maalinta ama gobol aan la diiwaan gelinin iyo aan la diiwaan gelinin ama la diiwaan gelin karin waqtii hore.

Emergency Ballot - Warqadda Cod Bixinta Degdegga

Warqadda cod bixinta la siiyo cod bixiyaha sida hoos timaado daruufaha khaaska, sida ka maqnaashada gobolka inta ay socoto doorashada ama la barakiciyo maxaa yeelay waxaa jira musiibada dabiiciga.

Enclose - Ku dhex jiro

In shay la dhex geliyo gudaha shay kale, sida marka warqadda cod bixinta la geliyo bakhshadda qarsoodiga.

Encryption - Qarinta (Encryption)

Habka mugdi loo geliyo maclumaadka marka qoraalka caadiga loo baddalo nambaro (cipher text) si loo adkeeyo sekuritiga ama asturnaanta.

Endorsement - Qaabilaadda

Waa falka marka qofka bixiyo ogolaashadiisa ama taageero siiyo qof kale sida musharaxa u tartama xafiiska dadweynaha ama su'aal ku saabsan warqadda cod bixinta.

Error Correcting Code - Koodka Sixidda Qaladka

Sistemka koodka ee u ogolaata xogta in la akhriyo ama la gudbiyo ee loo baahan yahay in laga hubiyo qaladaad iyo, marka la ogaado, saxda qaladaadkaas.

Error Rate - Qadarka qaladka

Saamiga tirada qaladaadka dhaca iyo qiyaasta xogta laga shaqeeyo.

Error Rate Standards - Heerarka Qadarka Qaladka

Tirada ugu badan khaladaadka la ogol yahay ee ku dhici kara xogta laga shaaqeyay, sida ay u dajiyeen madaxda rasmiga.

Exhausted Ballot - Warqadda Cod Bixinta Laga Dhamaystay

Waxay tixraacdaa xullasho la kala sareysiiyay tartanka warqadda codbixinta, marka warqaddaas codbixinta aysan shaqeyn kaddibna aan loo gudbin karin jadwalka tartanka maxaa yeelay ma jiraan kala sareysiin shaqeyn karto oo lagu sameeyo warqadda codbixinta si loo sii wado fursadaha tartanka sii socda.

Exit Poll - Wareysi

Wareysi laga qaaday boqolkiiba in yar cod bixiyeyaasha marka ay ka tagaan goobta cod bixinta, oo loo adeegsado in lagu daadaaliyo natijada ka soo baxda doorashada ama la ogaado asbaabta ka dambeysa go'aanada cod bixinta.

Expected Mark - Calaamadda la Filaayo

Calaamadda si buuxda ama qeyb ugu dhacda gudaha bartirmaameedka tartanka.

Expense Report - Warbixinta Kharashka

Warbixin tafatirta kharashka siyaasadda oo loo baahan yahay in ay gudbiso maamulka dawladda.

Extended Hours - Saacadaha La Fidiyay

Marka qofka awoodda leh talaabo rasmi ah oo dheereeyso tirada saacadaha loo baahan yahay ay cod bixiyeyaasha ay codkooda dhiibin karaan taasoo ka jwaabta xaalad daahisay ama yareysay cod bixinta.

Extensible Markup Language – Luqadda Calaamadda la Fidin Karo

Luqad qoran oo loo isticmaalo in lagu habeeyo iyo lagu soo bandhigo macluumaad World Web (XML).

Extension - Fiddin

Sida "dheereynta waqtiga" ama "dheereynta saacadaha goobta cod bixinta."

Extraneous Mark - Calaamad aan munaasab ahayn

Calaamad ku taal warqadda cod bixinta oo u muuqata in aysan la xariirin ficolka muujiya xullashada cod bixiyaha. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah: calaamad aan lagu talogelin uu cod bixiyaha ku sameeyo balse aan xariir la lahayn xullashada; calaamad muujisa shakki, dhibic ku taal gudaha ama dibadda booska tartanka la sameyay marka qalanki ama laabis la gaarsiiyo warqadda codbixinta, xasuusin ama macluumaadka lagu aqoonsado balse aan la xariirin tilmaanta xullashada cod bixiyaha; ama daabacaadda cilladaha.

F

Fail-Safe Ballot - Warqadda Cod Bixinta Leysku Haleeyo

Warqadda cod bixinta uu dhiibto cod bixiyaha aan ku jirin liiska cod bixiyeyaasha xaqa u yeesha, kuwa macluumaadkooda uusan dhamaystirneen ama uusan sax ahayn, ama warqadd cod bixinta horay loogu diray boostada oo loo ogolaaday in ay codkooda dhiibtaan. Warqadaha cod bixinta leysku haleeyo waxaa badanaa la dhigaa meel gaar ka ah warqadaha cod bixinta kale ilaa sarkaalka doorashada go'aan ka gaaro haddii cod bixiyaha uu xaq u leeyahay in uu dhiibto xaqiisa. Warqadahaan cod bixinta waxaa lagu magacaabaa warqadaha cod bixinta ku meel gaarka ah.

Fail-Safe Voter - Cod Bixiyaha Warqadda Cod Bixinta

Cod bixiyaha aan ku jirin liiska cod bixiyeyaasha loo ogol yahay, kaasoo macluumaadkiisa uusan dhamaystirneen ama uusan sax ahayn, ama horay lwarqadda cod bixinta loogu soo diray boostada balse loo ogolaaday in uu dhiibto codkiisa. Warqadaha cod bixinta leysku haleeyo waxaa badanaa la dhigaa meel gaar ka ah warqadaha cod bixinta kale ilaa sarkaalka doorashada go'aan ka gaaro haddii cod bixiyaha uu xaq u leeyahay in uu dhiibto xaqiisa. Warqadahaan cod bixinta waxaa lagu magacaabaa warqadaha cod bixinta ku meel gaarka ah.

Fault - Cillad

Cilladda handasada ama fullinta dhallin kartaa tayada ama dabeeecadda siistemka codbixinta ee ka leexata tayada ama dabeeecadda la filaayo, kana mid ah kuwa ku cayiman WSG ama warqadaha uu soo saaray soo-saaraaha.

Fault-tolerant - U Dulqaadashada Cilladda

Siistemka ku sii socoto in ay hawlgasho kaddib kombuyutarka ama qeyb ka tirsan shabakada shaqeeyn weyso.

Federal Election - Doorashada Federaalka

Doorashada musharaxiinta xisbiyada, guud, dheeraad, ama doorashada khaaska halkaas oo musharaxa xafiiska Federaalka (Madax Weynaha, Senateka, ama Wakiilka) yahay qofka ku qorana warqadda doorashada.

Federal Election Campaign Act (FECA) - Sharciga Ololaha Doorashada Federaalka

Xuduud go'an oo ku saabsan xisaabta lacagta ay bixin karto shirkad, wadajir, ama qof gaar ah siin karto musharax ku qebygaa doorashada federaalka. Waxay kaloo ka rabtaa musharaxiinta iyo guddiyada waxqabadka siyaasadda (political action committees) (PACs) in ay kashifaan resiidyadooda iyo aqoonsadaan wawa dadka ku biiryaan. Waxaa jirta baddalaad la sameyay 1974 oo ka hadashay deeqda ilaa inta ay gaarto ku biirinta dheeraadka kaddibna tilmaantay kharashka ku baxa musharaxiinta doorashooyinka musharaxiinta xisbiyada iyo dooraashooyinka guud, hase ahatee, Maxkamadda Sare waxay meesha ka saartay qodobka dambe sida in uu jebiyo dastuurka sida Buckley v. Valeo, 424 U.S. 1 (1976). Baddalaaddii 1974 waxay kaloo dhistay Guddiga Doorashooyinka Federaalka (Federal Election Commission) kaddibna waxay dhistay maalgelinta dadweynaha doorashooyinka madax weynaha. Waxaa jira labo baddalaad dheeraad ah (1976, 1979) oo loogu talogalay in ay hagaajiyan PACyada iyo riixidda heerka ka-qeybgalka xisbiga.

Federal Election Commission (FEC) - Guddiga Doorashada Federaalka

Wakaalad madax banaan oo mas'uul ka ah bixinta iyo hirgelinta shariyada ololaha doorashada federaalka. FEC waxay kor ka eegrtaa maal gelinta dadweynaha doorashooyinka madax weynaha, waxay hubisaa in dadweynaha loo kashifo hawlahaa maalgelinta, la socoshada deeqda ololaha iyo kharashka, waxay sharchiyo u samaysay hawlahaa ololaha guddiyada falka siyaasadda (PACyada), iyo waxay baartaa warbixinta jebinta shariyada. Waxay ka kooban tahay lex guddomiyeyaa uu madax weynaha magacaabo kaddib marka uu la tashto iyo ogolaasho ka helo senateka.

Federal Election Inspector - Fattashaha Doorashada Federaalka

Fattashaha guud federaalka Mareykanka (IG) waa madaxa ururka madax banaan, aan xisbi raacsaneen, lagana sameyay gudaha laanta fullinta ee loo xilsaaray in ay xisaabiso hawlahaa wakaaladda si loo ogaado kaddibna loo baaro kiisaska dhaqan xumada, khasaarinta, khayaanada, iyo ku xadgudubka kale ee loo geysto hababka dawladda ee ka dhaca gudaha wakaaladda.

Federal Information Processing Standards (FIPS) - Heerarka Ka Shaqeeynta Macluumaadka Federaalka

Heerarka siistemyada kombuyutarka federaalka ay soo saartay NIST. Heerarkaan waxaa la soo saaraa marka aysan jirin heerarka warshadaha si wax looga qabto sharuudaha federaalka xagga wada shaqeeynta siistemka, qaadashada xogta iyo brogramka, iyo ammaanka kombuyutarka.

Federal Observer - Kor Ka Eegaha Federaalka

Sharciga Xuquuqda Cod Bixinta (Voting Rights Act) wuxuu u ogol yahay kuwa federaalka ee kor ka eega si ay ula socdaan hababka ka jira goobaha xod bixinta iyo goobaha meelaha lagu tiriyo warqadaha cod bixinta ee qeybaha hoose ee xaqa u yeeshaa.

Federal Office - Xafiiska Federaalka

Madax Weynaha Mareykanka, xubinta Senatka, ama xubinta ka tirsan Aqalka Wakiilada.

Federal Postcard Application (FPCA) - Arjiga Kaarka Federalka

Taxadiyada militariga iyo cod bixiyeyasha dibadda waa isbaddalada balaaran ee ka jira shariyada iyo hababka xakuma diiwaan gelinta iyo cod bixinta gobolada. FPCA waxay u shaqeysaa sida diiwaan gelinta midaysan iyo arjiga codsiga warqadha cod bixinta ee laga ogolaado dhamaan gobolada iyo dagmooyinka Mareykanka.

Federal Service Voters - Cod Bixiyeyasha Adeegga Federaalka

Militariga shaqeeyo iyo xubnaha qoyska iyo dhakhsiyadka, u codeeyo iyagoo ku sugaran yahiin dibadda.

Federal Services Ballot - Warqadda Adeegyada Federaalka

Warqaadda cod bixinta waajibka militariga iyo xubnaha qoyska iyo shakhsiyadka, ee codkooda dhiibta iyagoo daggan dibadda.

Federal Voting Assistance - Kaalmada Cod Bixinta Federaalka

Kaalmada laga heli karo Brograamka Kaalmada Codbixinta Federaalka (Federal Voting Assistance Program) lana siiyo cod bixiyeyaasha ku jira miliatariga iyo madaniyiinta dibadda.

Federal Voting Assistance Officers – Saraakiisha Kaalmada Cod Bixinta Federaalka

Saraakiisha Kaalmada Cod Bixinta (Voting Assistance Officers) (VAOs) waxay ka wada shaqeyaan hubinta in militariga iyo cod bixiyeyaasha dibadda fahamsan yahiin xuquuqdooda cod bixinta, sida loo diiwaan geliyo cod bixinta maqanaha, iyo si loo helo maclumaaadka cod bixinta aan xisbi ka tirsaneen oo sax ah iyo kaalmo. VAOyada waxay ahaan karaan xubno ka tirsan Adeegyada Midaysan (Univormed Services), madaniyiin, ama xubnaha ururarada muwaadiniinta Mareykanka ee dibadda ku nool.

Federal Voting Assistance Program - Brograamka Kaalmada Cod Bixinta Federaalka

Kaalmada cod bixiyaha iyo brogfraamka waxbarashada si loo hubiyo in xubnaha ciidamada hubeysan Mareykanka, xubnaha qoyskooda ee xaqa u yeesho, iyo muwadiniinta Mareykanka ee dibadda ku sugar la socdaan xaqa ay u leeyahiin in cod bixinta iyo in ay haystaan qalabka ay sidaas ku sameyaan.

Federal Voting Rights Act - Sharciga Xuquuqda Cod Bixinta Federaalka

Sharciga Xuquuqda Doorashada (Voting Rights Act) ee 1965 waa sharci federaal oo muhiim ka ah Mareyknka oo mamnuuca takoorka isirka xaggaa cod bixinta.

Federal Voting Systems Standards (FVSS) - Heerarka Sistemyada Cod Bixinta Federaalka

Heerarka ugu yar Federaalka uu siistem kasta istimaalay xagga doorashada tartanka xafiiska Federaalka waa in ay la kulmaan.

Federal Write-In Absentee Ballot (FWAB) - Maqanaha Lagu Qoro Warqadda Cod Bixinta Federaalka

Warqadda cod bixinta banaan uu soo saaro Brograamka Kaalmada Codbixinta Federalka (ederal Voting Assistance Program) halkaas ay ciidamada iyo cod bixiyeyaasha dibadda ay codkooda ku dhiibin karaan iyagooy ku qora xullashadooda kaddibna warqadda cod bixinta ku celiya xafiiska doorashada.

Federally Recognized Tribes - Qabiilada Federaalka Aqoonsan Yahay

Hay'adaha qabaailka dhalladka ee loo aqoonsaday in ay xariir dawlad-ilaa-dawlad la qabaan Mareykanka, halkaas ay mas'uuliyadda, awoodda, xuduudda, iyo waajibaadka la socda qorshahaas, iyo waxay xaq u leeyahiin maaliyad iyo adeegyo ay ka qaataa Xafiiska Arrimaha Hindida (Bureau of Indian Affairs). Intaas kaddib, qabaailka federaalka aqoonsaday waxaa loo aqoonsan yahay in ay qabaan xuquuq u gaar ah sida dawlad u gaar ah (macnaha madax banaanida qabiilka) sidaas darteena waxay xaq u leeyahiin in ay helaan manaafacaadka federaalka, adeegyada, iyo badbaadinta xariirkha gaarka ay la leeyahiin Mareykanka.

Felony Disenfranchisement - Fogeynta Dambiga Culus

Dambi oo haysto in uu ka darran yahay dambi hoose (misdemeanor) iyo badanaa lagu ciqaabi karo luminta xuquuqda cod bixinta ilaa muddo.

File for Office - Faylka Xafiiska

Ficilka dhamaystirka warqadda loo baahan yahay si loogu dhawaaqo rabitaanka qofka in uu musharax ka noqdo xafiiska dadweynaha.

Filing Deadline - Taariikhda Ugu Dambeysa Gudbinta

Maalinta ugu dambeysa ee la gudbiyo warqadaha doorashada iyo cod bixinta lana xariirta doorasho cayiman. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah warqadaha lagu wareejiyo codsiga, gudbinta warqadaha si loo noqdo musharax, ama si loo gudbiyo kashifaadda maaliyadda ololaha.

Filing Electronically - Gudbinta Elataroonigga

Habka warqadaha doorashada loogu gudbiyo internetka.

Filing Fees - Khidmadaha Gudbinta

Xisaabta lacagta leyska rabo marka la gudbinaayo warqadaha doorashada, sida marka la gudbinaayo si loo noqdo musharax u taagan xafiiska dadweynaha.

Filing Petitions - Gudbinta Codsiyada

In si rasmi ah codsiga loo gudbiyo madaxda dawladda.

Fill in The Oval - Buuxi Goobada

Warqadaha cod bixinta qaar, cod bixiyeyaasha waxaa la faraa in ay buuxiyaan goobada la xariirta musharaxa ama arrinta, baddalkii la calaameyn lahaa X ama lagu fiqi lahaa fallaar.

Finalize Your Vote - Dhamaystir Codkaada

Talaabada ugu dambeysu uu cod bixiyaha qaado xagga xullahada qorshooyinka kaddibna ku xaqijiyo rabitaanka cod bixinta sia uu xushay.

Financial Disclosure Reports - Warbixinada Kashifaadda Maaliyadda

Warbixinta ee tafatira maclummaadka ku saabsan ilaha, nooca, xisaabta, ama qimaha dhakhliga sarakiisha dadweynaha iyo musharaxiinta xafiiska dadweynaha, ee loo baahan yahay in ay gudbiyaan madaxda dawladda.

Firmware - Brograam

Brograamka kombuyutarka ku keydsan xasuusta akhriska-keliya ee la gelin karo brograamka, kaddibna qeyb joogto ah ka noqdo qalabka kombuyutarka. Waxaa loo sameyaa loona tijaabiyyaa sida brograamyada.

First-Time Federal Voter - Cod Bixiyaha Federaalka Marka Kowaad

Cod bixiyaha iska diiwaan geliyo in uu codkiisa dhiibto ama ka codeeyo marka kowaad doorashada federaalka. Sida waafaqsan Sharciga Kaalmee Codbixinta Mareykanka (Help America Vote Act), cod bixiyeyaashaan waa in ay la yimadaan aqoonsi ka hor inta aysan dhiibarin codkooda.

First-Time Registrant - Isdiwaan Gelinta Marka Kowaad

Marka kowaad uu muwaadinka is diiwaan geliyo si uu codkiisa u dhiibto.

First-Time Voter - Cod Bixiyaha Marka Kowaad

Marka kowaad uu muwaadinta codkiisa dhiibto

Fiscal Statement - Bayaanka Xisaabinta

Warbixin tafatirta ku biirinta siyaasadda iyo kharashka loo baahan yahay in ay soo gudbiso dawladda.

Fixed Resident - Dagganaha Joogtada

Marka qofka si sharci ah iyo caadi ahaan isticmaalaha meelaha uu daggan yahay inta badan todobaadka, waxaa loo qaataa in ay tahay guri joogto ah uu daggan yahay xagga cod bixinta, kaddibna cod bixiyaha waxaa loo yaqaan sida qof daggan meel joogto ah.

For Election Day Use Only - Istimcaalka Maalinta Doorashada Keliya

Habka doorashada ee la isticmaali karo maalinta doorashada keliya.

Forms of Identification - Foomamka Aqoonsiga

Hababka lagu caddeeyo aqoonsiga qofka, khaas ahaan qaabka warqadaha rasmiga. Tusalooyinka caadiga waxaa ka mid ah Shattiga Wadaha, Baasaboor iyo warqadaha kale ay Dawladda soo saarto.

Fraud - Khayaano

Sida qaldan u sheegidda ama baddalaadda natijadaha runta ee doorashada.

Fraud Hotline - Telefoonka Khayaanada

Leenke telefoonka tooska ee loo sameyay in uu soo sheego arrimaha cod bixinta.

Fraudulently Registering to Vote - Khayaanada Diiwaan Gelinta Cod Bixinta

Nooc ka mid ah khayaanada cod bixiyaha halkas uu qofka diiwaan geliyo in uu dhiibto codkiisa ama diiwaan geliyo qof kale in uu dhiibto codkiisa isagoo isticmaala macluumaa been abuur ah, ama marka aysan xaq u lahayn in ay isdiiwaan geliyan si ay codkooda u dhiibtaan.

Free from Coercion Or IntimidationKa Madax Banaan Jujuub ama Cabsi Gelin

Xaqa loo leeyahay in la dhiibto warqadda cod bixinta iyadoo aan laga cabsanin dagaal, farsameyn, kadeed, ama cabsi gelin.

Functional Configuration Audit (FCA) - Xisaabinta Isku Toosinta Hawsha

Xaqiijinta tafatiran shaqada siistem kasta iyo isu keenidda hawlahu ku qoran warqadaha iibiyaha. FCA waxay xaqiijisaa sax ahaan iyo dhamaystirka buugga siistemka cod bixiyaha, hababka hawlgalada, hababka dayactirka, iyo hababka tijaabinta baarista.

Functional Test - Tijaabinta Wax Qabadka

Tijaabinta la sameeyo si loo xaqiijuo ama loo ansixiyo hawsha ama hawlahu la qabtay.

Fundraising - Qaaraanka

Si aad u raadsid taakuleynta maaliyadda la siiyo musharaxa siyaasadda, ololaha, ama ururka si loo qalqaaliyo natijada doorashada.

G

Grounds for Recall - Asbaabta Ka Dambeysso Soo Celinta

Asbaabta ay muwaadiniinta u bilaabi karaan hawsha sarkaalka la doortay looga saaro xafiiska.

Group Affidavit – Warqadda Dhaarta Kooxda

Oraah qoran oo loo marray dhaar ama marqaati ay ka yahiin kooxda shakhsiyadka.

Gubernatorial - Guddoomiyaha Gobolka

Tan la xariirta guddoomiyaha gobolka ama xafiiska guddoomiyaha gobolka.

Gubernatorial Election - Doorashada Guddoomiyaha

Doorashada marka xafiiska guddoomiyaha gobolka uu sidoo kale ku qoran yahay warqadda cod bixinta. Caadi ahaan waxaa ka mid ah tartanada xafiisyada ku baahsan gobolka, waxaa la sii haayaa muddo hal sanno marka laga reebo marka tartanka Madax Weynaha uu ku jiro tartanka Madax Weynaha.

Gubernatorial General Election - Doorashada Guud ee Guddoomiyaha

Doorashada marka dhamaan cod bixiyeyaasha xaqa u yeeshaa, iyadoo aan la fiirinin ka tirsanaanta xisbiga, awood u leeyahiin in ay codkooda siyyaan musharaxiinta si ay u buuxiyaan xafiiska dadweynaha iyo/ama codkooda ka dhiibtaan talaabadaha warqadda codbixinta, iyo xafiiska guddoomiyaha gobolka isagana ku qoran yahay warqadda codbixina.

Gubernatorial Primary Election - Doorashada Musharaxa Xisbiyada Guddoomiyaha

Doorashada la qabto si loo ogado musharaxa mattali doono xisbiga siyaasiga ee xafiiska doorashada guud iyo xafiiska guddoomiyaha gobolka wuxuu kaloo ku qoran yahay warqada codbixinta. Gobolada qaar waxay qabaan doorashada musharaxiinta xisbiyada, halka kuwo kale ay qabaan doorashada musharaxiinta xisbiga furan ama xeran. Marma doorashooyinka xafiisyada aan xisbiyada raacsaneen iyo arrimaha waxaa leysugu keenaa doorashada musharaxiinta xisbiyada.

H

Hand Count - Ku tirinta gacanta

Tirinta warqadaha cod bixinta iyo/ama xullahada warqadaha cod bixinta uu Aadana baaro.

Hand-marked Paper Ballot - Warqadda Doorashada Gacanta Lagu Calameyay

Warqadda cod bixinta uu calaameeyo cod bixiyaha marka la isticmaalo qalabka qorista. Warqadda cod bixinta waa qoraalka la xaqijin karo ee cod bixiyaha madax banaan.

Hanging Chads - Warqadaha Ku Hara Duleelka

"Chad" waxaa loola jeedaa gabalada marmar samaysma marka duleeliyo warqad, kaar ama shay kale oo la mid ah sida sinteetikada, sida kaararka la duleeliyay. "Hanging chad" waa qeybta ku soo harta duleelka marka leyskudayo in la duleeliyo warqadda cod bixinta.

Hard Money - Lacagta adag

Kharashka siyaasadda ee toos loo siiyo musharax gaar ah.

Hard of Hearing - Dhago Jigga

Waxaa loola jeedaa luminta maqalka, meel laga yaabo in ay ku hartay xoogaa maqal ku filan, uu qalabka maqalka ka geysan karo kaalmo.

Hardware - Qalab

Qeybaha, ta arki karo, makaankada ama elattromakaanikada siistemka.

Hash - Hashiishka

Algorithm that maps a bit string of arbitrary length to a fixed-length bit string.

Hash Function - Baddalaadda Xogta

A function that maps a bit string of arbitrary length to a fixed-length bit string. Ogolaashada la siiyay xogta la soo habeyay waxay buuxiyaan sifooyinka soo socdo: 1. (hal-jiha) Xisaab ahaan ma aha wax aan suurtogeli karin in la helo ku-biirin oo la socota soo-saar horay loo cayimay, iyo 2. (ka hortagta isku dhac) Xisaab ahaan ma aha wax aan suurtogeli karin in la helo labo ku-biirin oo kala soocan soona saarta natijo isla mid ah.

Hearing - Dhageysi

Fursad lagu sheego kiiska qofka loona adeegsado habka maamulka rasmiga.

Hearing Officer - Sarkanalka Dhageysiga

Qofka loo fasaxay in uu dalbado habka dharciga, fulliyo dhageysiyo, xalliyo qilaafaadka maamulka, fududeeyo waanwaanta ka dhhexeyso xisbiyada iska soo horjeedo, iyo soo saaro go'aanada sharciga.

Hearing Procedures - Hababka Dhageysiga

Sharciyada iyo taxanaha falalka xakuma sida dhageysiyada loo maamulo.

Help America Vote Act Of 2002 (HAVA) – Ku Kaalmee Mareykanka Sharciga Cod Bixinta

Sharci uu soo gudbiyo Kongreeska Mareykanka sannadkii 2002 si baddalaad loogu sameeyo habka cod bixinta qaranka. Cinwaanada HAVA

hagaajinta siistemyada cod bixinta iyo helitaanka cod bixiyaha ee la aqoonsaday, doorashada 2000 kaddib.

Help America Vote College Program - Kaalmee Brograamka Kulliyadda Cod Bixinta Mareykanka

Brograamka la fasaxay sida hoos timaada Sharciga Cod Bisinta Ku Kaalmee Mareykanka (Help America Vote Act) (HAVA) si loo dhiirigeliyo ka qeybgalka ardayga sida shaqaalaha wareysiga ama kaaliyeyaasha, si loo fududeeyo dannaha ardayga xagga doorashooyinka, iyo si loo dhiirigeliyo dawladaha gobolka iyo deegaanka in ay isticmaalaan ardayda sida shaqaalaha goobta.

High School District - Dagmada Dugsiga Sare

Qeyb joqraafi oo loogu talogalay maamulka hoose ee dugsiyada sare. Waa hay'ad dawlad ujeedada gaar tahay oo ku shaqeyso xubnaha guddiga la dooratay.

Hold an Election - Hakinta Doorashada

Ereyga la isticmaalo marka madaxda dawladda maamusho doorashada.

Hold Elections – Qabashada Doorashooyinka

Ereyga la isticmaalo marka madaxda dawladda maamulaan doorashooyinka.

Hold Hearings - Qabashada Dhageysiyada

Si loo muujiyo in wakaaladda ku hawlan tahay abaabulka hab uu qofka ama ururka ku sheego kiiska qofka, xalliyo murranka maamulka, fududeyn ta wada xaajoodka ka dhexeeyo dhinacyada iska soo horjeedo, kaddibna soo saaro go'aano ku saleysan sharciyada.

Hold Office - Haynta Xafiiska

Eray loo isticmaalo in lagu sharaxo qofka loo dhaariiyay xafiiska dadweynaha ee iminka ka shaqeyyo booska.

Home Rule - Sharciga Guriga

Xaqa dadka u leeyahay in ay dhisaan iyo baddalaan dhismaha dawladooda ee ku jirta magaaloooyinka, buuloooyinka, tuuloooyinka ama dagmooyinka kale si ay u dhisaan iyo u baddalaan dhismaha dawladooda.

Home Rule Charter - Dastuurka Awoodda Sharciga La Siiyo Qeyb Ka Tirsan Dawladda

Gobolada qaar, taasoo loo yaaqan sida sharciyada u gaarka ah gobolada qaar, dastuurka gobolka wuxuu dawladaha hoose iyo/ama dagmooyinka ku deeqay awoodda ay ku soo gudbiyaan sharcayo ay isku maamulaan hadba sida ay u arkaan (hase ahaatee waa in ay u hoggaansamaan dastuurka gobolka iyo dastuurka federaalka). Dastuurka waa warqadda qoran ee sifeysa sharciyada iyo xeerka hay'addas.

Home Rule City - Magaalada Sharciga Guriga

Magaalo qaadatay Dastuur soo taxa qaabka dawladda iyo sharciyada deegaanka.

House of Representatives - Aqalka Wakiilada

Aqalka hoose Kongreeska Mareykanka, halkas oo Senateka yahay aqalka sare. Wadajir ahaan, waxay ka kooban yahiin sharci dajinta labada qol ee qaranka Mareykanka. Qeybaha uu ka kooban yahay Aqalka waxaa lagu dajiyay Qodobka Kowaad ee Dastuurka Mareykanka.

House Seat - Kursiga guriga

Mid ka mid ah 435 gobol ee wakiilada cod bixinta loo doorto Aqalka Wakiilada Mareykanka (U.S. House of

Representatives).

Internal Audit Log - Buugga Xisaabinta Gudaha

Diiwaanka uu aadanaha akhrin karo, ku jirto mashiinka cod bixinta, ee loo isticmaalo in lala socdo dhamaan hawlaho mashiinkaas. Loggaan wuxuu qoraa hawl kasta oo lagu qabto ama mashiinka qabto taasoo muujisa dhacdada iyo goorta ay dhacday.

Internet Voting - Cod Bixinta Internetka

Soo celinta warqadda cod bixinta ama warqadaha macluumaadka cod bixiyaha ama isticmaalka brogramka Internetka ku shaqeeyo

Interoperability - Ka Dhix Shaqueynta

Ilaa xadka siistemyada soo saareyaasha kala duwan iyo qalabka ku sahqeeyo qaababka siistemka kala duwan ay u wada xariiri karaan.

Interpreter - Turjubaanka

Qofka u tarjama dadka ku xariira luqado kala duwan.

Interruption of The Voting Process - Fara Gelinta Hawsha Cod Bixinta

Cilladaha qalabka cod bixinta, saadka aan ku filneen, musiibootinka, ama shay kasta ka hor istaago cod bixinta.

Intrusion Detection System (IDS) - Siistemka Ogaanta Waxyabaha Soo Gala

Qalabka ama brogramka ogaada kaddibna soo sheega jebinta sekuritiga la tuhunsan yahay, jebinta siyaasadda, ama qaribaad kale oo laga yaabo in ay waxyeelo gaarsiiso shabakada.

Invalidate Your Vote - Xaqiji Codkaada

Qalad, ishaafin, ama ka boodid oo dhalliyi in codkaada aan lagu darrin natijada ka soo baxda doorashada ugu dambeysyo.

Irregularities - Qaladaadka

Shay aan sax ahayn ama aan la ogolaan karin, sida marka sharciyada, xeerarka, ama siyaabaha badanaa loo sameeyo waxyabaha aan la raacin.

Issue - Dhiibashada

In si rasmi ah qof loo siiyo shay.

Issue (To Issue A Vote) – Dhiibashada (Dhiibashada Codka)

Marka madaxda rasmiga, karaaniga doorashada, ama shaqaalaho cod bixinta uu cod bixiyaha siiyo warqadda cod bixinta si uu codkiisa u dhiibto.

Judge - Garsooraha

Sarkaalka mas'uulka ka ah nidaamka cod bixinta habboon ee ka jira goobta cod bixinta ama hawsha doorashada,

loona yaqaan Garsooraha Doorashooyinka (Election Judge).

Judicial Candidate - Musharaxa Xafiiska Maxkamadda

Musharaxa xafiiska Caddaaladda.

Judicial District - Maxkamadda Dagmada

Mid ka mid ah tirada dagmooyinka loo qeybiyo gobolka, dagmo kasta doorata musharaxiinta Caddaaladda.

Judicial Offices - Xafiisyada Maxkamadda

Booska Maxkamadda dadweynaha, ee loogu talogalay sarkaalka maamula sharciga.

Judicial Retention Election - Doorashada Xajinta Garsoorka

Doorashada marka cod bixiyeyaasha la weydiyo haddii qofka haayo xafiiska (badanaa garsoore) loo baahan yahay in uu sii haayo xafiiska muddo kale. Mas'uulka xafiiska, aan la kulmin qofka ka soo horjeedo, waxaa laga qaadaa booska haddii ay soo baxaan boqolkiiba cid bixiyeyaa muujiya in uusan xafiiska sii hayn karin.

K

Key Management - Maamulka Muhiimka

Hawlaha ku lugta leh qabashada fureyaasha qarsoodiga (cryptographic) iyo qodobada sekuritiga la xariira (tusaale erayga lagu galo) inta ay socoto wareegga nolosha oo idil ee fureyaasha, kana mid ah soo saarkooda, keydinta, dhisidda, gelidda iyo soo saarka, iyo eber ka dhigidda (zeroization).

L

Language Assistance - Kaalmada Luqadda

Sharciga Xuquuqda Cod Bixinta wuxuu mamnuucay xaq u yeelashada cod bixinta ku saleysan akhriska-ijo luqadda ama sharuudaha. Qeybta 203 waxay aqoonsan tahay takoorka cod bixinta balaaran ee loo geysto Dhalladka Alaska, Hindida Mareykanka, Aasiyaanka, iyo muwadiniinta laga tirada badan yahay luqadda Hisbaniga ee raadiya in uu meesha ka saaroi marka ay dalbato keenidda qoraalada luqadda dadka laga tirada badan yahay iyo kaalmo la xariirta habka doorashada - afka iyo/ama qoraal ahaan - lana siiyo kooxaha luqadda dadka laga tirada badan yahay. Qeybaha kale VRA, kana mid ah 4(e) iyo 208, waxay kaloo

la xariiraan luqadda la heli karo. The most recent reauthorization of the Voting Rights Act in 2006 extended Section 203 through 2032, and determinations were adjusted to occur every 5 years instead of 10.

Language Minority Citizens - Muwaadiniinta Luqadda Dadka Laga Tirada badan Yahay

Qodobada luqadda dadka tirada yar ee Sharciga Xuquuqda Cod Bixinta (Voting Rights Act) waxay u baahan yahiin in marka gobolka ama qeybta hoose siyaasadda bixiso diiwaan gelin ama ogeysiisyada cod bixinta, foomamka, tilmaamaha, kaalmada, ama qoraalo kale ama macluumaad la xariira habka doorashada, kana mid ah warqadaha cod bixinta, waa in ay ku bixiso luqadda ay ku hadasho dadka laga tirada badan yahay iyo sidoo kale luqadda Ingiriisiga. Luqadaha dadka laga tirada badan yahay waxay ku kooban yahiin Hindida Mareykanka, Mareykanka Aasiyaanka, Dhalladka Alaska, iyo muwadiniinta dhaqalka-Isbanishka - kooxaha uu Kongreeska u arkay in ay dhibaato kala kulmeen hawlaha siyaasadda.

Lawful Permanent Resident - Dagganaha Joogtada Sharciyeysan

Kuwa aan muwaadiniin ahayn ee sida sharciga waafaqsan yahay si joogto ah ku daggan waddanka gudaha Mareykanka.

Legal Holiday - Fasaxa Sharciga Ogol Yahay

Fasax uu sharaciga dajivo, badanaa maalin aan la shaqeynin sannadka.

Legislative Initiative Amendment - Baddalaadda Dadaalka Sharci Dajinta

Cabbirka warqadda cod bixinta ee soo jeedisa in la baddalo sharciga.

Legislative Ratification - Ogolaashada Sharci Dajinta

Ficilka ama hawsha xaqijinta rasmiga sharciga.

Lever Voting Machine - Mashiinka Codbixinta Lever

Waa mashiin toos u diiwaan gelisa xullashada cod bixiyaha una adegsata habka kantaroolka khataarka (lever) una baddasha habka tirinta codadka marka ay isticmaasho warqadda cod bixinta.

Lieutenant Governor - Ku Xigeenka Guddoomiyaha

Sarkaalka cod bixinta sare ee gobolada Alaska iyo Utah.

Life Cycle - Wareegga nolosha

Fikradda injineeriyyada siistemyada ee tilmaama marxaladaha siistemka gudbo, laga bilaabo fikradda ilaa uu ka dhamaysto. Waxaa jira arrimo kala duwan iyo hawlo la xariira qeyb kasta oo ka mid ah wareegga nolosha.

Limited Ballot - Warqadda Cod Bixinta Kooban

Warqadda cod bixinta la xariira qaar, balse aan ahayn dhamaan tartanada iyo cod bixiyeyaasha kale ay xaq u leeyahiin in ay codkooda ka dhiibtaan doorashada.

List of Registered Voters - Liiska Cod Bixiyeyaasha Diiwaanka Ku Jiro

Liiska dadka iska diiwaangeliyay liisa doorashada cod bixiyaha dagga yahay, sida shardi in qofka uu xaq u leeyaay in uu dhiibto codkiisa.

Local (Local Government) - Hoose (Dawladda Hoose)

Maamulka dawladaha ee ka hooseyo heerka gobolka kana mid ah - dagmooyinka, magaaloooyinka, dagmooyinka, xaafadaha, deegaanada.

Local Measures - Talaabadaaha Sharciga

Soo jeedin si loo hirgeliyo, baddalo, ama laga noqdo sharci cusub, ammarada, ama dastuurka heerka dawladda ee lagu qoray warqadda cod bixinta si ay cod bixiyeyaasha u ogoladaan ama u diidaan.

Logic and Accuracy (L&A) Testing - Tijaabinta Xikmadda iyo Sax Ahaanta (Logic and Accuracy) (L&A) Tijaabita

Qalabka iyo tijaabinta diyaarinta siistemka ee ujeedadiisa tahay in ay ogadaan sida qaldan ay qalabka u shaqeyaan iyo sida qaladan ee doorashada loo habeyay ka hor inta qalabka ama siistemyada aan loo isticmaalin doorashada.

Maamulada waxaa laga rabaa in ay tijaabiyaan sax ahaanta nooca warqadda codbixinta si loo ogaado in xulasho kastaao suurtogal ah iyo shaqeyso uu sameeyo cod bixiyaha waxaa lagu qaban karaa ama waxaa ka shaqeyn karo siistemka cod bixinta, farsamo ahaan iyo sharci ahaan. Saraakiisha doorashada waxay fulliyaan tijaabinta L&A ka hor inta aan la bilaabin doorashada taaso qeyb ka ah hawsha diyaarinta siistemka iyo qalabka loo isticmaalo doorashada sida waafaqsan dhaqanka maamulka iyo waafaqsanaanta sharciyada gobolka.

Logical Correctness - Sax Ahaan Xigmadda

Xaalad macnaheeda yahay, in marka wax lagu biiryo, brograamka kombuyutarka wuxuu ku shaeyn doonaa sifooyinka brograamka kaddibna wuxuu soo saari doonaa natijjada looga baahan yahay.

Look at Both Side of Your Ballot - Fiiri Labada Dhinaca Warqadaada

Tilmaamaha cod bixinta ee xasuusiya cod bixiyeyaasha in tartanada doorashada waxay ka muuqan karaan labada dhinac, horay iyo gadaal warqadda cod bixinta.

Low/No Dexterity Mode - Low/No Dexterity Mode

Habka isdhexgalka iyo sifooyinka gelitaanka cod bixiyeyaasha aan isticmaali karin hal ama labada gacan ama qabashadooda liidato.

M

Machine-Readable Mark - Calaamadda Mashiinka Akhriyo

Calaamad ku taal booska xullashada tartanka warqadda cod bixinta ee la kullanta sharuudaha uu mashiinka skaanka ku ogaado.

Machine-Readable Mark - Calaamadda Mashiinka-Akhrin Karin

Calaamadda booska xullashada tartanka ee warqadda cod bixinta aan loo arki karin uusan akhrin karin skannarka ama dhinac iska dhigo skannarka una baahan in qofka uu go'aan ka gaaro.

Magisterial District - Dagmada Garsoorka

Mid ka mid ah tirada dagmooyinka loo qeybiyo gobolka, dagmo kasta doorata musharaxiinta Caddaaladda.

Magisterial District Judge - Garsooraha Maxkamadda Magacaawday

Sarkaalka madaniga ama garsooraha maamula sharciga, gaar ahaan midka maamula maxkamadda ku lugta leh gafafka yaryar iyo dhageysiyo hore u qabta kuwa culus.

Mail Ballots (Noun) - Warqadaha Cod Bixinta Boostada (Magaca)

Warqadda cod bixinta uu dhiibto cod bixiyaha marka la reegbo qofka qof ahaan u yimaado goobta cod bixinta. Warqadaha cod bixinta caadi ahaan boostada loogu diro cod bixiyeyaasha balse laga isticmaali karo xafiiska doorashada. Sida ku xeran maamulka, warqadaha cod bixinta lagu diro boostada waxaa lagu soo celi n karaa boostada, sanduuqa lagu riddo, ama qof ahaan. Warqadaha cod bixina boostada lagu soo diro lana raaciyo warqadaha codkaada ku dhiibo boostada iyo warqadaha maqanaha.

Mail Ballots (Verb) – Warqadaha Cod Bixinta Boostada (Ficilka)

Habka warqadaha cod bixinta loogu diro cod bixiyeyaasha marka la isticmaalo Adeegga Boostada Mareykanka.

Mail-In Voter Registration Form - Foomka Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha Lagu Soo Diro Boostada

Foomka uu isticmaalo cod bixiyaha si loogu soo diro warqadda cod bixinta.

Mailed Ballot Election - Doorashada Warqadda Cod Bixinta La Soo Diro

Doorashada la fulliyo lagu fulliyo isticmaalka waradaha cod bixinta la soo diro taasoo aan bixinin fursadaha cod bixinta qof ahaan la codeeyo ama kooban yahiin fursadaha cod bixinta qof ahaan la codeeyo.

Mailed Ballot Precinct - Warqadda Cod Bixinta Xaafadda ee Boostada Lagu Soo Diro

Xaafadda cod bixinta aan qof ahaan loo tagi karin si loo dhiibto codka.

Mailing Address - Cinwaanka Lagu Soo Diro Warqadaha:

Cinwaanka meesha qofka uu ka heli karo warqadaha boostada, oo laga yaabo in ay ka duwan tahay meesha qofka daggan yahay.

Majority - Dadka Inta Badan

In ka badan bar ka bar.

Majority of The Votes - Inta Badan Codadka

In ka badan bar ka bar codadka la dhiibtay.

Majority of Voters - Inta Badan Dadka Codkooda Dhiibta

In ka badan bar ka bar cod bixiyeyaasha.

Majority Party - Inta Badan Xisbiga

Xisbi siyaasi ee qaata ugu yaraan boqolkiiwa iskudarka codka maamulka ama haysta xoog ku filana in uu ku guuleysto kantaroolka dawladda ama u dhigma mucaaradka ugu muhiimsan xisbiga ku guuleysta.

Majority Voting - Cod Bixinta Dadka Tirada Badan

Isbaddalka codka oo ka raba musharaxa guuleysta in uu helo in ka badan bar ka bar codadka la dhiibto. Haddii musharax uusan ku guuleysanin tirada badan, waxaa dhici karto in la qabto doorashada dheeraadka una dhexeyso labada ku guuleystay codadka.

Make Void - Bannad

Gaf, qalad, ka boodid, ama fal lagu talogalay oo dhalliya cod aan lagu darrin natijjada ka soo baxda doorashada ugu dambeysyo.

Malware - Waxyeelada Brograamyada (Malaware)

Brograamka ama qalabka ku shaqeeyo brograamka loogu talogalay in uu fulliyo hawl aan loo fasixin oo waxyeelo gaarsiin kartaa qarsoodiga, nadaafadda, ama halitaanka siistemka. Tusaale ahaan, firuska, tixriga, faraska Trojan, ama shay kale oo ku shaqeeyo kood oo waxyeelo gaarsiiy marti geliyaha. Brograamyada "spyware" iyo qaar ka mida "adware" sidoo kale waa tusalooyinka ku saabsan "malware."

Mandate - Awoodda la Siiyay

Sarkaalka ama ammarka madaxda, badanaa ku saleysan sharciga la dajiyay ama ammarka fullinta.

Manual Tabulation of Ballots - Gacan Ku Tirinta Warqadaha Cod Bixinta

Tirinta warqadaha cod bixinta iyo/ama xullahada warqadaha cod bixinta uu aadana baaro.

Manually-Marked Paper Ballot – Warqadda Cod Bixinta Gacanta Lagu Tiriay

Warqadda cod bixinta uu calaameeyo cod bixiyaha marka la isticmaalo qalabka qorista. Warqadda cod bixinta waa qoraalka la xaqijin karo ee cod bixiyaha madax banaan.

Mark - Calaamad

Calaamad kasta uu sameeyo saxiixaha oo mattasha fullinta warqadda ama muujisa xullahada codbixinta.

Marked Ballot - Warqadda Cod Bixinta la Calameyay

Warqadda cod bixinta ee laga helo xullahada cod bixiyaha.

Marking Device – Qalabka Calaameynta

Qalab u ogolaada in tartanka laga xusho iyo laga fiiriyo xariirka elataroonigga oo aan qoraal joogto ah ka sameynin xullahooinka uu sameeyo cod bixiyaha.

Marksense - Siistemka diiwaan gelinta codadka

Siistemka marka codadka lagu qoro calaamadaha lagu qoro meelaha jawaabta cod bixinta ee hal ama labada weji kaarka cod bixinta ama taxanaha kaararka. Siistemyada Marsense waxay isticmaali karaan skaanka aragga ama sensor la mid ah si uu u akhriyo warqadda cod bixinta. Sidoo kale loo yaqaan skaanka aragga

Master Voter Registration List - Liiska Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha Sare

Liiska cod bixiyeyaasha lagu haayo hal meel, israacsan, rasmi ah, la geliyay kombuyutar gobolka oo idila ama diiwaan gelinta cod bixiyeyaasha.

Measure - Cabbir

Tallo lagu hirgeliyo sharci cusub ama baddalaadda dastuurka oo ku qoran warqadda cod bixinta si loo ogaado ogolaashada ama diidamada cod bixiyeyaasha.

Measure Information - Macluumaadka Cabbirka

Qeypta qoraalada cod bixinta ee laga helo macluumaadka ku saabsan sharci cusub ama baddalaadda dastuurka ee lagu meeleyay warqadda cod bixinta si ay u ogoladaan ama u diidaan cod bixiyeyaasha.

Measure Register - Cabbirka Diiwaan Gelinta

Diiwaanka muujiya wadarta codadka la siiyay ama ka soo horjeedo arrinta warqadda cod bixinta.

Mechanical Lever Voting Machine - Mashiinka Cod Bixinta Qalabka Makaanikada

Waa mashiin toos u diiwaan gelisa xullahada cod bixiyaha una adegsata habka kantaroolka khataarka (lever) una baddasha habka tirinta codadka marka ay isticmaasho warqadda cod bixinta.

Memory Card - Kaarka Xasuusta

Qalabka keydinta xogta elataroonigga loo isticmaalo keydinta macluumaadka digitalka, caadi ahaan isticmaalka xasuusta "

Method of Application - Habka Arjiga

Dadweynaha waxay heli karaan dhowr habab la isticmaalo si ay isu diiwaan geliyan kaddibna u dhiibtaa codkooda.

Midterm Election - Doorashada Xilliga Dhexe

Doorashooyinka la qabto inta u dhexeyso doorashooyinka madax weynaha.

Military Voting - Cod Bixinta Militariga

Xubin ka tirsan Adeegyada Midaysan (Uniformed Services) oo haaya hawl, kana mid ah ciidamada, ciidana cirka, ciidamada mariinka, ilaalinta xeebta, iyo ciidanka tijaarada, iyo xaasaskooda iyo kuwa ku tiirsan.

Military Voting Assistance Officer - Sarkaalka Kaalmada Cod Bixinta Militariga

Saraakiisha Kaalmada Cod Bixinta (Voting Assistance Officers) (VAOs) waxay ka wada shaqeyaan hubinta in militariga iyo cod bixiyeyaasha dibadda fahamsan yahiin xuquuqdooda cod bixinta, sida loo diiwaan geliyo cod bixinta maqanaha, iyo si loo helo macluumaadka cod bixinta aan xisbi ka tirsaneen oo sax ah iyo kaalmo. VAOyada waxay ahaan karaan xubno ka tirsan Adeegyada Midaysan (Univormed Services), madaniyiin, ama xubnaha ururarada muwaadiniinta Mareykanka ee dibadda ku nool.

Minimum Standards - Heerarka Ugu Yar

Heerka ugu hooseeyo tayada ama wax qabadka la ogolaan karo.

Minimum Voting Age - Da'da Ugu Yar Cod Bixinta

Da'da uu sharciga dajijo in qofka uu gaaro da' si uu xaq ugu yeesho in uu xodkiisa ka dhiibto doorashada dadweynaha.

Minor Party - Xisbiga Yar

Xisbi siyaasi aan la kulmin sharuudaha loo baahan yahay in la aqoonsado sida xisbi weyn, balse loo aqoonsan yahay si caadi ah maxaa yeelay musharaxiintooda waxay heleen boqolkiiba xoogaa codka ama waxay wax ku heleen habka codsiga.

Mismarked - Sida Qaldan ee Loo Calameyay

Gaf, qalad, dhaafid, ka boodid, ama fal lagu talogalay oo dhallya rabitaanka cod bixiyaha in aan lagu darrin natijjada ugu dambeysa doorashada.

Mixed Ticket - Tigidhka Isku Qaldan

Warqadda cod bixinta halkaas ay cod bixiyeyaasha dooran karaan musharaxiinta ay xushaan iyadoo aan la fiirinin xisbiga ay ka tirsan yahiin ilaa inta ugu badan ee loo ogol yahay sannad kasta.

Mock Election - Tijaabinta Doorashada

Munaasabad waxbarasho aan dhinacna raacsaneen oo aasaasiyan bara dhallinta sida loo dhiibto codka.

Modified Closed Primary - Doorashada Musharaxiinta Xisbiyada la Baddalay

Doorashada musharaxiinta xisbiyada oo u ogolaata xisbiyada gobolka in ay go'aan ka gaaraan haddii ay u ogol yahiin cod bixiyeyaasha ku jira diiwaanka iyagoo aan haysanin xisbi siyaasi raacsan yahiin [ka qeybqaataan doorashooyinka musharaxiinta xisbiyada.

Modified Open Primary - Doorashada Musharaxiinta Xisbiyada Furan ee la Baddalay

Doorashada musharaxiinta xisbiyada oo u ogolaata xisbiyada gobolka in ay go'aan ka gaaraan haddii ay u ogol yahiin cod bixiyeyaasha ku jira diiwaanka iyagoo aan haysanin xisbi siyaasi raacsan yahiin [ka qeybqaataan doorashooyinka musharaxiinta xisbiyada.

Monitor and Device Controller - Kantaroolaha Kormeerka iyo Qalabka

Taabashada qalabka maqalka oo u ogolaato dadka isticmaala in ay xushaan.

Motor Voter – Cod Bixiyaha Matoorka

Sharcigaan, badanaa loo yaqaan "Sharciga Cod Bixiyaha Baabuurka" ("Motor Voter Law") wuxuu u baahan yahay in gobolada bixiyaan fursad ay ku diiwaan geliyaan xafiisyadooda shatti bixinta baabuurta (ee gobolo badan looga yaqaan DMV). Sharciga wuxuu kaloo rabaa in gobolada bixiyaan diiwaan gelinta cod bixiyaha laga bixyo xafiisyada laga helo kaalmada dadweynaha ama brograamyada gobolka maalgeliyo ee aasaasiyan ku hawlan bixinta adeegyada la siiyo dadka itaalka darran, iyo xafiisyada qoritaanka adeegyada hubeysan. NVRA waxay kaloo bixisaa tilmaamo ku saabsan maamulka liiska diiwaan gelinta iyo waxay xuduud u sameysaa sida cod bixiyeyaasha looga saari karo liisaska.

Multi-Member District - Dagmada Xubnaha Badan

Dagmada cod bixinta ama dad la mattalo oo leh labo ama ka badan wakiil sharci dajinta baddalkii hal.

Multi-Seat Contest - Tartanka Kuraasta Badan

Tartanka marka musharaxiinta badan u tartami karaan, ilaa tiro kooban kuraasta. Cod bixiyeyaasha waxay codkooda ka dhiibban karaan tirada go'an ee musharaxiinta.

Municipal - Dawladda Hoose

La xariirta magaalo, dagmo, buulo ama tuulo, marka laga reebo gobolada New England, New York, iyo Wisconsin, halkaas uu qeybta hoose magaca tuulada loola jeedo dagmada ama gobolka

Municipal Ballot - Warqadda Cod Bixinta Dawladda Hoose

Warqadda cod bixinta musharaxiinta ama talaabadaha la xariira maamulka dawladda hoose.

Municipal Bond Election - Doorashada Bondka Dawladda Hoose

Doorashada marka soo jeedinta lagu ogolaado dawladda hoose in ay ogolaato in kharash dheeraad ah la geliyo halkaas oo deynta iyo waajibka dib loo bixyo lana raaciyo korsaar ku qoran tahay warqadda codbixinta si loo ogolaado ama loo diido.

Municipal Elections - Doorashooyinka Dawladda Hoose

Doorashada caadiga ee musharaxiinta iyo hababka ka jiro gudaha dawladda hoose.

Municipal School District - Dagmada Dugsiga Dawladda Hoose

Qeyb ka tirsan joqraafiyada ee loogu talogalay maamulka dugsiyada hoose iyo sare heerka deegaanka.

Municipal Water District - Dagmada Biyaha Dawladda Hoose

Gobol joqraafi ahaan ka tirsan dawladda hoose oo ku hawlan in bulshada la siiyo biyaha iyo bullaacadaha.

Municipality - Dawladda Hoose

La xariirta magaalo, dagmo, buulo ama tuulo, marka laga reebo gobolada New England, New York, iyo Wisconsin, halkaas uu qeybta hoose magaca tuulada loola jeedo dagmada ama gobolka



National - Qaranka

Ka tirsan ama ay ka shaqeyaan dawladda hoose.

National Association Of Secretaries Of State (NASS) - Ururka Xogeynta Gobolka ee

Urur aqoonyaan aan xisbi la jirin oo ka kooban sarakiiha dadweyna kana kooban xogeynta gobolada iyo dagmooyinka Mareykanka.

National Association Of State Election Directors (NASED) - Ururka Agaasimeyaasha Doorashada Gobolka ee Qaranka

Urur aqoonyaan aan xisbi la jirin oo ka kooban agaasimeyaasha doorashada gobolka iyo maamuleyaasha gobolada iyo dagmooyinka Mareykanka.

National Certification Test Report – Warbixinta Tijaabinta Shahaadada Qaranka

Warbixinta natijadaha tijaabada madax banaan ee siistemka cod bixinta ay fulliso shayaarka tijaabinta la aqoonsan yahay loona diro

Guddiga Kaalmada Doorashada Mareykanka (U.S. Election Assistance Commission) iyo siinta nambarka caddeynata.

National Certification Testing - Tijaabinta Caddeynata Qaranka

Baaraanada iyo tijaabinta siistemka cod bixinta si loo ogaado haddii siistemka u hoggaansamo shaqada iyo sharuudaha kale ee heerarka shahaadeynta qaranka iyo sifooyinka u gaarka ah.

National Change of Address Program (NCOA) - Baddalka Qaranka Cinwaanka Brograamka (National Change of Address Program) (NCOA)

Xog sugar, qiyas ahaan 160 malyan isbaddal joogto ah cinwaanka (COA) diiwaanada ka kooban magacyada, iyo cinwaanada dadka, qoysaska, iyo ganacsatada soo gudbiyo isbaddalka cinwaanka USPS. Sarakiisha doorashada waxay isticmaalaan NCOA si ay u casriyeen diiwaanada xogta diiwaan cod bixiyaha.

National Convention - Heshiiska Qaranka

Shirka meesha ay isugu yimaadaan xisbiyada gobolka iyo dhulka si loo doorto qofka loo magacaabo madax weynaha.

National Institute of Standards and Technology (NIST) - Hay'adda Qaranka u Qaabilsan Heerarka iyo Farsamada

Ururka federaalka ee loo xil saaray in ay kaalmeyaan horumarinta heerarka siistemka cod bixinta. NIST waxay soo saartaa iyo ka shaqeysaa heerarka la xariira farsamo balaaran. Caalimiinta NIST waxay kaalmeyaan Guddiga Kaalmada Doorashada Mareykanka (U.S Election Assistance Commission) si loo soo saaro heerarka la tijaabin karo ee loogu talogalay siistemyada cod bixinta.

National Party Convention - Shirka Xisbiga Qaranka

Shirka meesha ay isugu yimaadaan xisbiyada gobolka iyo dhulka si loo doorto qofka loo magacaabo madax weynaha.

National Presidential Nominating Convention - Shirka Guud ee ku saabsan Magacaabidda Madax Weynaha Qaranka

Shirka halka ay isugu yimadaan xisbiyada gobolka iyo dhulka isu yimadaan afar sanno kasta Mareykanka si ay u magacaabaan ergo doorashooyinka madax weynaha Mareykanka. Tani waxay u ogolaataa in go'aan laga gaaro dadka la magacaabay ka hor inta uusan furmin Shirka Qaranka (National Convention).

National Voluntary Laboratory Accreditation Program (NVLAP) - Brograamka Aqoonsiga Shaybaarka Iskaa ee Qaranka

Brograamka Aqoonsiga Shaybaarka Iskaa ee Qaranka (National Voluntary Laboratory Accreditation Program) ay fulliso Machadka Heerarka iyo Farsamada Qaranka (National Institute of Standards And Technology) (NIST).

National Voter Registration Act Of 1993 (NVRA)[Also Known As The "Motor Voter Act"] - Sharciga Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha Qaranka

Sharcigaan, badanaa loo yaqaan "Sharciga Cod Bixiyaha Baabuurka" ("Motor Voter Law") wuxuu u baahan yahay in gobolada bixiyaan fursad ay ku diiwaan geliyaan xafiisyadooda shatti bixinta baabuurta (ee gobolo badan looga

yaqaan DMV). Sharciga wuxuu kaloo rabaa in gobolada bixiyaan diiwaan gelinta cod bixiyaha laga bixiyo xafiis yada laga helo kaalmada dadweynaha ama brograamyada gobolka maalgeliyo ee aasaasiyan ku hawlan bixinta adeegyada la siiyo dadka itaalka darran, iyo xafiis yada qoritaanka adeegyada hubeysan. NVRA waxay kaloo bixisa tilmaamo ku saabsan maamulka liiska diiwaan gelinta iyo waxay xuduud u sameysaa sida cod bixiyeha looga saari karo liisaska.

No Excuse Absentee Voting - Cod Bixinta Maqanaha Aan Cududaarka Haysanin

Eray la isticmaalo marka cod bixiyaha ku jiro diiwaanka uu codsan karo warqadda cod bixinta maqanaha, sharuud la'aan.

Nominate - Magacaabidda

In la soo jeediyio in qof loo tixgeliyo in uu qabto xafiiska dadweynaha.

Nominated Officials - Sarakiisha La Soo Magacaabay

Dadka loo soo jeediyay in loo tixgeliyay oo loo magacaabay xafiis dadweyne ama helay codad ku filan doorashada musharaxiinta xisbiga si ay ugu gudbaan doorasahda guud ama doorashada musharaxa xisbiga. Eraygaan waxaa kaloo loola jeedaa dadka lagu xullay gobol iyo xisbiyada deegaanka oo lagu qabto Shirka Xisbiga Qaranka (National Party Convention) si uu xisbiga u mattalo sida musharaxa Madaxeynaha Mareykanka.

Nominating Petition - Codsiga Magacaabidda

Warqad rasmi ah oo qoran ay soo saxiixeen cod bixiyeha looga ku jira diiwaanka si ay u codsadaan in magacyada musharaxiinta lagu qoro warqadaha cod bixinta.

Nomination - Magacaabidda

Hawsha soo jeedinta u tixgelinta xafiiska dadweynaha.

Nomination Paper - Warqadda Magacaabidda

Warqad rasmi ah oo qoran uu soo saaro xafiiska doorashada si uu u codsado in magaca musharaxa lagu qoro warqadaha cod bixinta.

Nominee - Qofka La Magacaabo

Qofka loo soo jeediyay in loo tixgeliyo xafiiska dadweynaha.

Non-Accepted Ballots - Warqaddaha Aan La Ogolaanin

Gaf, qalad, ka boodid, ama fal lagu talogalay oo dhalliyaa cod aan lagu darrin natijjada ka soo baxda doorashada ugu dambeysa.

Non-Paper Media - Meediya Aan-Warqad Istimmaalin

Meediya kasta oo lagu keydiyo macluumaad, balse aan loo aqoonsanin sida Meediya Warqadda ama Meediya la Daabaco, sida Micro Media (micro fiche iyo microfilm) ama Hard Driveka Kombuyutarka (Computer Hard Drive).

Non-Partisan - Aan Xisbi Ahayn

Ka tirsaneen xisbi siyaasi

Nonpartisan Primary - Musharaxiinta Xisbiga Aan Xisbi Ku Dhisneen

Doorashada musharaxiinta xisbiga oo loo qabtay si loo yareeyo musharaxiinta tartanada aan ku dhisneen xisbiga.

Non-Party-Specific Contest - Tartanka u Gaarka ah aan Xisbiga Ahayn

Tartanka marka xaq u yeelashada tartankaas ka madax banaan tahay raacidda xisbiga siyaasadda.

Noncompliance - U Hoggaansamid La'aanta

In lagu guul dareysto ama la diido in loo hoggaansamo shay (sida sharci ama xeer).

Nondiscriminatory – Takoor La'aanta

Caddaalad iyo sinaan karo.

None of The Above - Midna Inta Kore

Qorshaha warqadda cod bixinta laga helo maamulada ama ururada qaar, ee loo sameeyay in cod bixiyaha loo ogolaado in uu muujiyo in uusan ogoleyn dhamaan musharaxiinta ka qeybgasha tartanka cod bixinta.

Nonpartisan Canvas Board - Guddiga Xisaabinta Codadka aan Xisbi Raacsaneen

Koox dad aan ka tirssaneen xisbi ama ka tirsan xisbi aan la sheegin, oo wada shaqeeya iyaga oo raaca sharchiyo iyo habab cayiman, in ay diyaariyaan, fiiriyaan, iyo ansixiyaan qoraalada doorashada.

Nonpartisan Election - Doorashada Aan Xisbi Ahayn

Doorashada lala galo musharaxiinta tartanada uu gaarka kuwa aan ka tirsaneen xisbi.

Nonpartisan Office - Xafiiska Aan Xisbi Ku Dhisneen

Xafiiska doorashada ay musharaxiinta u tartamaan iyagoo aan ka tirsaneen xisbi siyaasi.

Nonpartisan Office Declaration of Candidacy - Xafiiska ku Dhawaaqidda Musharaxiinta aan Xisbi Raacsaneen

Ficilka dhamaystirka warqadaha loo baahan yahay si loo noqdo musharax u taagan xafiiska dadweynaha aan xisbi raacsaneen.

Nonvolatile Memory - Xasuusta Aan Qafiifka Ahayn

Xasuusta lagu keydin karo macluumaadka waxaa lagu keydin karaa ilaa abid iyadoo aan quwad la isticmaalin. ROMyada iyo PROMyada waa tusalooyin ku saabsan xasuusta aan qafiifka ahayn.

Not Contested - Lala Tartamin

Marka dad badan aysan soo gudbinin si ay u noqdaan musharaxiin, markaas waxaa jira kuraas furan oo loo diyaariyo doorasho.

Notarized Statement - Bayaanka La Soo Shabbadeyay

Warqada uu soo caddeeyay xafiiska dhaarta, oo ah sarkaalka xaqiijiya aqoonsiga qof kasta oo saxixa warqadda iyo shabad ku xaqiijiya warqadda.

Notice - Ogeysiis

Ku dhawaqidda rabitaanka ururka, falka ama xasuusinta.

Notice of Clarification - Ogeysiiska Caddeynta

Warqad bixisa tilmaan dheeraad ah iyo sharaxaad ku saabsan sharuudaha iyo hababka Caddeynta Siistemka Codbixinta ama Shaybaarka Tijaabinta Siistemka Codbixinta ee Guddiga Kaalmada Doorashada (Election Assistance Commission's (EAC) Voting System Certification or Voting System Testing Lab (VSTL)]/ Waxaa dhici karto in la soo saaro NOCYO si looga jawaabo codsiga caddeynta ee ka yimaado Shaybaarka Tijaabinta Siistemka Cod Bixinta (Voting System Test Lab) ama soo saaraha ku jiro diiwaanka EAC. EAC waxay kaloo soo saari kartaa Caddeyn marka ay ogaato in caddeynta guud tahay lagama maarmaan.

Notice of Disposition - Ogeysiiska Gabogabeynta

Go'aanka ugu dambeeyo xaajada, iyo xasgga gaarista go'aanada ay ku dhawaakhday wakaaladda.

Notice of Election - Ogeysiiska Doorashada

Erayga sharciga ee la isticmaalo marka madaxda dawladda loo fasaxay ogeysiiso dadweynaha in la qaban doono doorasho waqtii la cayimay iyo sida hoos timaado sharchiyo gaar iyo xeerar.

Notice to Voters – Ogeysiiska La Siiyo Cod Bixiyeyasha

Isgaarsiin rasmi ah oo laga soo qaado xafiiska doorashooyinka oo ku saabsan doorashada, diiwaan gelinta cod bixiya, ama habka doorashada.

Notices of Noncompliance - Ogeysiisyada u Hoggaansami La'aanta

Isgaarsiin rasmi ah oo laga soo qaado wakaalad in la jebiyay sharci ama xeer.

O

Oath - Dhaarta

Xaqiijin dhab ah oo ku saabsan runta qofka uu sheego ama qofka ku talo jiro in uu sameeyo waxa qofka yiraahdo.

Oath of Office - Dhaarta Xafiiska

Dhaarta ama xaqiijinta qofka qaado in uu dadweynaha hortooda ballan qaado waajibaadka saaran, mas'uuliyadda iyo waajibaadka la xariira qabashada xafiiska dadweynaha.

Observational Test - Tijaabinta Kor Ka Eegidda

Tijaabinta hawlaa fullinta qalabka codbixinta inta ay socoto doorashada si cod bixiyeyaasha ugu kalsoonaadaan in diiwaanka warqadda cod la xaqiijin karo ee cod bixiyaha si sax ah loo soo saaro marka la isticmaalo farsamada taakuleynta. Qalabka hoos yimaada tijaabinta kor ka eegidda waxaa loo adeegsadaa aruurinta caadiga codadka; codadka la soo aruuriyo waxaa lagu darraa tirinta doorashada.

Observers - Kor Ka Eegeyaasha

Shakhsiyadka la socda furitaanka iyo xeritaanka goobaha cod bixinta, cod bixinta, tirinta iyo jadwal gelinta natijadaha, ama qeyb kale oo ka tirsan doorashada.

Office - Xafiis

Xafiis kasta, oo federaal, gobol, dagmo, tuulo, xaafad, deegaan, dawlad hoose, dugsi, deegaan ama boos kale oo la xariira dawladda.

Office Holder - Haayaha Xafiiska

Eray loo isticmaalo in lagu sharaxo qofka loo dhaariiyay xafiiska dadweynaha ee iminka ka shaqeeyo booska.

Office of The Registrar Of Voters - Xafiiska Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha

Sarkaalka mas'uulka ka ah in uu maamulo doorashada ama hawsha doorashada.

Officer - Sarkaal

Eray loo isticmaalo in lagu sharaxo qofka loo dhaariiyay xafiiska dadweynaha ee iminka ka shaqeeyo booska.

Official - Rasmi

(1) Ka tirsan ama la xariira xafiis, boos, ama kalsooni (2) Haynta xafiis; lahaanta awood

Official Ballot - Warqadda Cod Bixinta Rasmiga

Bandhigga rasmiga ee dhamaan tartanka loo baahan yahay in go'aan laga gaaro doorashada gaarka. Warqad ama elataroonig ahaan, habka ay cod bixiyeyaasha ku muujiyaan rabitaanka cod bixiyaha.

Official Ballot Card - Kaarka Warqadda Rasmiga

Kaar rasmi ah ama tiro kaarar oo lagu soo dallacay, ama lagu tilmaamo tixraaca warqadda cod bixinta, magacyada musharaxiinta la magacaabo ama doorashada mid ka mid ama ka badan xafiisyada ama mansabyada warqadda codbixinta hal talaabo ama ka badan.

Official Ballot Card Secrecy Sleeve - Galka Asturnaanta Kaarka Cod Bixinta Rasmiga

Warqad, bakhshad, ama gal oo la geliyo warqadda cod bixinta sii loo adkeeyo sirta ku saabsan sida cod bixiyaha u calaameyay warqadda cod bixinta.

Official Envelope - Bakhshadda Rasmiga

Gudaha, dibadda, iyo qarsoodiga bakhshadaha loo adeegsado in lagu qaado ama la geliyo warqadaha cod bixinta dooraashada.

Official Party Affiliation List - Liiska Ka Tirsanaanta Xisbiga Rasmiga

Liiska dadka iska diiwaan geliyay xisbi ku jira liiska cod bixiyeyaasha, sida shardi in xaq loo leeyahay ama loo ogol yahay in qofkia codkiisa dhiibto.

Official Roster of Voters - Liiska Rasmga Cod Bixiyeyaasha

Liiska dadka iska diiwaangeliyay liisa doorashada cod bixiyaha dagga yahay, sida shardi in qofka uu xaq u leeyaa in uu dhiibto codkiisa.

Official Sample Ballot - Kambiyoonaha Warqadda Cod Bixinta Rasmiga

Tusaale ku saabsan warqadda cod bixinta ee la siiyo cod bixiyeyaasha maclummaad uusan cod bixiyaha weli ka dhiiban codkiisa. Buugaagta kambiyoonaha waxay badanaa bixiyaan maclummaad dheeraad ah oo ku saabsan doorashada sida goobta cod bixinta iyo saacadaha, maclummaadka ku saabsan musharaxiinta, su'aalaha, iyo tilmaamaha la xariira cod bixinta.

Online Registration - Diiwaan Gelinta Internetka

Diiwaan gelinta cod bixiyaha wuxuu raacaa isla habka sida habka ku dhisan warqadda ee horay loo isticmaali jiray, halkas ay cod bixiyeyaasha cusub buuxiyaan foomka warqadda taasoo loo gudbiyo sarakiisha doorashada, balse baddalkii la gudbin lahaa arjiga warqadda, cod bixiyaha wuxuu buuxiyaa foom via Internetka, kaddibna foomkaas aysan warqad la soconin ayaa elataroonig ahaan loo diraa sarakiisha doorashada. Inta badan gobolada, arjiga waxaa loo fiiriyya elataroonig ahaan. Haddii codsiga la xaqijiyo in uu sax yahay, diiwaan gelinta cusub waxaa lagu darra liiska diiwaan gelinta cod bixiyaha

Open Primary - Doorashada Musharaxiinta Furan

Doorashada musharaxiinta xibiyada marka cod bixiyeyaasha ay ka qeybgeli karaan, iyadoo aan la firinin siyaasadda ay raacsan yahiin. Gobolada qaar waxay u baahan yahiin in cod bixiyeyaasha si furan ugu dhawaaqaan xulashadooda warqadda cod bixinta goobta, kaddibna shaqaalaha goobta cod bixinta waxaa laga helaa ama waxay shiddaa warqadda cod bixinta ku habboon. Gobolada kale waxay u ogol yahiin cod bixiyeyaasha in ay sameyaan xullashadooda warqadda cod bixinta xisbiga sida waafaqsan asturnaanta sanduuqa codbixinta.

Open Records - Diiwaanada Furan

Warqadaha ama maclummaadka aan loo haysanin in ay yahiin qarsoodi oo guud ahaan la xariira fullinta dawladda.

Open Source - Ilaha Furan

Brograamka kombuyutarka iyo koodkeeda ilaha (koodka aadanaha akhrin karo) ee lagu heli karo shatti halkaas oo xuquuqda haaystaha bixiyo xuquuqda uu ku barto, baddalo, iyo brograamka u qeybiyo qof kasta iyo ujeedo kasta. Waxaa la soo saari karaa brograamka ilaha furan (open source software) habka wada shaqeeynta dadweynaha. Brograamka siistemyada cod bixinta iyo doorashada ee ku shaqeeyo siistemyada brograamyada furan (open source software) waxaa fiiriyay aqoonyaano badan oo ku fiican brograamyada iyo aqoonyaano bilow ah. Siistemyada ilaha furan badanaa ma aha kuwa madax banaan, caadi ahaan waxaa la siiyaa shatti sida brograamyada kale. Siistemyada waxay ahaan karaan kuwo si buuxdo u furan ama waxay qabaan qeyb ka tirsan ilaha furan brograamkooda.

Operating System - Siistemka Lagu Shaqeeyo

Tiro brograamyo oo kantaroolo qalabka siistemka kombuyutarka iyo danabyo iyo adeegyo siiya brograamyada lana geliyo qalabka. Siistemyada lagu shaqeeyo waxay isticmaalaan nambaro habeysan oo mattala soo saarka si ay u tilmaamaan soo saarka la geliyo iyo waxay u baahan yahiin brograamyo ama casriyeyn suga ammaanka iyo wax qabadka. Maamulka baddalaadha brograamka yaal xafiiska doorashada waxay u baahan tahay in laga taxadiro isu keenidda casriyeynta lagu sameeyo siistemka uu ku shaqeeyo iyo sidoo kale isticmaalka brograamka.

Operation Manual - Buugga Lagu Shaqeeyo

Warqadaha uu urur ku hoggaamiyo xubnaha iyo shaqaalaha si ay hawlahooda u fulliyaan si sax ah iyo si macquul ah. Waxay qoraal ka reebaa hababka heerarka caadiga ee la ogolaaday si loo fulliyo ammaanka hawlahaa oo loo soo saaro badeecada iyo loo bixiyo adeegyada.

Operational Environment - Jawiga Hawl Galka

Dhamaan brograamka, qalabka (kana mid ah hay'adaha, alaabta, iyo qalabka) qoraalada, waraadaha, iyo xariirinta ay isticmaalaan shaqaalada doorashada, hawladeenka dayactirka, shaqaalaha goobta cod bixinta, iyo cod bixyaha, loo baahan yahay hawlahaa qalabka cod bixinta.

Opponent - Mucaaradka

Musharaxiinta kale ee u taagan xafiisyada doorashooyinka ee ka tirsan xisbi ka duwan ama qaba ujeedlooyin ama siyaasado ka duwan.

Oppose - Ka Horjeedcsiga

Qilaafka ama waafiqidda

Optical Scan - Skaanka Aragga

Siistemka cod bixinta ee skaan ku samayn karta warqadda cod bixinta iyo tirinta codadka. Inta badan siistemyada qalabka skaanka waxay isticmaalaan farsamada skaanka Infrared (IR) iyo warqadaha cod bixinta, waxaa loo isticmaalaa calaamadaha waqtiga si loo hubiyo in skaanka warqadda cod bixinta loo fulliyo si sax ah. Siistemyada skaanka aragga (digitalka) cusub waxay kaloo qaban karaan sawirada warqadaha cod bixinta marka lagu qoro jadwalka.

Optical Scan Ballots - Skaanka Aragga Warqadda Cod Bixinta

Kaarka ama tirada kaarark lagu daabaco, ama lagu aqoonsado xariirkaa uu la leeyahay warqaadda cod bixinta, magacyada musharaxiinta loogu tallogalay in la magacaabo ama in loo doorto hal xafiis ama ka badan ama magacyada warqadda cod bixinta ka badan hal xisaab ama ka badan, oo la gelin karo jadwalka skannarka aragga (optical scanner).

Optical Scan System - Siistemka Skaanka Aragga

Siistem marka calaamadaha lagu qoro bartilmaameeydada lagu sameyay hal ama labada dhinac kaarka warqadda cod bixinta ama taxanaha kaararka Siistemka skaanka aragga ayaa akhriya warqadaha cod bixinta kaadibna geliya jaswalka marka uu skaanka mariyo warqada cod bixinta kaddibna tarjumo waxa ku qoran.

Order - Ammar

Ammarka, toosinta, ama tilmaanta madaxda.

Order on The Ballot - Dalabka Warqadda Cod Bixinta

Nidaamka ay tartanada iyo musharaxiinta uga muuqdaan warqadda cod bxinta.

Ordinance - Ammarka Dawladda Hoose

Sharciga ay fulliyaan madaxda deegaanka.

Original Petition - Codsiga Asalka

Warqadda guud ee laga helo macluumaadka ku saabsan talaabadaha, dadaalka, aftiyada, yo musharaxiinta la isticmaalo si loo aruuriyo saxiixyada laga keeno cod bixiyeyaasha ku jiro diiwaanka.

Out-Of-State - Dibadda Gobolka

Si dibadda looga ahaado xuduudda gobol gaar ah.

Outer Envelope - Bakhshadda Dibadda

Warqadda rasmiga loo isticmaalo in lagu qaado warqadaha cod bixinta maqanaha iyo boostada lagu soo diro taasoo badbaadisa asturnaanta cod bixiyaha.

Overseas Ballot - Warqadda Cod Bixinta Dibadda

Warqadda cod bixinta uu dhiibto xubin ka tirsan adeegga mideysan adeegga dibadaha, ama madaniga ku nool dibadda.

Overseas Citizen - Muwaadinka Dibadda

Muwaadin Mareykan oo ku nool ama ku sugar waddan kale oo dibadda ka ah Mareykanka.

Overseas Military Voter - Cod Bixiyaha Ciidamada Dibadda

Xubin ka tirsan adeegga midaysan oo u shaqeeyo ciidamada, sida ciidamada, badda, ciidanka cirka, militariga mariinada, ilaalinta xeebta, iyo ciidanka tijaarada, iyo xaasaskooda iyo kuwa ku tiirsan. Xubnaha adeegyada midaysan inta lagu jro adeega ee si joogto ah u daggan gobolka iyo si ku meel gaar ah u daggan dibadda xuduudda dhulka Mareykanka iyo District of Columbia; xubnaha Ciidamada Tijaarada Badda (Merchant Marine) ee Mareykanka iyo ee sida joogtada ah u daggan gobolka haddana si ku meel gaar ah u daggan dibadda xuduudda dhulka Mareykanka iyo District of Columbia; iyo/ama muwaadiniinta kale Mareykanka ee sida joogtada ah u daggan gobolka iyo si ku meel gaar ah u daggan dibadda xuduudda dhulka Mareykanka iyo District of Columbia - ee oo aqoonsan yahay la diiwaan geliyay in ay codkooda dhiibtaan sida sharciga rab.

Overseas Voter - Cod Bixiyaha Dibadda

Muwaadin Mareykan oo daggan dibadda Mareykanka iyo xaq u leh in uu codkiisa ka dhiibto meesha ugu dambeyso uu ka daggan yahay Mareykanka.

Overvote - Cod bixinta xad dhaafka

Marka tirada xullashada uu sameeyo cod bixiyaha ku jiro tartanka ka badan tahay tirada ugu badan ee la ogol yahay.

Overvoting - Cod bixinta xad dhaafka

Codeynta in ka badan tirada ugu badan xullashooyinka loo ogol yahay tartanka.

P

Paper Ballot - Warqadda Cod Bixinta

Warqadda, liiska warqadda ama kaarar badan, oo lagu calaameeyo dhamaan xullahada cod bixiyaha waxaa lagu calaameyaa gacanta ama waa la daabaccaa, taasoo ku xeran siistemka cod bixinta la isticmaalo.

Paper Printout - Daabacaaadda Warqadda

Warqad lagu daabacay maclumaadka laga helo kombuyutarka, skaanarka ama qalab la mid ah.

Paper Record - Xogta Warqadda

Warqadda cod bixinta la dhiibtay uu toos u xaqijin karo cod bixiyaha.

Paper Ballot Sheet - Warqadda Cod Bixinta

Jab warqad oo qeyb ka ah warqadda cod bixinta. Warqadaha cod bixinta waxaa ku jiri kara warqado badan.

Paper Trail - Warqadda

Taxane warqadaha laga helo caddeyn qoran lana xariira dhacdooyin isku xiga ama hawlahaa uu fulliyo qofka ama ururka.

Paper-Based Voting System – Siistemka Cod Bixinta Ku Saleysan Warqadda

Siistemka cod bixinta ee diiwaan gelisa codadka, tirisa codadka, iyo jadwalka ku qorta tirada codadka, lana isticmaalo mid ama ka badan kaararka warqadda cod bixinta ama warqadaha cod bixinta.

Parallel Monitoring - Kormeerkha Isbarbar Socda

Tijaabinta tiro ka mid ah goobaha loo soo xullay si aan kala sooc lahayn oo hoos yimaado xaaladaha u shabaha isticmaalka Maalinta Doorashada si u dhaw sida suurtogalka ah, marka laga reebo in warqadaha cod bixinta dhabta ah ay arkeen "cod bixiyeyaasha tijaabinta" iyo dabeecadda cod bixinta "tijaabinta cod bixiyeyaasha" waa wax ay ogsoon yahiin baareyaasha, waxaana la barbardhigi karaa natijadaha in goobahaan cod bixinta ku qoraan jadwalka iyo warbixinta.

Parish - Dagmo

Dagmo maamul ahaan yar oo u dhiganta dagmo ku taal gobolo kale, sida Gobolka Louisiana.

Partisan - Xisbi

Xubin xil iska saaray xisbi siyaasi oo si xooggan u taageera siyaasadaha xisbiga

Partisan Election - Doorashada Xisbiga

Doorashada ay musharaxiinta u tartamaan xafiis sida wakiilo ka tirsan xisbi siyaasi, oo badanaa xisbiga ay ka tirsan yahiin lagu daabaco warqadda cod bixinta.

Partisan Office - Sarkaalka Xisbiga

Xafiis la doortay halkaas ay musharaxiinta wakiil ka yahiin xisbi siyaasi.

Partisan Office Declaration of Candidacy – Bayaanka Musharaxnimada Xafiiska Xisbiga

Falka dhamaystirka warqadaha loo baahan yahay si loo noqdo musharaxa xisbiga xafiiska dadweynaha.

Partisan Primary - Doorashada Musharaxiinta Xisbiga

Doorashada marka xisbiyada siyaasadda doortaan dadka loo magacaabay doorashada guud ama doorashada xad dhaafka.

Party - Xisbiga

Ururka iskuduwa musharaxiinta si ay uga tartamaan doorashooyinka waddanka. Waxaa caadi u ah xubnaha xubinta siyaasadda in ay fikrada la mid ah ka qabaan siyaasadda, halka xisbiyada horumarin karaan ujeedooyinka fikradda ama siyaasadda.

Party Affiliation – Ka Tirsanaanta Xisbiga

Waxaa loola jeedaa musharaxa ama xariirka sarkaalka la soortay la leeyahay xisbi cayiman, balse ma aha caqiidooyinka gaar ah. Dhanka doorashada, tani waxay badanaa tixraacdaa cod bixiyeyaasha ka diiwaan gashan xisbi siyaasi oo la aqoonsan yahay.

Party Candidate - Musharaxa Xisbiga

Musharax u tartama sida wakiil ka tirsan xisbi siyaasi oo u tartama xafiis la doortay.

Party Convention – Shirka Xisbiga

Shirka halka gobolada iyo xisbiyada isugu yimaadaan si ay u xushaan qofka loo magacaabay madax weyne.

Party Designation - Magacaabidda Xisbiga

Xisbiga siyaasiga ee ku daabacan magaca musharaxa warqadda cod bixinta ama qoraalada doorashada.

Party Enrollment - Qoridda Xisbiga

Ficilka diiwaan gelinta cod bixinta iyo xullashada ku tirsanaanta xisbi siyaasi. Xasuusin, gobolada qaar waxay tixraacaan diiwaan gelinta waxa xisbiga rabo, ee ma aha isku qoridda rasmiga ama ka tirsnaan.

Party Label - Sumadda Xisbiga

Xisbiga siyaasiga ee ku daabacan magaca musharaxa warqadda cod bixinta ama qoraalada doorashada.

Party Preference - Soo Jiidashada Xisbiga

Ficilka diiwaan gelinta in la dhiibto codka iyo xullashada xisbi siyaasi. Xasuusin, gobolada qaar waxay tixraacaan in ay isku diiwaan geliyaan xisbi sida isku qoridda xisbiga ama ka tirsanaanta xisbiga.

Pattern Voting - Sasaanka Cod Bixinta

Xullashada fursadaha tartanka laga soo qaado tartano badan loona habeeyo sassaan horay loo habeyay oo raba in uu aqoonsiga qofka ugu baaqo qof kale. Suurtogalka cod bixinta sassaanka (pattern voting) waxay ahaan kartaa arrin ku taagan Diiwaanka Codka la Bixiyay (Cast Vote Records) (CVR) maxaa yeelay waxaa dhici karta in ay qasto asturnaanta cod bixiyaha haddii ay jiraan xullashooyin ku filan gudaha CVR kasta oo la daabaco si loo badiyo suurtogalka in sassaanka xullashada ahaan karto mappa keliya ee jirto.

Penetration Testing - Tijaabinta Gelidda

Habka qiimeynta u ogolaato cilmi baareyaasha in ay raadiyaan meelaha uu siistemka ka yahay diciif. Siistemyada doorashada, sida siistemka Diiwaangelinta Cod Bixiyaha (Voter Registration) waxaa muddo ka muddo loo gudbiyaa Tijaabinta Gelitaanka (Penetration Tests) si loo ogaadaan meelaha laga weerari karo internetka. Sidoo kale lagu magacaabo Tijaabinta Qalinka

People's Veto Referenda - Cod Bixinta Awoodda Dadka

Soo jeedin lagula noqdo sharci u ogolaada waxa ay horay dawladda u hirgelisay, iyo ku qoran warqadda cod bixinta sida uu dalbado codsiga muwaadinka.

Permanent Absentee Application - Arjiga Maqanaha Joogtada

Arjiga in qofka uu toos boostada uga helo warqadda cod bixinta maqanaha ee dhamaan doorashooyinka mustaqbalka.

Permanent Absentee Voter - Cod Bixiyaha Maqanaha Joogtada

Cod bixiyaha soo dalbaday in uu isticmaalo warqadda cod bixinta maqana xagga dhamnaan doorashooyinka iyo la kulmay sifooyinka lagu noqdo cod bixiyaha sida joogtada ah ka maqaan xaafadda.

Permanent Absentee Voter Status - Xaaladda Cod Bixiyaha Maqanaha Joogtada

Eray ay isticmaalaan sarakiisha doorashada madka cod bixiyeyaasha marka cod bixiyaha dalbaday una leeyahay xaq in uu isticmaalo warqadda cod bixinta maqanaha xagga dhamnaan doorashooyinka.

Permanent Advance Voter - Cod Bixiyaha Horay u Dhiibta Codka Joogtada

Macnaha cod bixiyaha maqanaha joogtadca.

Personal Assistive Device - Qalabka Taakuleynta Qofka

Qalabka uu qofka itaalka darran qaado ama xerto, ujeedada ugu weyna tahay in ay wax ka qabato itaal darrida qofka.

Persons with Disabilities - Dadka Qaba Itaal Darrida

Bulshada itaal darrida oo dhakhso isu baddasha in luqadda aqoonsiga-marka-hore baddalkii luqadda qofka-kowaad. Sababta waxay tahay waxay itaal darrida u aragtaa sida qeyb ka tirsan aqoonsiga, sida isirka iyo jaadka qofka.

Xubnaha qaar bulshada, sida dadka itaalka darran xagga garashada iyo koriimada, waxay jecel yahiin luqadda qofka-marka hore. Tiirkaan, erayada waa leysku baddali karaa.

Petition - Codsí

Warqad laga helo macluumaad ku saabsan talaabadaha la qaaday, dadaalka, aftiyada, ama musharaxiinta loo adeegsaday aruurinta saxiixyada laga soo qaaday cod bixiyeyaasha ku jira diiwaanka.

Petition Drive - Ololaha Codsiga

Dadaal habeysan si loo soo aruuriyo saxiixyo shaqeeyo oo ku filan si loo taageero qorshaha, musharaxa, talaabada la qaado, ama aftida.

Petition Fund - Maaliyadda Codsiga

Falka kor u qaadidda iyo kharashka ku baxa maaliyadda lana xariirta cogsiga.

Petition Signature Gathering - Kullanka Saxiixa Codsiga

Ficilka iskudayidda si saxiixyada looga soo aruuriyo cod bixiyeyaasha xagga dadaalka, referndumyada, ama musharaxiinta.

Petition Verification - Xaqijinta Codsiga

Eray la isticmaalo marka sarakiisha doorashooyinka baaraan codynaya la soo gudbiyo lana ogaado haddii ay qabaan qaab habboon, haddii saxiixyada cod bixiyeyaasha ay shaqyeen, iyo haddii nambarka loo baahan yahay saxiixyada shaqeeyo la gudbiyay si loo fulliyo ujeedadeeda.

Physical Configuration Audit (PCA) - Xisaabinta Isku Toosinta Qaabka

Fattashaadda shaybaarka tijaabinta la aqoonsan yahay ee isbarbar dhigto qeybaha siistemka codbixinta loo gudbiyo baarista caddeyntra warqadaha farsamada iibsadaha taasoo xaqijisa in warqadaha la soo gudbiyay la kulmaan sharuudaha caddeyntra qaranka. Waxaa ka mid ah ka marqaati furka dhismaha siistemka la fullin karo si loo hubiyo in soo saarka la caddeyay laga soo dhisay qeybaha la tijaabiyyay.

PII

Macluumaadka u ogolaada aqoonsiga qofka in laga helo iyo macluumaad kasta oo ku saabsan qofka ay wakaaladda hayso, kana mid ah: macluumaadka loo isticmaali karo in lagu kala saaro ama la raaco aqoonsiga qofka, sida magaca, nambarka soshal sekurigita, taariikhda iyo meesha uu ku dhashay, magaca hooyada ku dhallatay magaca, ama diiwaanada biometriga; iyo macluumaadka kale ee lala xariirin karo qofka, sida macluumaadka caafimaadka, waxbarashada, maaliyadda, iyo shaqada.

Platform – Saldhig

Siyaasadda lagu dhawaaqay ee xisbiga siyaasadda, musharaxa ama kooxda.

Plebiscite - Doorashada tooska

Soo jeedin si looga noqdo sharci horay ay u hirgelisay dawladda, ee lagu qoray warqadda cod bixinta uu soo codsaday muwaadin.

Plurality - Ka badan musharaxiinta kale

Tirada codadka la siiyay musharaxa qaata in ka badan qof kasta oo kale balse aan helin badnaasho (in ka badan 50%).

Pointer - Tilmaame

Bixinta hab kale oo loo adeegsado qalabka loogu talogalay dadka isticmaalkooda gacanta ay kooban tahay, xagga hawlaha sida geddinta bogagga, sawiraadda, sida kaaliyaha keyborka ama haayaha laabiska.

Pointing to The Candidate or Question on the Ballot - Tilmaamidda Musharaxa ama Su'aasha ku Quran Warqadda Coc Bixinta

Qaar ka mid ah warqadaha codbixinta waxaa la faraa in ay sawiraan hal xariiqan oo isku xera madaxa iyo dabada falaarta tilmaanta xullahada in codka la siiyo musharaxa ama sharciga, baddalkii lagu buuxin lahaa xumbada ama lagu calaameyn lahaa X.

Political - Siyaasadda

(1) la xariira dawladda ama arrimaha dadweynaha waddanka. (2) La xariira fikradaha ama istraatijiyyada xisbi gaar ah ama koox xagga siyaasadda.

Political Action Committee (PAC) – Guddiga Falka Siyaasadda

Qaamuuska erayada FEC: Eray loo isticmaalo guddiga siyaasadda, aan ahayn guddiga xisbiga ama guddiga ogolaada musharaxa. PADyada ee toos ama si dadban loo sameeyo, uu maamulo ama maaliyad ahaan ay taageerto shirkad ama urur shaqaale waxaa lagu magacaabaa maaliyadda la kala saaray (segregated funds) (SSPyo). PACs aan lahayn shirkad ama cid mas'uul ka ah shaqada waxaa magacaabaa PACyo aan ku xerneen.

Political Appointee - Magacaabidda Siyaasadda

Shaqaale kasta uu magacaabay Madax Weynaha, Ku Xigeenka Madax Weynaha, ama madaxa wakaaladda.

Political Caucus - Shirka Siyaasadda

Shirka ay xubnaha deegaanka ee xisbiga siyaasadda diiwaan geliyaan waxa ay rabaan musharaxiinta u taagan xafiiska ama xushaan ergo tagto shirka.

Political Disclaimer - Afeefta Siyaasadda

Macluumaadka loo baahan yahay in uu la socdo xayysiinta siyaasadda uu bixiyo musharaxa, guddiga, ama qofka la daabacay, la soo bandhigay, ama la wareejiyay, ujeedadane tahay in saamayn lagu yeesho doorashada.

Political Organizations - Ururada Siyaasadda

Urur kasta oo ku lug yeelata hawsha siyaasadda, kana mid ah xisbiyada siyaasadda, ururada aan dawladda u shaqeynin, kooxaha u doodidda iyo kooxaha dannaha gaarka

Political Party - Xisbiga Siyaasadda

Ururka iskuduwa musharaxiinta si ay uga tartamaan doorashooyinka waddanka. Waxaa caadi u ah xubnaha xubinta siyaasadda in ay fikrada la mid ah ka qabaan siyaasadda, halka xisbiyada horumarin karaan ujeedooyinka fikradda ama siyaasadda.

Political Party Affiliation - Ka Tirsanaanta Xisbiga Siyaasadda

Waxaa loola jeedaa musharaxa ama xariirka sarkaalka la soortay la leeyahay xisbi cayiman, balse ma aha caqidooyinka gaar ah. Tan ku saabsan cod bixinta, tani waxay badanaa tixraacdaa diiwaan gelinta cod bixiyeyaasha la shaqeeya xisbi siyaasi oo loo ogol yahay.

Political Party Statements of Purpose - Bayaanada Ujeedadada Xisbiga Siyaasadda

Siyaasadda lagu dhawaaqay ee xisbiga siyaasadda ama kooxda.

Political Subdivision - Qeybaha Hoose Siyaasadda

Qeyb kasta dawladda, sida dagmooyinka iyo magaaloooyinka, dugsiyada dagmada, iyo dagmooyinka biyaha iyo dhaqaaleyn ta ee awoodda u leh in ay qabtaan doorashooyinka xafiisyada dadweynaha ama arrimaha warqadda cod bixinta.

Politician - Siyaasiga

Qof si wanaagsan ugu lug leh siyaasadda, gaar ahaan qof haysta ama musharax u ah xafiiska la doortay.

Poll - Tirokoobka

(1) Si loo hubiyo xaaladda ama loo qoro fikradda uu qabo cod bixiyaha. (2) Habka cod bixinta doorashada.

Poll Book - Buugga Tirokoobka

Diiwan rasmi ah oo ku saabsan cod bixiyeyaasha xaqa u yeeshaa in ay codkooda ka dhiibtaan doorashada, loo isticmaalo in lagu xaqiijiyo iyo lagu hubiyo cod bixiyeyaasha ka hor inta aan la siinin warqadda cod bixinta.

Poll Book Station - Goobta Buugga Tirokoobka

Bogga laga hubiyo, looga shaqeeyo, ama warqadaha cod bixinta lagu qoro jadwal lagana soo qaado xaafado badan sida goobta dhexe.

Poll Hours - Saacadaha Tirokoobka

Waqtiyada furitaanka iyo xeritaanka doorashada goobaha cod bixinta.

Poll List - Liiska Tirokoobka

Diiwan rasmi ah oo ku saabsan cod bixiyeyaasha xaqa u yeeshaa in ay codkooda ka dhiibtaan doorashada, loo isticmaalo in lagu xaqiijiyo iyo lagu hubiyo cod bixiyeyaasha ka hor inta aan la siinin warqadda cod bixinta.

Poll Officer - Sarkaalka Tirokoobka

Sarkaalka mas'uulka ka ah nidaamka cod bixinta habboon ee ka jira goobta cod bixinta ama hawsha doorashada.

Poll Watcher - Fiiriya Tirokoobka

Dadka la socdo furitaanka iyo xeritaanka goobaha cod bixinta iyo habka cod bixinta.

Poll Worker - Shaqaalaha Tiorkoobka

Sarkaalka mas'uulka ka ah nidaamka cod bixinta habboon ee ka jira goobta cod bixinta ama hawsha doorashada.

Polling Location - Goobta Cod Bixinta

Cinwaanka goobta cod bixinta

Polling Place - Goobta Cod Bixinta

Hay'adda loo xil saaray cod bixiyeyaasha in ay qof ahaan dhiibtaan codkooda.

Polling Place Assignment - Magacaabidda Goobta Cod Bixinta

Goobta hay'adda meeja uu cod bixiyaha ku qornaan doono liiska cod bixiyeyaasha rasmiga ee loo fasaxy in uu ka dhiibto codkiiska. Meelaha cod bixinta waxay ku saleysan yahiin ciwaanka guriga uu dagan yahay cod bixiyaha iyo waxaa dhici karto in goobta laga baddalo hal doorasho ilaa mappa xigta.

Polling Place Officer - Sarkaalka Goobta Cod Bixinta

Sarkaalka mas'uulka ka ah nidaamka cod bixinta habboon ee ka jira goobta cod bixinta ama hawsha doorashada.

Popular Vote - Codka Dadweynaha

Codka musharaxa ama arrinta ay soo jeediyaan cod bixiyeyaasha aqoonta u leh, marka loo fiiriyo codka ay dhiibtaan wakiilada la doorto.

Portable Document Format (PDF) - Qaabka Warqadda Lala Dhaqaaqi Karo

Qaabka caadiga ee badanaa loo adeegsado faylka lagu abuuuro, qeybsado, iyo lagu akhriyo warqadaha, foomamka, iyo warbixinta. Faylasha PDF waxaa furi kara iyo akhrin kara akhriyaha keliya, sida Adobe Acrobat.

Position - Booska

(1) Meesha ku habboon, ku toosan, ama meesha caadiga; sida goobta tartanka ama musharaxa uu ka soo bixi doono warqadda cod bixinta. (2) Fikrad ama waxa qofka uu ka malleysto musharaxa siyaasadda, arrinta ama siyaasadda.

Post-Election - Doorashada-Boostada

La xariirta ama lala kulmo waqtiga ku xiga doorashada.

Post-Election Procedures - Hababka ka Dambeeyo Doorashada

Sharchiyada, siyaasadaha, iyo hababka maamulka ee la fulliyo kaddib marka la galoo doorasho, taasoo badanaa la xariirto xisaabinta codadka, xisaab xerka, iyo xaqiijinta natijada ka soo baxda doorashada.

Post-Election Tabulation Audit - Xisaabinta Jadwalka Doorashada Kaddib

Xisaabinta ka dambeeyo doorashada oo gacanta lagu tiriyo kambiyone laga soo qaado codadka ku qoran warqadaha, kaddibna tiradaas la barbar dhigo wadarta cod bixinta asal ahaan loo soo gudbiyo sida hubinta sax ahaanta natijadaha ka soo baxay doorashada, iyo si loo ogado tirada leysku dhaafay marka la isticmaalo tirinta gacanta warqadaha sida bartirmaameedka.

Postage - Boostada

Khidmadda isticmaalka adeegga boostada.

Postage Paid - Bixinta Kharashka Boostada

Nooc muujisa bakhshadda korkeeda in kharashka dirista loo bixiyay siyaabo kale bedelkii shabadda ama mashiinka frankoboolada. Badanaa muujinta waxaa laga helaa dhanka kore geeska midig ee wijiga hore bakhshadda, meerha lagu dhajin lahaan shabaddaha.

Postage Stamp – Shabadda Boostada

Warqad yar ay soo saarto boostada, maamulka boostada, ama iibiyeyaasha kale oo la siiyo macamiisha bixiya dirista, kaddibna ku dhajiya shabadda dhinaca cinwaanka lagu qoro shay kasta oo la diro - bakhshad ama wax kale - ay doonaan in ay diraan.

Postal Registration - Diiwaan Gelinta Boostada

Adeegga warqadaha boostada ay bixiyo adeegyada boostada waddamo badan, taasoo u ogolaata dirraha caddeynta dirraha resiidka boostada iyo, kaddib marka la codsado, xaqiijinta elataroonigga in shay la geeyay ama in leyskudayay in la geeyo.

Postmark - Calaamadda Boostada

Sumadda boostada lagu sameeyo bakhshadda korkeeda, baakada, kaarka boostada ama wax la mid ah, oo muujiya goobta, taariikhda, iyo waqtiga shayga lagu wareejiyay daryeelka adeegga boostada, ama marmar muujisa meesha iyo goorta la helay ama ku sugar yahay ku meel gaar.

Pre-Clearance - Ogolaashada-Ka Hor

Sida hoos timaada Sharciga Xuquuqda Cod Bixinta Federaalka (Federal Voting Rights Act) ee 1965 ma jiro gobol ama qeyb hoose siyaasadda oo laga hirgelin karo isbaddalada la cayimay ilaa madaxda federaalka soo ogolaato isbaddalka. Habka marka gobolada qaar ama qeybaha siyaasadda loo baahan yahay in ay raacaan si ay u fulliyaan isbaddalda hababka cod bixinta sida hoos timaado Sharciga Xuquuqda Cod Bixinta Federaalka (Federal Voting Rights Act) ee 1965.

Pre-Election Procedures - Hababka ka Horeeyo Doorashada

Sharchiyada, siyaasadaha, iyo hababka maamulka ee la fulliyo ka hor inta aan la gaarin doorashada, badanaa la xariirta musharaxnimada, diyaarinta warqadda codbixinta, loojikada iyo tijaabinta sax ahaanta mashiinada codbixinta, tababarka la siiyo shaqaalaha goobta codbixinta iyo dhamaan hawlahalee ee loo baahan yahay in lagu diyaariyo codbixinta doorashada.

Precandidacy - Musharaxnimada Ka Hor

Muddada waqtiga uu qofka, u qalma in u noqdo mushara u taagan xafiiska dadweynaha ama boos lagu ogaado doorashada dadweynaha, isu diyaariya in uu noqdo musharax iyo helo deeq ama gala kharash, ama labadaba qof ahaan ama qof kale.

Precinct - Xaafad

Qeybta maamulka doorashada ee la shaqeysyo qeyb joqraafi ahaan ku dhaggan ee aasaas u ah go'aanka laga gaaro tartanada iyo cod bixiyeasha sharci ahaan adaggan deegaankaas waxay xaqqi u leeyahiin in ay codkooda ka dhiibtaan.

Precinct Board - Guddiga Xaafadda

Koox dad oo wada shaqeeyaa, raaca sharchiyo iyo habab cayiman, oo mas'uul ka ah cod bixin habboon oo nidaamsan laga fulliyo goobta cod bixinta ama hawsha doorashada.

Precinct Board Member - Xubinta Guddiga Xaafadda

Sarkaalka mas'uulka ka ah nidaamka cod bixinta habboon ee ka jira goobta cod bixinta ama hawsha doorashada.

Precinct Captain - Kaptanka Xaafadda

Hoggaamiyaha xisbiga ee habeeya hawlahalee siyaasadda deegaanka.

Precinct Count - Tirinta Xaafadda

Tirinta warqadaha cod bixinta laga fulliyay isla xaafadda laga dhiibta warqadahaas cod bixinta.

Precinct Count Optical Scan System (PCO) - Sistemka Skaanka Aragga Tirinta Xaafadda

Sistemka diwaan gelinta codadka goobta cod bixinta lana adeegsado calaamadaha lagu sameeyo bartilmaameedyada cod bixinta ee loo sameyay hal ama labo dhinac kaarka warqadda cod bixinta ama taxanaha kaarka. Siistemka skaanka aragga ayaa akhriya warqadaha cod bixinta kaadibna geliya jadwalka marka uu skaanka mariyo warqada cod bixinta kaddibna tarjumo waxa ku qoran.

Precinct Count Voting System - Siistemka Tirinta Cod Bixinta Xaafadda

Sistemka cod bixita ee qorta jadwalka warqadaha cod bixinta ka jira goobta cod bixinta. Caadi ahaan, siistemyadaan waxay jadwalka ku qoraan cod bixinta inta ay socoto hawsha cod bixinta kaddibna waxay daabacaan natijada marka goobta cod bixinta la xero. Marka la adeegsado Siistemka Skaanka Aragga (Optical Scan System), kaddib marka lagu calameeyo gacanta ama warqadda cod bixinta, qalabka cod bixinta, waxaa la geliya jadwalka marka warqadda la geliyo skaanka. Xagga mashiinada cod bixinta elataroonigga tooska (DREs), iyo qaar ka mid ah siistemyada ku saleysan warqadda, siistemyadaan waxay bixiyaan keydinta elataroonigga tirinta codka halkas oo natijadaha goor dambe la soo geliyo siistemka cod bixinta dhexe.

Precinct Official - Sarkaalka Xaafadda

Sarkaalka mas'uulka ka ah nidaamka cod bixinta habboon ee ka jira goobta cod bixinta ama hawsha doorashada.

Precinct Register - Diiwaanka Xaafadda

Diiwan rasmi ah oo ku saabsan cod bixiyeyasha xaqa u yeeshaa in ay codkooda ka dhiibtaan doorashada, loo isticmaalo in lagu xaqijiyo iyo lagu hubiyo cod bixiyeyasha ka hor inta aan la siinin warqadda cod bixinta.

Precinct Split - Qeybinta Xaafadda

Qeyb hoose oo ka tirsan xaafad oo soo baxda marka xaafadda u qeybsanto labo dagmo doorasho ama ka badan oo u baahan karo noocyada warqadda cod bixinta kala duwan.

Precinct Technician - Farsamo Yaqaanka Xaafadda

Sarkaalka mas'uulka ka ah cod bixinta habboon iyo nidaamsan ee farsamada loo adeegsado goobta cod bixinta.

Precinct Voting - Cod Bixinta Xaafadda

Cod bixinta ka hor ama Maalinta Doorashada halka cod bixiyaha, qof ahaan, ku dhamaystiro warqadda cod bixinta ay kor ka eegaan sarakiisha doorashada ama shaqaalha goobta cod bixinta.

Precision - Sax

(1) Ilaa heerka cabbirada kalmbiyoona waafaqo dhexdhedaadka. Sidaas darteed, sax ahaan waa waxa caadi ahaan loo qaato leexashada caadiga (standard deviation) lagana qiyaaso cabbiro dheeraad ah oo lagu sameyay xaaladaha ku celcelin karida, macnaha, natijadaha tijaabinta madax banaan oo lagu helay isla habka lagu fulliyay maadada tijaabinta isla midka ah, isla shaybaarka ama hay'adda tijaabinta, fullianta isla hawladeenka oo isticmaala qalab isla mid ah muddo gaaban gudaheeda. (2) Heerka ka shaqeeynta cabbirka ama tafasiisha, khaas ahaan sida mattalaadda tirada nambarada la bixiyay.

Presentable Ballot Style - Habka Warqadda Cod Bixinta la soo Bandhigi Karo

Nooca warqadda cod bixinta ee laga helo dhamaan tafasiisha bandhigga loo baahan yahay in lagu soo saaro warqadda cod bixinta. Tani waxaa ka mid ah luqadda, toosinta tartanada iyo musharaxiinta, iyo waxa ku jiro sida waxyabaha lagu qoro kor.

Presidential Candidate - Musharaxa Madaxa

Musharaxa raadiya in loo magacaabo ama loo doorto xafiiska Madax Weynaha Mareykanka oo la kulmay sharuudaha sharciga in magaciisa lagu daabaco warqadda cod bixinta ama xaq u yeeshaa in magaca lagu qoro warqadda cod bixinta loona tiriyo xullashada cod bixiyaha tartanka.

Presidential Delegates - Ergada Madaxa

Shakhsiyadka mattala gobolkooda shirarka xisbiga qaranka si ay musharaxa ugu magacabaan Madax Weynaha Mareykanka. Musharaxa qaata inta badan ergada xisbiga ayaa ku guuleysto magacaabidda.

Presidential Elector - Doortaha Madaxa

Xubin ka tirsan kooxda dooarashada ee loo ogol yahay in ay dhiibtaan cokooda Madax Weynaha iyagoo mattala cod bixiyeyaasha gobolkooda ama Dagmada Columbia.

Presidential Primary Election - Doorashada Musharaxa Madax Weynaha

Doorashada musharaxiinta xisbiyada halkas ay cod bixiyeyaasha doortaan ergada loo diro shirarka magacaabidda madax weynaha ee loo qeybiyay guddiyada xisbiga qaranka.

Prevailing Party - Xisbiga Gacan Sareeyo

Qofka ama ururka ku guuleysta ama ku raaya

Primary - Doorashada Musharaxiinta Xisbiyada

Doorashad la qabto si loo ogado musharaxa wuxuu mattali doonaa xisbiga siyaasadda xafiiska doorashada guud. Gobolada qaar waxay qabaan doorashada musharaxiinta xisbiyada, halka kuwo kale ay qabaan doorashada musharaxiinta xisbiga furan ama xeran. Marmar doorashooyinka xafiisyada aan xisbiyada raacsaneen iyo arrimaha waxaa leysugu keenaa doorashada musharaxiinta xisbiyada.

Primary Calendar - Jadwalka Musharaxiinta Xisbiyada

Liiska rasmiga taariikhda muhiimka ah iyo waqtiyada ugu dambeeyo doorashada musharaxiinta xisbiga.

Primary Election - Doorashada Musharaxiinta Xisbiyada

Doorashada la qabto si loo ogado musharaxa mattali doono xisbi siyaasi la xariira xafiis doorashada guud. Gobolada qaar waxay qabaan doorashada musharaxiinta furan, halka kuwo kale ay qabaan doorashada musharaxiinta xeran ama la baddalay. Marmar doorashada xafiisyada aan xisbiyada raacsaneen iyo arrimaha warqadaha cod bixinta inta ay socdaan doorashooyinka musharaxiinta xisbiyada.

Primary Presidential Delegation Nomination - Magacaabidda Ergada Madax Weynaha Musharaxiinta Xisbiyada

Doorashada musharaxiinta xisbiyada halkas ay cod bixiyeyaasha doortaan ergada loo diro shirarka magacaabidda madax weynaha ee loo qeybiyay guddiyada xisbiga qaranka.

Primary Results - Natijjada Doorashada Musharaxiinta Xisbiyada

Tirada codadka laga dhiibto doorashada musharaxa xisbiga kaddib marka goobaha cod bixinta la xero.

Prior Registration - Diiwaan Gelinta La Soo Dhaafay

Marka cod bixiyaha casriyeyo diiwaan gelinta isla maamulka ama meel kale, diiwaan gelintooda la soo dhaafay ee liisaska cod bixiyeyaasha rasmiga waxaa loo yaqaan Diiwaan Gelinta Hore (Prior Registratifon).

Prior To An Election - Doorashada Ka Hor

La xariira ama dhaca waqtiga ka hor sharciga rasmiga kowaad doorashada.

Prior To Election Day - Maalinta Doorashada Ka Hor

La xariira ama lala kulmo waqtiga maalinta doorashada ka hor.

Privacy - Asturnaanta

Awoodda looga hortago dadka kale in aysan ogaanin sida qofka u dhiibtay codkiisa.

Private Key - Furaha Gaarka Loo Leeyahay

Qeybta qarsoodiga labada dhinac kala duwan ee caadi ahaan loo isticmaalo in digital ahaan la saxiixo ama la furfuro xogta.

Process the Application - Ka Shaqeynta Arjiga

Ficilka xaqijinta xaq u yeelashada, maclumaadka lagu darro xogta iyo abuurista qoraalka cod bixiyaha cusub ama la casriyeyay kaddib marka la helo arjiga doorashooyinka, sida kaarka diiwaan gelinta cod bixiyaha ama codsiga warqadda cod bixinta maqanaha.

Product Standard - Heerka Badeecada

Heerka tilmaanta sharuudaha loo baahan in shayga ama koox shay buuxiyaan, si loo dhiso in ay ku habboon yahiin ujeedada.

Programmed Device - Qalabka Brograamka

Qalabka elataroonigga kana mid ah brograamka. Inta badan qalabka cod bixinta elatarooningga waxaa ka mid ah lojigga brorgraamka (software), sidaas darteed waa qalab ku shaqeeyo brograam.

Proof of Residence - Caddeyntha Dagganaha

Warqad xaqijisa meesha cod bixiyaha daggan yahay.

Proponent - Soo jeediye

Waa qofka soo jeediya shay, ama ugu yaraan taageersan marka uu ka hado iyo wax fiican ka qoro.

Proportional Representation - Mattalaadda Samiga Dadka

Siistemka cod bixinta halkaas oo xisbiyada ay heleen kuraas saamigooda la mid yahay tirada codadka la siiyay.

Proportional Voting - Cod Bixinta Saamiga

Isbaddalka codka ee loo isticmaalo tartanada kuraasta badan marka codadka loo ogol yahay tartanka loo qeybiyo saamiga musharaxiinta la soo xullay taasoo ku xeran tirada xullashooyinka. Tani waxay dhallin karta in musharaxiinta helaan qeyb codadka.

Proposition - Tallo Jeedin

Tallo lagu hirgeliyo sharci cusub ama baddalaadda dastuurka oo ku qoran warqadda cod bixinta si loo ogaado ogolaashada ama diidamada cod bixiyeyaasha.

Protest Petitions - Codsiyada Cabbashada

Codsiga ama hawsha taxadiga loogu sameeyo ama loo soo jeediyo diidmo ka soo horjeedo gabogabada falka maamulka.

Provisional Ballot - Warqadda Cod Bixinta Ku Meel Gaarka

Warqadda cod bixinta uu dhiibto cod bixiyaha aan ku jirin liiska cod bixiyeyaasha xaq u yeeshaa, kuwa maclumaadkooda uusan dhamaystirneen ama uusan sax ahayn, ama warqadd cod bixinta horay loogu diray boostada oo loo ogolaaday in ay codkooda dhiibtaan. Warqadaha cod bixinta leysku haleeyo waxaa badanaa la dhigaa meel gaar ka ah warqadaha cod bixinta kale ilaa sarkaalka doorashada go'aan ka gaaro haddii cod bixiyaha uu xaq u leeyahay in uu dhiibto xaqiisa. Marmar warqadahaan cod bixinta waxaa lagu magacaabaa warqadaha cod bixinta leysku haleeyo marka ay shaqeynин kuwa kale.

Provisional Ballot Envelope - Bakhshadda Warqada Cod Bixinta Ku Meel Gaarka

Bakhshad rasmi ah oo loo isticmaalo in la geliyo warqadda codka oo la dhiibtay si ku meel gaar ah si warqadda looga sooco warqadaha kale ilaa laga ogaado ogolaashada.

Provisional Vote - Codka Ku Meel Gaarka

Warqadda cod bixinta uu dhiibto cod bixiyaha aan ku jirin liiska cod bixiyeyaasha xaqa u yeeshaa, kuwa macluumaaadkooda uusan dhamaystirneen ama uusan sax ahayn, ama warqadd cod bixinta horay loogu diray boostada oo loo ogolaaday in ay codkooda dhiibtaan. Badanaa warqadaha cod bixinta ku meel gaarka waxaa laga saaraa warqadaha cod bixinta kale ilaa sarkaal ka tirsan doorashada uu ka gaaro go'aan haddii cod bixiyaha uu xaq u leeyahay in uu codkiisa dhiibto. Marmar warqadahaan cod bixinta waxaa lagu magacaabaa codadka leysku haleeyo mararka codadka kale khasaraan.

Provisional Voting - Cod Bixinta Ku Meel Gaarka

Ficilka dhiibashada warqadda cod bixiyaha aan ku qorneen liiska cod bixiyeyaasha la ogol yahay, ee macluumaaadkooda aan dhamaystirneen ama aan sax ahayn, ama horay warqadda loogu diray boostada iyo loo ogoladay in uu dhiibto codkiisa. Badanaa warqadaha cod bixinta ku meel gaarka waxaa laga saaraa warqadaha cod bixinta kale ilaa sarkaal ka tirsan doorashada uu ka gaaro go'aan haddii cod bixiyaha uu xaq u leeyahay in uu codkiisa dhiibto. Marmar warqadahaan cod bixinta waxaa lagu magacaabaa codadka leysku haleeyo mararka codadka kale khasaraan.

Provisional Voter Instructions - Tilmaamaha Cod Bixiyaha Ku Meel Gaarka

Taxanaha sharciyada iyo hababka sida ku meel gaar ahaan loo codeeyo, sida ay u daabaceen madaxda rasmiga ee mas'uulka ka ah maamulka doorashada.

Proxy Absentee Ballot - Warqadda Cod Bixinta Maqanaha

Qaab cod bixin oo xubin ka tirsan kooxda go'aan gaarista ay awoodeeda cod bixinta ku wareejin karto wakiil, si loo hirgeliyo cod bixinta maqanaha.

Public Jurisdiction - Maamulka Dadweynaha

Awoodda quwadda madax banaan in ay xakunto ama sharci dajiso.

Public Key - Furaha Dadweynaha

Qeybta dadweynaha labada aan isla lahayn ee caadi ahaan loo adeegsado in lagu xaqijiyo saxiixyada digitalka ama xogta la qariyay.

Public Measure - Talaabada Dadweynaha

Tallo lagu hirgeliyo sharci cusub ama baddalaadda dastuurka oo ku qoran warqadda cod bixinta si loo ogaado ogolaashada ama diidamada cod bixiyeyaasha.

Public Network Direct-Recording Electronic (DRE) Voting System - Siistemka Cod Bixinta Shabakada Dadweynaha Diiwaan Gelinta Tooska

DRE shabakada isgaarsiinta dadweynaha ee telefoonka ku gudbisa tirada codadka loo diro goob dhexe.

Public Notice - Ogeysiiska Dadweynaha

Ogeysiis ay soo saartay wakaaladda dawladda ama sharci dajinta si dadweynaha loola socodsiyo hawlaha kala duwan ay dawladda qabato, dhageysiyada, tartanka dadweynaha ama hawaha kale.

Public Office - Xafiiska Dadweynaha

Xafiis kasta, oo federaal, gobol, dagmo, dawlad hoose, tuulo, ama xaafad ama xafiis le dagmada ama boos dawlad.

Public Officer – Sarkaalka Dadweynaha

Eray loo adeegsado in lagu sharaxo qof buuxiya boos kasta oo hoos yimaada federaalka, gobolka, dagmada, dawladda hoose tuulada, xaafadda ama xafiis kale dagmada ama dawladda.

Public Records Request - Codsiga Xogta Dadweynaha

Codsi rasmi ah uu soo gudbiyo xubin ka tirsan dadweynaha xagga warqadaha ama macluumaadka aan loohaysanin in ay yahii qarsoodi iyo guud ahaan la xariiraan fullinta dawladda.

Punch Card Ballot - Warqadda Cod Bixinta Kuleeliyaha Kaarka

Kaarka warqadda cod bixinta ee laga helo bartilmaameedyada booska cod bixinta in qalabka calaameynta loo baahan yahay in uu duleeliyo si loo sugo xullashada cod bixiyaha ama loo cabbiro.

Punch Card Voting System - Siistemka Cod Bixinta Kaarka la Duleeliyo

Siistemka cod bixinta halka cod bixiyeyaasha ay kaarka warqadda ku duleeliyaan qalabka calaameynta warqadda si ay u calameyaan xullashadooda. Kaddib marka uu codkiisa dhiibto, cod bixiyaha wuxuu warqada cod bixinta ku ridaa sanduuqa warqadda cod bixinta, ama warqadda cod bixinta waxaa la gelin karaa kombuyutar, qalabka diyaariya jadwalka cod bixinta xaafadda.

Punching Device - Qalabka Duleelinta

Qalabka calaameynta warqadda cod bixinta ay isticmaalaan cod bixiyeyaasha di loo duleeliyo kaarka warqadda cod bixinta kaddibna loo calaameeyo xulashadooda.

Punching Tool - Qalabka Duleelinta

Qalabka calaameynta warqadda cod bixinta ay isticmaalaan cod bixiyeyaasha di loo duleeliyo kaarka warqadda cod bixinta kaddibna loo calaameeyo xulashadooda.

Purge - Saarid

Ereyo marmar loo isticmaalo in lagu sharaxo habka ay isticmaalaan gobolada iyo dagmooyinka si ay u xajiyaa una casriyeyaan liiska cod bixiyeyaasha iyo xoogta kaddib marka ay joojiyaan diiwaan gelinta cod bixiyeyaasha aan loo ogoleyn.

Q

QR Code - Koodka QR

Koodka mashiinkaa akhriyo oo ka kooban tiro labo jibbaaraneyaal cadcad, oo caadi ahaan loo isticmaalo keydinta URLada ama macluumaadka kale si uu u akhriyo kamerada telefoonka gacanta caadi ahaan loo isticmaalo keydinta macluumaadka ku saabsan warqadaha cod bixinta ee laau daabaco qalabka calameeyo warqadda cod bixinta, loo baahan yahay in la akhriyo iyo in lagu qoro jadwalka skannarka warqadda cod bixinta.

Qualification - Aqoonta

Shardi, sida in qofka yahay cod bixiye ku jira diiwaanka, oo lagama maarmaan ah si cod bixiyaha, musharaxa, ama hawsha doorashada ahaato mid loo ogol yahay ujeedo gaar ah.

Qualification Number - Nambrik Aqoonta

Nambar ay soo saartay NASED (National Association of State Election Directors) siistem ay tijaabisay madaxda tijaabinta madax banaan ee la aqoonsan yahay xagga u hoggaansamida heerarka siistemka cod bixinta. Soo saaridda nambarka xaq u yeelashada waxay tilmaan u tahay in siistemka waafaqsan yahay herarka qaranka.

Qualification Test Report - Warbixinta Aqoonista Baarista

Warbixinta natijjadaha tijaabinta madax banaan ee siistemka cod bixinta uu fulliyo madaxda tijaabinta madax banaan

oo raad qoraal ka reebta siistemka la tijaabiyay, ujeedada tijaabada la fulliyay iyo marka tijaabada la dhamaystiray.

Qualification Testing - Tijaabinta Aqoonta

Baaritaanada iyo tijaabinta siistemka cod bixinta ay fulliyaan madaxda tijaabinta madax banaan ay NASED aqoonsan tahay si loo ogaado haddii siistemka waafaqsan tahay hawsha iyo sharuudaha kale heerarka shahaadeynta iyo sifooyinka u gaarka ah iibiyaha.

Qualification to Register - Aqoonta Diiwaan Gelinta

Xaaladaha loo baahan yahay si qofka loo diiwan geliyo si uu codkiisa u dhiibto, sida in uu yahay muwaadin u dhashay Mareykanka oo ka weyn 18 sanno.

Qualification to Vote - Aqoonta Cod Bixinta

Xaaladaha loo baahan yahay si cod bixiyaha u dhiibto warqadda cod bixinta, si uu isu diiwaan geliyo una dhiibto codkiisa waqtiga loo qabtay.

Qualified - Aqoonta

Rasmi ahaan loo yaqaan in lala kulmay sharuudaha; la caddeyay.

Qualified Candidate - Musharaxa Aqoonta

Qof kasta oo soo gudbiya dhamaan foomamka loo baahan yahay si uu musharax uga noqdo madaxda doorashada ku habboon ka hor inta aan la gaarin taariikhda ugu dambeysos. Magaca musharaxa waxaa lagu daabici doonaa warqadda cod bixinta.

Qualified Elector - Doortaha Aqoonta

Qofka iska diiwaan geliyay liiska cod bixinta madaxda doorashada ku habboon ee xaqa u leh in uu codkiisa dhiibto.

Qualified Voter - Cod Bixiyaha la Aqoonsaday

Qofka iska diiwaan geliyay liiska cod bixinta madaxda doorashada ku habboon ee xaqa u leh in uu codkiisa dhiibto.

Qualified Voting Systems – Siistemyada Cod Bixinta la Aqoonsan Yahay

Siistemyada cod bixinta ee la kulmay heerarka loo baahan yahay in la caddeeyo si loogu isticmaalo maamulka.

Qualified Write-in Candidate - Musharaxa Aqoonyaanka ku Quran Warqadda Cod Bixinta

Qof kasta oo raadiya doorasho, balse magaciisa aan lagu soo daabici doonin warqadda cod bixinta. Si loo xisaabo codadkaan lana xaqijiyo, musharaxa waa in uu foomamka u soo gudbiyo sarkaalka doorashada inta ay socoto hawsha. Boos ayaa laga diyaarin doonaa warqadda cod bixinta si cod bixiyeyaasha ugu qoraan magaca musharaxiinta. Musharaxa waa in uu cod bixiyeyaasha baraa in ay magaca musharaxiinta ku qoraan booska la siiyay.

Qualify - Aqoonta

Habka shirka dhamaan sharuudaha loo baahan yahay in rasmi ahaan la aqoonsado sida loo caddeeyay.

Qualifying Period - Muddada Aqoonta

Muddada waqtiga rasmiga ay dadka oo soo gudbin karaan madaxda ku habboon doorashada dhamaan foomamka laga rabo si ay xaq ugu yeeshaan in ay noqdaan musharax u taagan xafiis dadweyne ama si warqadda cod bixinta loogu daabaco sharciga in ay codkooda ka dhiibta doorashada dadweynaha.

Question Petitions - Su'aasha Codsiyada

Codsi rasmi ah oo qoran ay soo saxiixeen cod bixiyeyaasha, ku soo jeediyeen in la abuuro, la baddalo, ama lala noqdo shaqada sharciga gobolka ama qdob ku jira dastuurka.

Questions on The Ballot - Su'aalahka ku Jira Warqadda

Talooyinka la soo jeediyo si loo hirgeiyo sharchiyo cusub ama wax lagaga baddalo dastuurka si ay u ogoladaan ama diidaan cod bixiyeyaasha.

R

Random Audit - Xisaabinta aan Kala Sooca Lahayn

Hawl dadweyne marka gacanta lagu tiriyo qeyb ka mid ah cod bixinta, uu sarkaalka doorashooyinka u soo xullay si aan kala sooc lahayn, oo caadia quseeya ugu yaraan tiro xaafado ama tartan. Habkaan waxaa loo fulliyya si loo xaqiijiyo sax ahaanta tirinta tooska.

Ranked Choice Voting - Cod Bixinta Xulashada Kala Sareyso

Isbaddalada codka oo u ogolaata cod bixiye kasta in uu kala saaro tartanka sida waafaqsan waxa cod bixiyaha rabo, halkaas oo codadka la tiriyo safaf lana isticmaalo jadwalo looga adkaado fursadaha tartanka lana isticmaalo codadka ugu yar, halkaas oo lagu doorto guuleystaha ugu dadka badan codadka wareegga ugu dambeeyo xagga tartanka halka qof ku guuleysto iyo laga helo mattalaadda saamiga tartanada guuleysteyaasha-badan.

Ranked Order Voting - Isku Xijinta Nidaamka Cod Bixinta

Isbaddalada codka oo u ogolaata cod bixiye kasta in uu kala saaro tartanka sida waafaqsan waxa cod bixiyaha rabo, halkaas oo codadka la tiriyo safaf lana isticmaalo jadwalo looga adkaado fursadaha tartanka lana isticmaalo codadka ugu yar, halkaas oo lagu doorto guuleystaha ugu dadka badan codadka wareegga ugu dambeeyo xagga tartanka halka qof ku guuleysto iyo laga helo mattalaadda saamiga tartanada guuleysteyaasha-badan.

Ransomware - Carqaladeynta Kombuyutarada (Ransomware)

Touchscreen Voting Machine - Mashiinka Cod Bixinta Mashiinka Taabashada

Mashiinka cod bixinta ee isticmaasha shaashadda kombuyutarka si ay u muujiso una ogolaato in ay ku muujiyo xullahadiisa ama xulashadeeda marka ay taabato meelaha loogu talogalay shaashadda.

Touchscreen Voting System - Siistemka Taabashada Muraayadda

Siistemka cod bixinta ee isticmaasha mashiinada shaashadda kombuyutarada si ay u muujiso warqadda cod bixinta iyo u ogolaata cod bixiyaha in uu muujiyo xullahadiisa ama xullahadeeda marka la taabto meelaha ku yaal shaashadda.

Town - Tuulo

Qeyb madani ama siyaasad ka tirsan gobol, ee isbaddasha cabbir ahaan iyo macno, sida waafaqsan goobta balse caadi ahaan ah qeyb ka tirsan dagmada. Tuulada waxay yeelan kartaa ama ma yeelan karto dawladda hoose.

Town Clerk - Karaaniga Tuulada

Sarkaalka tuulada ee mas'uulka ka ah maamulka doorashada tuulada.

Town Council - Guddiga Magaalada

Hay'adda maamulka tuulada gobolo badan Mareykanka, oo ka kooban xubnaha ay doortaan cod bixiyeyaasha.

Township - Tuulada

Qeyb si balaaran looga isticmaalo dawladda hoose Mareykanka, oo ka tirsan dagmada, oo leh nooc dawlad hoose ay guud ahaan u qabato doorasho.

Township Clerk - Karaaniga deeganka tuulada

Qof rasmi ah oo ka shaqeeyo tuulo oo mas'uul ka ah maamulka doorashada tuulada.

Translate - Tarjum

Luqad kale ku sheeg macnaha (erayada ama qoraalka).

Translation - Tarjamada

Habka loo tarjumo erayda ama qoraalada ku qoran hal luqad ilaa luqad kale.

Translator - Tarjumaha

Qofka ama brograamka tarjamada hal luqad ilaa mid kale.

Transmitted Electronically - La Dirray Elataroonig Ahaan

Fariin loo dirray ama laga helay qalabka farsamada, kana mid ah kombuyutarka ama qalabka kale ama hababka lagula xariira telefoonka ama mikrowafka, ama qalab kasta oo la mid ah oo leh awooda korantada, digitalka, maqnatiiska, fiilo la'aanta, elatromaqnatiiska aragga, ama la mid ah.

Tribal Lands - Dhulka Qabiilada

Dhulka ku yaal gudaha maamulka qabaailka Hindida uu federaalka aqoonsan yahay, dawladda Mareykanka qaaday mas'uuliyadda ammaanada qabiilka Dhalladka Hindida Mareykanka ama xubin ka tirsan qabiilka Dhalladka Mareykanka. Tani waxaa ka mid ah meelaha la dajivo dadka qaar, deeqda dhulalka dadyowga (pueblo), dhulalka damaandda qabaailka, iyo dhulalka damaanadda qofka.

Trusted Build - Dhisidda Lagu Kalsoon Yahay

A witnessed software build where source code is converted into machine readable binary instructions (executable code) in a manner providing security measures which help ensure that the executable code is a verifiable and faithful representation of the source code.

Turnout - Dadka soo baxa

Tirada dadka yimaada ama ka qeybqaata munaasbo, khaas ahaan tirada dadka ka qeybqaata doorashada. Caadi ahaan, nambarkaan waxaa laga dhigaa boqolkiiba iskudarka tirada cod bixiyeyaasha dorashada marka loo qeybiyo iskudarka tirada cod bixiyeyaasha ku jiro diiwaanka xaafadda ama maamulka.

U

U.S. Election Assistance Commission (EAC) - Guddiga Kaalmada Doorashada Mareykanka

Guddiga Kaalmada Doorashada (Election Assistance Commission) waxaa abuuray Sharciga Ku Kaalmee Mareykanka in ay Coddeyso (Help America Vote Act) (HAVA) si gobolada loogu kaalmeeyo u hoggaansamida HAVA iyo si maaliyadda HAVA loogu qeybiyo gobolada. EAC waxaa kaloo lagu eedeyaa abuurista tilmaamaha siistemka cod bixinta iyo ku shaqeeynta siistemka cod bixinta kowaad ee dawladda federaalka.

brograamka shahaadeynta. EAC waxay kaloo mas'uul ka tahay xajinta foomka Diiwaan Gelinta Codbixiyaha Qaranka (National Voter Registration), fulinta cilmi baarista, iyo maamulka wararka doorashada qaranka kana mid ah dhaqanka la wadaago, maclumaadka la siiyo cod bixiyeyaasha, iyo ilo kale oo lagu hagaajiyo doorashooyinka.

Unauthorized Use - Isticmaalka aan la Fasixin

Isticmaalka farsamada ama xogta aan la ogolaanin ama hawlaha sharci darrada.

Unconstitutional - Aan Waafiqin Dastuurka

Ma waafaqsana dastuurka siyaasadda, khaas ahaan Dastuurka Mareykanka, ama sharciyada u dagsan hababka.

Under Oath – Dhaarsan

Lagu dhaariiyay si uu u sheego runta.

Undervote - Cod Bixin Yarida

Waxaa dhacdaa marka tirada xullashada uu cod bixiyaha ka doorta tartanka ka yar tahay tirada ugu badan ee loo ogol yahay tartankaas ama marka aan la sameynin xullasho hal tartan.

Undervoting - Cod Bixin Yarida

Ficilka marka cod bixiyaha doorto in ka yar tirada ugu badan ee loo ogol yahay tartanka cod bixinta ama marka aan la xullanin hal tartan keliya.

Unenrolled - Ku Jirin Diiwaanka

Qofka aan ka tirsaneen xisbi siyaasi.

Unenrolled Candidate - Musharaxa Aan Ku Jirin Diiwaanka

Musharax u tartama xafiis dadweyne balse aan ka tirsaneen xisbi siyaasi.

Unexpired Term - Muddada aan Dhicin

Tirada maalmaha kalendareka harray inta u dhexeyso booska ka banaan xafiiska dadweynaha iyo muddada la filaayo in ay si joogto u dhamaato. Waqtiyada aan dhicin waxaa lagu buuxin karaa ballan ama doorashada haaska.

Uniformed and Overseas Citizens Absentee Voting Act (UOCAVA) - Sharciga Cod Bixinta Maqanaha Muwaadiniinta Labbisani iyo Kuwa Dibadda Jira

Muwaadiniinta UOCAVA waa muwaadiniin Mareykan oo xubin ka ah Adeegyada Labbisani (Uniformed Services), Tijaarada Badaha (Merchant Marine), iyo ciidamada loo xilsaaray Adeegga Caafimaadka Dadweynaha (Public Health Service) iyo Maamulka Badaha iyo Hawada Qaranka (National Oceanic and Atmospheric Administration), xubnaha qoyskooda ee xaq u yeeshaa, iyo Muwaadiniinta Mareykanka ee daggana dibadda Mareykanka. Sharciga wuxuu bixiyaa aasaaska sharciga sharuudaha cod bixinta muwaadinta maqan ee xafiisyada federaalka.

Uniformed Services Voter - Cod Bixiyaha Adeegyada Midaysan

Muwaadiniinta Mareykanka ee xubnaha ka ah Adeegyada Labbisani (Uniformed Services), Tijaarada Badda (Merchant Marine, iyo xiidamada loo xilsaaray Adeegga Caafimaadka Dadweynaha (Public Health Services) iyo Maamulka Badaha Qaranka (National Oceanic) iyo Maamulka Jawiga (Atmospheric Administration), xubnaha qoyskooda ee xaq u yeeshaa.

Uninterruptable Power Supply (UPS) - Saadka Quwadda aan la Faragelin Karin

Battariyo xoogga ka qaadata siistemka dhakhso loo baddalo xoogga battariyada marka korantada siistemka kombuyutarka la gooyo (korantada kor u kacdo, goosgoos, iyo marka la waayo).

United States Citizen - Muwaadinka Mareykanka

Qofka ku sugar xaalad sharci oo qofka ka siiyaa xuquuq gudaha Mareykanka. Dhallashada waxaa laga qaadan karaa meesha lagu dhasho, dhallashadaaabaha, ama qaadashada waddaniyadda.

Unmarked Ballot - Warqada Cod Bixinta aan la Calameynin

Warqadda cod bixinta la soo saaro iyadoo aan la haysanin xullasho.

Unregistered - Aan La Diwaan Gelinin

In aan magaca qofka la gelinin liiska cod bixinta rasmiga.

Upload - Soo Geli

Wareeji xogta ku jirta kombuyutarka yar ama qalab una wareeji kombuyutar weyn.

Usability - Itaal Darrida

Waxqabadka, dadaalka iyo qancinta ay tiro isticmaaleyaasha fullin karaan tiro hawlo la cayimay oo ku sugan jawi gaar ah. Iisticmaalka marka loo fiiriyo cod bixinta waxaa loola jeedaa cod bixiyeyaasha awood u yeesha in ay dhakhso dhiibtaan codkooda sida ay rabeen, qalad la'aan, iyo kalsooni in xullahada codkooda si sax ah loo diiwaan geliyay. Waxay kaloo raacdaa isticmaalka qorshaha iyo hawlalka goobta doorashada qalabka cod bixinta.

Usability Testing - Tijaabinta Iisticmaalka

Waxay isu keentaa habab baarta sida isticmaaleyaasha ku jira dhageysteyaasha dhab ahaan ula xariiraan siistemka, taasoo ka duwan farsamooyinka falanqeynta sida fattashaadda isticmaalka.



Vacancy - Banaan

Marka xafiiska dadweynaha la baneyyo ka hor inta aysan dhamaanin muddada. Tan waxaa sabab u noqon kara dhimasho, shaqo ka tagid, ka fogaanta maamulka marka loo baahan yahay dagid, ka saaridda xafiiska, iyo asbaab kale.

Valid - Shaqeeyo

Sharciga oo qabto taasoo ugu wacan fullinta in loo hoggaansamo sharciga.

Valid Identification (ID) - Aqoonsiga Shaqeeyo (ID)

Hab lagu caddeeyo aqoonsiga qofka, sida waafaqsan sharciyada maamulka. Foomamka caadiga ee loo isticmaalo Aqoonsiga waa Shattiyada Wadaha iyo Baasaboorada.

Valid Registered Voter - Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha

Cod bixiyaha diiwaankiisa iminka shaqeeyo ee awood ku habboon u leh iyo xaq u yeesha in uu codkiisa dhiibto.

Valid Vote - Cod Bixin Shaqeeyo

Codkaada ku dhiibto warqadda cod bixinta ama sawirka warqadda cod bixinta ee sharci ahaan la ogol yahay sida waafaqsan sharciga gobolka.

Validation - Ka Shaqeysiinta

Habka qiimeynta siistemka ama qeyb inta ay socoto ama marka la gaaro dhamaadka hawsha horumarinta si loo ogaado haddii ay ku filan tahay sharuudaha la cayimay.

Verification - Xaqijinta

Habka qiimeynta siistemka ama qeybta si loo ogaado haddii soo saarka marxaladda horumarinta qanciso sharuudaha (sida sifeynta) la saaro bilowga marxaladda.

Verify Status - Xaqiji Xaaladda

Gobolada qaar, calan ku jira diiwaanka cod bixiyaha oo sheega in cod bixiyaha u baahan yahay in uu xaqijiyo xoogaa xog oo jirta diiwaankiisa, sida cinwaanka ama taariikhda dhallashada, ka hor inta aan la siinin warqadda codbixinta.

Verify Your Voter Registration - Xaqiji Diiwaan Gelinta Cod Bixiyahaada

Xaqiji in dhamaan maclumaadka diiwaan gelinta cod bixiyaha yahiin sax iyo in ay casriyeysan yahiin si aad codkaada u dhiibatid doorashada xigta.

Video Ballot - Warqada Cod Bixinta Fiidiyowga

Elatatooniga cod bixiyaha ee maclumaadka warqadda cod bixinta iyo tilmaamaha cod bixinta u soo bandhiga sida sawirada fiidiyowga.

Violate - Jebi

Ku fashala u hoggaansamida sharci ama xeer.

Violation - Jebinta

Falka ku guul dareysiga in oo hoggaansommo xeer ama sharci.

Virus - Firuska

Brograamka kombuyutarka ee laga yaabo in uu isku badiyo shabakada kombuyutarka, geliyo ama isku dhajijo brograamyada kombuyutarka, kaddibna waxyelo gaarsiiyo kombuyutarka ama siistemyada marka uu halleeyo, xado, ama baddalo xogta ama geitaanka.

Visual Format - Qaabka Aragga

Qaabka bandhigidda halkas oo qorshaha tartanka iyo maclumaadka kale lagu soo bandhigo muraayadda ama warqadda si loo fahmo marka la isticmaalo aragtida.

Visually Impaired - Itaal Darrida Aragga

Nooc kasta luminta aragga.

Visually Inspected - Fatashaadda Aragga

Hab caadi ah oo ku saabsan kantaroolka tayada, qaadashada xogta, iyo falanqeysta xogta marka kor la eego qalabka, ama bakhshadda warqadda cod bixinta, la isticmaalo isha si loo eego cilladaha.

Void Ballot - Warqada Cod Bixinta aan Shaqeyn

Warqadda cod bixinta la soo saaray balse uusan dhiiban karin cod bixiyaha. Tani waxay u dhici kartaa maxaa yeelay warqadda cod bixinta waxay ku luntay boostada, ama cod bixiya xaq uma laha in uu dhiibto codkiisa marka uu isticmaalo warqaddaas cod bixinta, iyo asbaab kale.

Voluntary Voting System Guidelines (VVSG) - Tilmaamaha Sistemka Cod Bixinta Qofka Iskiisa u Sameeyo

Sifooyinka iyo sharuudaha ka soo horjeedo oo lagu tijaabin karo siistemyada cod bixinta si loo ogaado haddii siistemyada la kulmaan heerarka loo baahan yahay. Sida hoos timaado HAVA, EAC waxay mas'uul ka tahay soo saarka, xajinta, iyo ogolaashada heerarkaan. Qaar ka mid ah qodobada la baaray ee hoos yimaada baaristaan waxaa ka mid ah shaqada, helitaanka, iyo kartida sekuritiga.

Vote - Dhiibashada Codka

Calaamad sax ah oo la xariirta warqadda cod bixinta rasmiga oo muujisa waxa uu cod bixiyaha la rabo musharaxa ama su'aasha la xariirta warqadda cod bixinta.

Vote A Provisional Ballot - Codkaada ku Dhiibo Warqadda ku Meel Gaarka

Ficilka dhiibashada warqadda cod bixiyaha aan ku qorneen liiska cod bixiyeyaasha la ogol yahay, ee macluumaadkooda aan dhamaystirneen ama aan sax ahayn, ama horay warqadda loogu diray boostada iyo loo ogoladay in uu dhiibto codkiisa. Badanaa warqadaha cod bixinta ku meel gaarka waxaa laga saaraa warqadaha cod bixinta kale ilaa sarkaal ka tirsan doorashada uu ka gaaro go'aan haddii cod bixiyaha uu xaq u leeyahay in uu codkiisa dhiibto. Marmar warqadahaan cod bixinta waxaa lagu magacaabaa codadka leysku haleeyo mararka codadka kale khasaraan.

Vote Absentee in Person - Cod Bixinta Maqanaha Qof Ahaan

Cod bixinta maalinta ka horeyso maalinta doorashada kalkaas uu cod bixiyaha qof ahaan ka buuxiyo warqadda cod bixinta maqanaha xafiiska doorashooyinka ama goob kale oo laga dhiibto codka maalinta cod bixinta ka hor.

Vote Against - Codkaada Uga Soo Horjeeso

Si loo dhiibto warqadda cod bixinta taasoo ka soo horjeedo musharaxa siyaasadda ama qorshe la soo jeediyay.

Vote by Emergency Paper Ballot - Codkaada ku dhiibo Warqadda Cod Bixinta Degdegga

Habka dhiibashada warqadda cod bixinta, marka siistemka doorashada musharaxiinta xisbiyada ama qalabka calameynta warqadda cod bixinta aan la heli karin ama aysan shaqeeyin.

Vote by Mail - Codkaada ku Dhiibo Boostada

Habka dhiibashada warqadda cod bixinta halkaas uu maamulka deegaan uu cod bixiyeyaasha xaqa u yeeshu loo diro warqadaha cod bixinta iyo warqadaha macluumaadka. Cod bixiyeyaasha waxay boostada ku soo celin karaan warqadda cod bixinta calaameysan, iyaga oo dira goobta cod bixinta, ama sanduuqa lagu rido, taasoo ku xeran maamulka.

Vote by Mail Ballot - Codkaada ku Dhiibo Warqadda Lagu Diro Boostada

Warqadda cod bixinta uu dhiibto cod bixiyaha marka la reegbo qofka qof ahaan u yimaado goobta cod bixinta. Caadi ahaan cod bixinta boostada waxaa loo diraa cod bixiyeyaash, base ahatee waxaa laga qaadan karaa miiska xafiiska doorashada. Warqadaha cod bixinta lagu soo diro boostada waxaa lagu soo celin karaa boostada, sanduuqa lagu rido, ama qof ahaan, hadba sida uu rabo maamulka.

Vote by Mail Ballot Application - Codkaada ku dhiibo Arjiga Warqadda Cod Bixinta lagu soo diro Boostada

Warqada uu adeegsado cod bixiyaha si uu u codsado warqadda cod bixinta loo diro cod bixiyaha.

Vote Capture Device - U Codeey Qalabka Qabta Codka

Qalabka cod bixinta elatarooningga uu toos u isticmaalo cod bixiyaha si uu xullahadiisa ugu sameeyo warqadda cod bixinta.

Vote Center - U Codeey Bartamaha

Xarunta cod bixinta waa mid ka mid ah goobaha cod bixinta badan ee doorashada maamulka halka cod bixiyeyaasha dooran karaan in ay ka dhiibtaan codkooda kana mid ah goobaha la diyaariyay (macnaha ma lagu soo koobo hal meel). Caadi ahaan, xarumaha cod bixinta waxaa la furaa maalmo badan, waxaa laga helaa adeegyada doorashada kala duwan.

Vote Counting System - Siistemka Tirinta Codka

Wadarta isukeenidda qalabka makaanikada, elataromakaanikada, ama elatarooningga (kana mid ah brograamka, qalabka ku shaqeeyo brograamka, iyo warqadaha loo baahan yahay si brograam loogu sameeyo, la kantaroolo, iyo

loo taageero qalabka) ee loo isticmaalo in lagu tiriyo codadka; si loo sheego ama loo bandhigo natijadaha doorashada; iyo si loo xajiyo loona soo saaro maclumaadka xisaabinta.

Vote For - U Codeey

Si codka loo siiyo musharax siyaasi ah ama la soo jeediyo talo.

Vote for N Of M - Codka la Siiyo N iyo M

Xullashada warqadda cod bixinta halkas oo cod bixiyeyaasha loo ogol yahay in ay codkooda siiyaan tiro ("N") musharaxiin ku jirta tartanka kuraas badan ("M").

Vote for No More Than - U Codeey In Ka Yar

Tirada ugu badan xullashada ee la ogol yahay tartanka.

Vote for Up To - U Codeey Ilaa

Tirada ugu badan xullashada ee la ogol yahay tartanka.

Vote Illegally - U Codeey Si Sharci Darro ah

Si loo dhiibto codka doorashada marka qofka aan loo ogoleyn in uu ka qeybqaato sida sharciga qabo.

Vote in Honor of a Veteran Program - Cod Bixinta Lagu Sharfo Brograamka Ciidamada

Brograam siiyaa muwadiniinta fursad ay ku aqoonsadaan kuna deeqaan codkooda ciidan hawlgab ah ama xubin ka tirsan adeegga waajibka shaqada.

Vote in Person - U Codeey Qof Ahaan

Cod bixinta ka hor ama Maalinta Doorashada halkas uu cod bixiyaha ku dhamaystiro warqadda cod bixinta uu qof ahaan ka jeediyo goobta cod bixinta, xafiiska doorashooyinka, ama xarunta codka ay kor ka eegaan saraaskisha doorashada ama shaqaalaha goobta cod bixinta.

Vote Independently - U Codeey Si Madax Banaan

Cod bixiyeyaasha xaq u leh siistemka cod bixinta la heli karo waa in ay isla fursaddaas helitaanka iyo ka-qeybgalka bixiyaan kana mid ah madax banaanida.

Vote Recorder - Qoraha Codka

Qalabka u ogolaada fursadaha tartanka in lagu fiiriyo habka elataroonigga, wuxuu soo saaraa warqadda cod bixinta aadanaha-akhrin karo, mana samayn karo diiwaan qoran oo joogto ah ee la xariira waxa cod bixiyaha xushay.

Vote Rigging - Isdaba Mariska Codka

Faragelinta sharci darrada ee lagu sameeyo hawsha doorashada, marka la kordhiyo qeybta codka musharaxa la rabo, yareynta qeybta codka musharaxiinta la tartama, ama labadaba.

Vote Tabulating Device - Qalabka Jadwal Gelinta Codka

Qalabka, brograamka, ama saadka loo adeegsado in lagu tiriyo codadka.

Vote Tabulating Program - Brograamka Xisaabinta Codka

Wadarta isukeenidda qalabka makaanikada, elataromakaanikada, ama elataroonigga (kana mid ah brograamka, qalabka ku shaqeeyo brograamka, iyo warqadaha loo baahan yahay si brograam loogu sameeyo, la kantaroolo, iyo loo taageero qalabka) ee loo isticmaalo in lagu tiriyo codadka; si loo sheego ama loo bandhigo natijadaha doorashada; iyo si loo xajiyo loona soo saaro maclumaadka xisaabinta.

Vote Tabulation District (VTD) - Dagmada Jadwalka Cod Bixinta

Tirinta warqadaha cod bixinta laga fulliyo isla Dagmada warqadahaas cod bixinta laga dhiibtay.

Vote Total - Iskudarka Cod

Tirinta codadka laga dhiibtay doorashada kaddib marka xero goobaha cod bixinta.

Vote Variation - Isbaddalada Codka

Nooca cod bixinta ama sifada, kaa mid ah balse ku ekeen kuwa soo socda: cod bixinta ogolaashada, cod bixinta cabbirka laga qaato, iskudarka cod bixinta, cod bixinta N-of-M, cod bixinta saamiga, cod bixinta xullahada la kala saaray, cod bixinta buunadada, iyo cod bixinta tirada aad u badan.

Vote Without Assistance - Cod Bixinta La'aanta Kaalmada

Awoodda lagu calameeyo, dhiibto, si gaar ah loogu xaqiijiyo warqadda cod bixinta iyo si madax banaan.

Voted Ballot - Warqadda Cod Bixinta

Warqadda cod bixinta ee laga helo dhamaan xulashada cod bixiyaha ee la dhiibtay.

Voter - Cod Bixiyaha

Qofka loo ogol yahay in uu dhiibto cod.

Voter Access Card – Kaarka Cod Bixiyaha

Qalabka loo isticmaalo mashiinada codbixinta elataroonigga qaar ee cod bixiye kasta si mashiinka loogu ogolaado in ay soo bandhigto nooca warqadda codbixinta saxsan ee caafadda cod bixiyaha.

Voter Aid Card - Kaarka Kaalmada Cod Bixiyaha

Kaar aqoonsan in cod bixiyaha u baahan yahay in uu kaalmo ka helo hawsha cod bixinta, kaddibna kiisaska qaar nooca kaalmada loo baahan yahay.

Voter Approval - Ogolaashada Cod Bixiyaha

Marka su'aasha ku qoran warqadda cod bixinta hesho cod ku filan in la gudbiyo.

Voter Assistance Card - Kaarka Kaalmada Cod Bixiyaha

Kaar aqoonsan in cod bixiyaha u baahan yahay in uu kaalmo ka helo hawsha cod bixinta, kaddibna kiisaska qaar nooca kaalmada loo baahan yahay.

Voter Checklist - Liiska Hubinta Cod Bixiyaha

Liiska loo sameyay si loo kaalmeeyo cod bixiyeyaasha in ay ku guuleystaan sahanka habka doorashada in ay iska diiwaan geliyaan ay codkooda ka dhiibtaan warqadda cod bixinta Maalinta Doorashada.

Voter Complaint - Ashtakada Cod Bixiyaha

Marka cod bixiyaha soo gudbiyo eedeyn rasmi ah oo ku saabsan jebinta xuquuqda codbixinta, sida cabsi gelinta ama diidmada in la taageero sharciga doorasahada.

Voter Concern Form - Foomka Arrinta Cod Bixiyaha

Foom loo adeegsado in lagu gudbiyo ashtako ama eedeyn ku saabsan jebinta xuquuqda cod bixinta.

Voter-Facing Scanner - Skaanka ku sii Jeeda Cod Bixiyaha

Sistemka diiwaan gelinta codadka goobta cod bixinta lana adeegsado calaamadaha lagu sameeyo bartilmaameedyada cod bixinta ee loo sameyay hal ama labo dhinac kaarka warqadda cod bixinta ama taxanaha kaarka. Siistemka skaanka aragga ayaa akhriya warqadaha cod bixinta kaadibna geliya jaswalka marka uu skaanka mariyo warqada cod bixinta kaddibna tarjumo waxa ku qoran.

Voter Files - Faylasha Cod Bixiyaha

Xogta dijitalka ee diiwaanada dadweynaha heli karaan oo ku saabsan qofka la diiwaan geliyay iyo qofka dhiibtay codkiisa doorashooyinkii la soo dhaafay. Diiwaanka faylka cod bixiyaha wuxuu muujiyaa haddii qofka uu codkiisa dhiibtay ama haddii kale doorashada, balse ma tilmaamo qofka ay siiyeen codkooda.

Voter Fraud - Khayaanada Cod Bixiyaha

Faragelinta sharci darrada ee lagu sameeyo hawsha doorashada, marka la kordhiyo qeybta codka musharaxa la rabo, yareynta qeybta codka musharaxiinta la tartama, ama labadaba.

Voter Fraud Hotline - Telefoonka Khayaanada Cod Bixiyaha

Nambarka telefoonka marka qof kasta uu soo sheegi karo ashtakada ama eedeynta jebinta xuquuqda cod bixinta.

Voter Guide - Tilmaanta Cod Bixiyaha

Tilmaan bixisa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan doorashada sida goobta cod bixinta iyo saacadaha, macluumaadka ku saabsan musharaxiinta, iyo tilmaamaha cod bxinta.

Voter Identification (ID) - Aqoonsiga Cod Bixiyaha (ID)

Hab lagu caddeeyo aqoonsiga qofka si loo dhiibto codka, sida waafaqsan sharciyada maamulka Foomamka caadiga ee loo isticmaalo Aqoonsiga waa Shattiyada Wadaha iyo Baasaboorada.

Voter Information Card - Kaarka Macluumaadka Cod Bixiyaha

Kaararka uu xafiiska doorashada siiyo cod bixiyeyaasha diiwaanka ku jiro ee laga helo macluumaadka ku saabsan diiwaanka cod bixiyaha, sida nambarka diiwaanka ku jiro, taariikhda diiwa an gelinta, magaca, ka tirsanaanta xisbiga, taariikhda dhallashada, cinwaanka guriga, nambarka xaafadda, cinwaanka goobta doorashada, iwm. Xafiiska doorashooyinka waxaa ka mid noqon kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kaarka haddii ay la noqoto lagama maarmaan.

Voter Information Guide - Tilmaamaha Macluumaadka Cod Bixiyaha

Tilmaan bixisa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan doorashada sida goobta cod bixinta iyo saacadaha, macluumaadka ku saabsan musharaxiinta, iyo tilmaamaha cod bxinta.

Voter Information Pamphlet - Buugyarahaa Macluumaadka Cod Bixiyaha

Tilmaan bixisa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan doorashada sida goobta cod bixinta iyo saacadaha, macluumaadka ku saabsan musharaxiinta, iyo tilmaamaha cod bxinta.

Voter Intent - Ujeedada Cod Bixiyaha

Sida cod bixiyaha isugu dayay in uu sheego xullashadooda cod bixinta iyaga oo qaado tallaabo ay ku calameyaan, xaqijiyaan, kuna dhiibtaan warqadda cod bixinta la soo saaray.

Voter Intent Standard - Heerka Rabitaanka Cod Bixiyaha

Hab lagu tiriyo warqadaha cod bixinta oo ujeedada tahay in la tiriyo sida waafaqsan ujeedooyinka cod bixiyaha, marka la isticmaalo sharciyada u dagsan hababka aadanaha iyo alogaritmiga mashiinka si loo hubiyo in dhamaan warqadaha cod bixinta in si isla mid ah loo tiriyo.

Voter Initiative - Dadaalka Cod Bixiyaha

Hab ay cod bixiyeyaasha ku soo jeedin karaan sharciyo cusub ama ku baddali karaan sharciyada jira iyagoo soo aruuriya sharciyada jira in ay hirgeliyaan sharciga ama ku meeleyaan arrinta ku qoran warqadda cod bixinta ama arrinta lagu meeleyeo warqadda cod bixinta si dadka uga dhiibtaan codkooda.

Voter Intimidation - Cabsig Gelinta Cod Bixiyaha

Cabsi gelinta dagaalka, waalidda, kadeedka, ama cabsi, ujeedadana tahay in la qalqaaliyo sida qofka u dhiibto codkiisa.

Voter List - Liiska Cod Bixiyaha

Liiska dadka iska diiwaangeliyay liisa doorashada cod bixiyaha dagga yahay, sida shardi in qofka uu xaq u leeyaay in uu dhiibto codkiisa.

Voter Notification Card - Kaarka Ogeysiiska Cod Bixiyaha

Kaararka uu xafiiska doorashada siiyo cod bixiyeyaasha diiwaanka ku jiro ee laga helo maclummaadka ku saabsan diiwaanka cod bixiyaha, sida nambarka diiwaanka ku jiro, taariikhda diiwa an gelinta, magaca, ka tirsanaanta xisbiga, taariikhda dhallashada, cinwaanka guriga, nambarka xaafadda, cinwaanka goobta doorashada, iwm. Xafiiska doorashooyinka waxaa ka mid noqon kara maclummaad dheeraad ah oo ku saabsan kaarka haddii ay la noqoto lagama maarmaan.

Voter Qualifications - Aqoonta Cod Bixiyaha

Shay kasta oo loo baahan yahay si qofka uu awood u yeesho in uu codkiisa ka dhiibto doorashada.

Voter Registrar - Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyaha

Sarkaalka mas'uulka ka ah maamulka doorashada.

Voter Registration - Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha

Qodob ay isticmaalaan sarakiisha doorashada marka ay tixraacaan xogta cod bixiyaha. Diiwaan gelinta cod bixiyaha waxaa kaloo loo jeedaa shardiga muwaadiniinta in ay iska diiwaan geliyaan gobolka ama xafiiska doorashooyinka deegaanka si ay xaq ugu yeesahaan una helaan warqad rasmi ah doorashada, iyo si ay uga qeybgalaan hawlaha qaar ee la xariira doorashada (kana mid ah balse aan ku ekeen saxiixa codsiyada, adeegga shaqaalaha goobta doorashada, iyo u tartanka xafiiska).

Voter Registration Application - Arjiga Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha (Voter Registration Application)

War rasmi ah oo ku saabsan maclummaadka loo isticmaalo in leysak diiwaan geliyaan cod bixiyeyaasha u dhiibtaan codkooda. Tani waxaa marmar loo yaqaan Kaarka Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha (Voter Registration Card).

Voter Registration Card - Kaarka Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha

Sarkaal loo dhaariyaya oraahda maclummaadka ay dadka isticmaalaan si loo diiwaan geliyaan cod bixiyaha u dhiibtaan codkooda.

Voter Registration Certificate - Shahaadada Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha

Oraah rasmi ah uu ku dhaartay xafiiska doorashada uu ku caddeeyo in muwaadinta yahay cod bixiyeye ku jira diiwaanka.

Voter Registration Drive - Ololaha Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha

Dadaalka ay sameyaan madaxda dawladda, xisbi siyaasi ama hay "ad kale si ay u diiwaan geliyaan cod bixinta dadka xaqaa u yeesha in ay codkooda dhiibtaan. Ka qeybgaleyaasha ololaha diiwaan gelinta cod bixiyaha waxay qeybiyaan foomamka diiwaan gelinta cod bixiyaha, waxay kaalmo ka geystaan dhamaystirkooda, kaddibna waxay foomamka u soo celiyaan doorashooyinka xafiisyada.

Voter Registration List - Liiska Diiwan Gelinta Cod Bixiyaha

Liiska dadka iska diiwaangeliyay liisa doorashada cod bixiyaha dagga yahay, sida shardi in qofka uu xaq u leeyaay in uu dhiibto codkiisa.

Voter Registration Rolls - Liiska Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha

Liiska dadka iska diiwaangeliyay liisa doorashada cod bixiyaha dagga yahay, sida shardi in qofka uu xaq u leeyaay in uu

dhiibto codkiisa.

Voter Registration System - Siistemka Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha

Siistem la qeybiyay ama leysu keenay oo ogolaata aruurinta, keydinta, baddalaadda, tirtirida, iyo soo sheegidda diiwaanada cod bixiyaha. Sharciga Kaalmee Codeynnta Mareykanka (Help America Vote Act) (HAVA) wuxuu gobol kasta ka rabaa siistem dhexe, siistemka diiwaan gelinta cod bixiyaha gobolka oo idil (VRS). VRSyada waxay leeyahiin isdhaafsiyo badan iyo waxay isdhexgeli karaan siistemyada Waaxda Baabuurta (Department of Motor Vehicle) (DMV), sarakiisha doorashada, codbixiyeyaasha, iyo kuwa kale ee maslaxadda ku qaba. VRS waxaa keeni kara iibiyaha ama "waxaa laga samayn karaa goobta". Waxay ku saleysnaan karaan arkitetuuraada adeegaha-macaamilka ama tiirkanka "main frame."

Voter Statistics - Tirokoobka Cod Bixiyaha

Xogta ku saabsan hawlaho cod bixinta la soo sheego iyo hawlaho diiwaan gelinta, kana mid ah qodobada sida isa soo xaadirinta iyo da'da.

Voter Turnout - Imaashada Cod Bixiyaha

Tirada dadka cod bixinta ee ku jiro doorashada. Caadi ahaan, nambarkaan waxaa laga dhigaa boqolkiiiba iskudarka tirada cod bixiyeyaasha dorashada marka loo qeybiyo iskudarka tirada cod bixiyeyaasha ku jiro diiwaanka xaafadda ama maamulka.

Voter's Bill of Rights - Sharciga Xuquuqda Cod Bixiyaha

Sharchiyo iyo badbaadinta dastuurka oo loo sameeyay si loo hubiyo fursadda cod bixinta doorashooyin madax banaan oo si xaq ah loo qaado.

Voter's Declaration - Bayaanka Cod Bixiyaha

Oraah qoran oo lagu xaqiijiyo dhaar ama marqaati, oo ku dhawaaqda xaqiijo ama tiro xaqiijo.

Voter-Verifiable - Xaqiijinta-Cod Bixiyaha

Siistemka cod bixinta ee cod bixiyaha siisa fursad uu ku xaqiijiyo in xullahadiisa ama xullahadeeda warqaadda cod bixinta si sax loo geliyay diiwaanka, ka hor inta aan la dhiibarin codka.

Voter-Verifiable Audit Record - Diiwaanka Xisaabinta Cod Bixiyaha Xaqiijin Karo

Diiwaanka daabacan uu adanaha akhrin karo ee dhamaan xullahooinka cod bixiyaha ee loo bandhigo cod bixiyaha si uu u arko una hubiyo sax ahaanta.

Voter-Verified Paper Audit Trail (VVPAT) - Xisaabinta Warqadda Cod Bixiyaha Xaqiijiay

Siistemyada DRE, warqadda laga helo caddeynya xulashooinka tartanka cod bixiyaha in hubso ka hor inta aysan si rasmi ah uu dhiibarin codkooda.

Voter-Verified Paper Record System (VVPRS) - Sistemka Diiwaanka Warqadda Cod Bixiyaha Xaqiijiyo

Diiwaanada warqadaha cod bixinta sida cod bixiyeyaasha uga dhiibteen siistemka cod bixinta elataroonigga. Marka loo baahdo in dib loo tiriyo ama loo xisaabo, WPT waxay keentaa qoraal lagu taageero. Qeybta "cod bixiyaha xaqiijiay" ee WPT waxay tixraadaa xaqiijada in cod bixiyaha la siiyay fursad uu ku xaqiijiyo in xullahooinka lagu muujiiyay qoraalka warqadda waafaqsan yahay xullahooinka cod bixiyaha ku dhiibtay warqadda cod bixinta. Sidaas darteed, natijjadi ka soo baxda doorashada waa xisaabin elataroonig oo ku saabsan codadka la dhiibtay iyo qoraal warqad oo lagu qoray codadka la dhiibtay.

Voter-Verified Paper Trail (VVPT) - Warqadaha Cod Bixiyaha Xaqiijiyo

Diiwaanka warqadaha cod bixinta sida cod bixiyeyaasha uga dhiibteen siistemka cod bixinta elataroonigga. Marka loo baahdo in dib loo tiriyo ama loo xisaabo, WPT waxay keentaa qoraal lagu taageero. Qeybta "cod bixiyaha xaqiijiay" ee WPT waxay tixraadaa xaqiijada in cod bixiyaha la siiyay fursad uu ku xaqiijiyo in xullahooinka lagu muujiiyay qoraalka warqadda waafaqsan yahay xullahooinka cod bixiyaha ku dhiibtay warqadda cod bixinta. Sidaas darteed, natijjadi ka soo baxda doorashada waa xisaabin elataroonig oo ku saabsan codadka la dhiibtay iyo qoraal warqad oo lagu qoray codadka la dhiibtay.

Voters with Disabilities - Cod Bixiyeyaasha Itaalka Darran

Cod bixiaya dalbada kaalmo ama farsamada taageerada si loo qiimeeyo hababka aan guud ahaan la handasin.

Votes Cast - Codadka la Dhiibtay

Tirada codadka la helo ee ka mid ah warqadaha cod bixinta aan weli la ogolaanin si loo tiriyo.

Voting Booth - Qolka Cod Bixinta

Meel oodan uu qofka istaago si uu u helo asturnaan inta uu dhiibanaayo warqadda cod bixinta.

Voting Device - Qalabka Cod Bixinta

Qalab qeyb ka ah sistemka cod bixinta.

Voting Equipment - Qalabka Cod Bixiyaha

Dhamaan qalabka, kana mid ah mashiinka cod bixinta, ee loo adeegsado in lagu soo bandhigo warqadda cod bixinta, la ogolaado xullashada cod bixiyaha, la qoro xullashada cod bixiyaha, kaddibna la geliyo jadwalka codadka.

Voting Indicator - Tilmaamaha Cod Bixinta

Booska ku xiga magaca musharax kasta iyo xullashada su'aasha warqadda cod bixinta, oo loo isticmaalo si loo calaameeyo codka.

Voting Instructions - Tilmaamaha Cod Bixinta

Macluumaadka la siiyo cod bixiyaha ee sharaxa hababka cod bixinta. Macluumaadkaan wuxuu toos uga muuqan karaa warqadda cod bixinta ama elataroonigga ama waxaa loo bixin karaa si gaar ah.

Voting Lever - Mashiinka Codad Bixinta Lever

Habka ee sida tooska u qoro xullashooyinka cod bixiyaha marka uu qalabka lagu kantaroolo khataarka makaanikada geliyo qalabka makaanikada tirisa codadka iyadoo aan la isticmaalin warqadda cod bixinta.

Voting Location - Goobta Doorashada

Goobta meesha cod bixiyeyaasha ka dhiibtaan warqaddaha cod bixintooda.

Voting Machine - Mashiinka Tirinta Codad Bixinta

Qeybaha makaanikada, elattromkaanikada, iyo korantada ee ka tirsan qeybaha siistemka cod bixinta uu cod bixiyaha isticmaalo si uu u arko warqadda cod bixinta, u tilmaamo xullashooyinkiisa/xullashooyinkeeda, iyo xaqijiyo xullashooyinkaas. Daruufaha qaar, mashiinka cod bixinta waxay dhiibtaa codka kaddibna waxay ku qortaa jadwalka.

Voting Official - Sarkanaka Cod Bixinta

Eray la siiyo koox dad oo la xariira doorashooyinka, kana mid ah shaqaalaha doorashada, shaqaalaha goobta, kuwa handasa warqadda cod bixinta iyo kuwa mas'uulka ka ah gelinta, hawlaha, iyo xajinta siistemyada cod bixinta.

Voting Position - Booska Cod Bixinta

Jawaabta ku qoran warqadda cod bixinta halkaas uu cod bixiyaha ku muujiyo xullashada musharaxa ama jawaabta soo jeedinta warqadda cod bixinta.

Voting Position Target - Bartilmaameedka Booska Cod Bixinta

Booska cod bixinta waxaa loola jeedaa meesha ku xigta warqadda cod bixin kasta ama talaabo ama meesha warqadda cod bixinta oo si gaar loogu tilmaamay in ay qorto xullashada cod bixiyaha tartankaas. Ereyga waxaa lagu dabaqaa dhamaan noocyada booska cod bixinta ee ku qoran warqadda cod bixinta, iyadoo aan la fiirinin qaabka ay noqon doonaan, kana mid ah, balse kuma eka, leydhii, qaabka ukunta, goobo, labo jibbaarane, dulell, duleelin isdhaafsan, god, iyo fallaar furan.

Voting Precinct - Xaafadda Cod Bixinta

Qeybta maamulka doorashada ee la shaqeysyo qeyb joqraafi ahaan ku dhaggan ee aasaas u ah go'aanka laga gaaro tartanada iyo cod bixiyeyaasha sharci ahaan adaggan deegaankaas waxay xaq u leeyahiin in ay codkooda ka dhiibtaan.

Voting Process - Hawsha Cod Bixinta

Dhamaan hababka idil, dadka, ilaha, qalabka, iyo goobaha la xariira fullinta doorashada.

Voting Punch - Duleelinta Cod Bixinta

Qalabka calaameyn ta warqadda cod bixinta ay isticmaalaan cod bixiyeyaasha di loo duleeliyo kaarka warqadda cod bixinta kaddibna loo calaameeyo xulashadooda.

Voting Restrictions - Waxyaabaha Ka Reeban Cod Bixinta

Sharci ama sharciyo ku adkeeyaa dadka in ay dhiibtaan codkooda.

Voting Right - Xaqa Loo Leeyahay Cod Bixinta

Sharciyada badbaadiya awoodda muwaadinka u leeyahay in uu ka qeybqaato doorashooyinka dadweynaha.

Voting Rolls - Liisaska Dadka Codkooda Dhiiban Kara

Liiska dadka iska diiwaangeliyay liisa doorashada cod bixiyaha dagga yahay, sida shardi in qofka uu xaq u leeyaaay in uu dhiibto codkiisa.

Voting Session - Waqtiyada Cod Bixinta

Isku keenidda hawlaha sida soo saarka warqadda cod bixinta, isdhengalka qalabka qabashada codka, cod bixinta, xaqijinta, iyo dhiibashada.

Voting Station - Goobta Cod Bixinta

Goobta ku taal gudaha cod bixinta, meesha cod bixiyeyaasha diiwaan geliyaan codadka. Goobta cod bixinta waxaa ka mid ah xaafadda, goobta, sanduuqa, ama meesha oodan oo laga dhiibto codka iyo sidoo kale mashiinka cod bixinta.

Voting Status - Xaaladda Cod Bixinta

Eray ay sarakiisha doorashada u isticmaalaan sharaxaadda haddii xogta cod bixiyaha muujiyo in cod bixiyaha uu xaq u leeyahay in uu codkiisa dhiibto iyo/ama haddii uu codkiisa dhiibtay.

Voting Stylus - Cod Bixinta Stylus

Qalab loo isticmaalo in lagu calameeyo warqadda cod bixinta analogga ama mashiinka cod bixinta diiwaan gelinta elataroonigga tooska.

Voting System - Siistemka Cod Bixinta

Wadarta isu keenidda qalabka makaanikada, elataromakaanikada ama elataroonigga (kana mid ah brograamka, qalabka ku shaqeeyo brograamka, iyo warqadaha loo baahan yahay in lagu sameeyo brograamka, kantaroolo, iyo lagu taageero qalabka) ee loo isticmaalo in lagu sifeeyo warqadaha cod bixinta; la dhiibto lana tiriyo codadka; la soo sheego ama la soo bandhigo natijadaha doorashada; iyo la xajivo iyo la soo saaro raadka maclumaadka xisaabinta; iyo dhaqanka iyo warqadaha la xariira ee loo isticmaalo in lagu aqoonsado qeybaha iyo noocyada qeybahaas; la tijaabiyo siistemka inta lagu hawlan yahay horumarinta iyo dayactirka; la haayo diiwaanka qaladaadka siistemka iyo cilladaha; si loo ogaado isbaddalada siistemka loo baahan yahay in lagu sameeyo siistemka kaddib marka la aqbalo siistemka; iyo in cod bixiyaha uu heli karo alaabta (sida ogeysiisaya, tilmaamaha, foomamka ama warqadaha cod bixinta).

Voting System Certification - Caddeyntha Siistemka Cod Bixinta

Habka EAC, iyadoo adeegsaneya tijaabinta iyo qiimeynta ay fullisay Shaybaarka Tijaabinta Siistemka Cod Bixinta (Voting System Test Laboratory) la aqoonsan yahay, aqoonsato in siistemka cod bixinta la kullanto sharuudaha sida ku qoran

heerarka tijaabinta siistemka cod bixinta (voting system testing standards (WSG), iyo wax qabata sida waafaqsan tafasiisha Soo Saaraha xagga siistemka.

Voting System Procedures - Hababka Siistemka Cod Bixinta

EAC waxay ku shaqeysaa brograamka tijaabinta siistemka cod bixinta iyo shahaadeyntra. Brograamkaan wuxuu tijaabiyyaa iyo wuxuu caddeeyaa qalabka iyo brograamka iyo wuxuu kaloo ka saaraa caddeyntha siistemyadaas. Brograamkaan wuxuu shaybaarada tijaabinta u aqoonsan yahay in ay tijaabinta u fulliyaan EAC. Inkastoo gobolada aan laga rabin in ay ka qeybgalaan brograamka, qaar waxay fulliyeen sharchiyo ama xeer u baahan ka qeybal.

Voting System Software - Brograamka Siistemka Cod Bixinta

Dhamaan koodhka la fullin karo iyo faylasha qaabka la xariira si loo hagaajiyo hawlahaa siistemka cod bixinta. Tani waxaa ka mid ah brograamka dhinac saddaxaad sida siistemyadaa uu ku shaqeeyo, wadeyaasha (drivers), iyo qalabka maamulka xogta.

Voting System Standards (VSS) - Heerarka Siistemka Cod Bixinta

Siistemyada codbixinta EAC caddeysay waxaa lagu tijaabiyya heerarka iskaa ee loo baahan yahay in siistemyada doorashada la kulmaan si loo helo shahaadada Federaalka. Heerarkaan waxaa loo yaqaan Tilmaamaha Siistemka Codbixinta Iskaa (Voluntary Voting System Guidelines) (VVSG).

Voting System Test Laboratory (VSTLs) - Shaybaarka Tijaabinta Siistemka Cod Bixinta

VSTLada waa shaybaarada tijaabinta sida gaarka ah loo leeyahay ee tijaabiya siistemyada cod bixinta (iyo siistemyada doorashada kale) si ay u waafaqso Tilmaamaha Sistemka Cod Bixinta Iskaa (Voluntary Voting System Guidelines) (VVSG) ama sharuudaha kale, kana mid ah sharuudaha gobolka qofka. VSTLada waxaa muddo ka muddo laga fiiriyyaa in ay waafaqsan yahiin Brograamka Aqoonsiga Shaybaarka Iskaa ee Qaranka (National Voluntary Laboratory Accreditation Program) (NVLAP) ay bixiso Machadka Heerarka iyo Farsamada Qaranka (National Institute for Standards and Technology).

Voting System Testing - Tijaabinta Siistemka Cod Bixinta

Baarithaanka iyo tijaabinta siistemka codbixinta kombuyutarka marka la isticmaalo hababka tijaabinta si loo ogaado haddii siistemka u hoggaansamo sharuudaha ku jira Tilmaamaha Siistemka Cod Bixinta Iskaa (Voluntary Voting System Guidelines) iyo isfooyinka u gaarka ah.

W

Waive (The Right To) - Iska Dhaafidda (Xaqa Loo Leeyahay)

Awoodda sharciga oo lagu codsado ka dhaafidda xeerka ama sharciga.

Waiver - Ka Dhaafiyaha

Qofka iskiisa iska dhiiba ama iska wareejiya xaq la ogsoon yahay ama maslaxad dheeraad uu helo. Wakaaladaha shari dajinta waaxyada gobolka ama dawladda federaalka waxay soo saari karaan iska dhaafidda si shirkadaha looga dhaafio shariyada qaar.

Ward - Qeyb ka tirsan magaalada

Qeyb maamul oo ka tirsan magaalada ama tuulada oo caadi ahaan doorata iyo uu mattalo xubin ka tirsan guddiga ama guddiyada.

Water District - Biyaha Dagmada

Gobol joqraafi ahaan ka tirsan dawladda hoose oo ku hawlan in bulshada la siiyo biyaha iyo bullaacadaha.

Wheelchair Accessible - Lagu Geli Karo Kursiga Lagu Fadhiisto

Dhismaha sifooyinka u ogolaada dhaqaajinta madax banaan dadka isticmaala kuraasha lugaha leh. Albaabada la geli karo waa in ballacooda yahay ugu yaraan 32 inji. Albaabka waa in uusan u baahanin in ka badan 5 bound xoog uu ku shaqeeyo. Sidoo kale waa in ay tahay wax hal gacan lagu hawlgelin karo iyadoo aan is adag loo qabanin, la muddin, ama laga maroojinin kala goyska hoose gacanta. Heerarka sare kama badnaan karaan 1/2 inji albaabada, kana mid ah albaabada taraaraxa. Albaabada waxay u baahan yahiin qiyaas boos banaan oo iyaga ku wareegsan, dhamaan kiisaska, booska waa in uu siman yahay, iyo in uu leeyahay taaga 1:48.

White Box Testing - Tijaabinta Sanduuqa Cad

Tijaabinta ku saleysan falanqeynta dhismaha gudaha qeybta ama siistemka.

Wi-Fi

Farsamada shabakada aan fiilada lahayn ee isticmaasha hirarka raadiyaha si ay u bixiso internet aad u dheeereeyo iyo isku xerka shabakada. Wi-Fi waa erayada ganacsiga ee loo yaqaan heerka IEEE 802.11x.

Wide Area Network - Shabakada Goobta Balaaran

Shabakada isku xerta kombuyutarada megaalada, gobolka, kiyo xuduudda qaranka.

Wireless - Fiilo La'aan

Xariirinta shabakada marka la isticmaalo hirarka raadiyaha baddalkii xariiritna lagu sameeyo fiilada. Waa la ogaan karaa seenyaalaha aan fiilada lahayn.

Withdrawal of Candidacy - Ka Noqoshada Musharaxnimada

Marka qofka ku dhawaqa musharaxnimo ama doono in la soo doorto balse goor dambe go'aan ku gaaro - sida uu doorto - in uusan ka soo qeyb gelin warqadda cod bixinta ugu dambeyso.

Withdrawal of Nominating Petition - Ka noqoshada Codsiga Magacaabidda

Marka qofka gudbiyo warqadaha loo tixgeliyo u Magacaabidda xafiiska dadweynaha, balse goor dambe go'aansado, in uusan dabagelin magacaabidda.

Withdrawn Candidates - Musharaxiinta ka Noqday Tartanka

Cod bixiyeyaasha ku dhawaaqay musharaxnimada ama soo gudbiyay doorashada balse goor dambe go'aan ku gaaray, kaddib marka ay doortaan, in aysan ka muuqanin warqadda cod bixinta ugu dambeyso.

Writ of Election - Awoodda Doorashada

Erayga sharciga la isticmaalo marka madaxda dawladda loo fasaxay ku dhawaaqdo in doorasho la qaban doono waqtii cayiman.

Write-In - Ku Qoris

Codka la siiyo musharaxa aan ku qorneen warqadda cod bixinta. Maamulada qaar, cod bixiyeyaasha waxay tani ku sameyan karaan iyaga oo buuxiya booska ku-qor ee loogu talogalay warqadda cod bixinta, waxay isticmaali karaan warqadda "keypad", muraashadda la taabto, ama hab elataroonig kale si loo geliyo magaca ku qoran qalabka codbixinta elatarooningga.

Write-In Campaign - Ololaha ku Qorista Liiska

Qof kasta oo raadiya doorasho, balse magaciisa aan lagu soo daabici doonin warqadda cod bixinta. Musharaxa waa in uu cod bixiyeyaasha baraa in ay magaca musharaxiinta ku qoraan booska laga siiyay warqadda cod bixinta.

Write-In Candidate - Musharaxa ku Qorista Liiska

Qof kasta oo raadiya doorasho, balse magaciisa aan lagu soo daabici doonin warqadda cod bixinta. Codadkaan loo baahan yahay in la tiriyo lana shahaadeyo, musharaxa waa in uu foomamka u soo gudbiyo sarkaalka doorashada inta lagu dhex jiro waqtiga aqoonsiga. Boos ayaa laga diyaarin doonaa warqadda cod bixinta si cod bixiyeyaasha ugu qoraan magaca musharaxiinta. Musharaxa waa in uu cod bixiyeyaasha baraa in ay magaca musharaxiinta ku qoraan booska la siiyay.

Write-In Candidate Requirements - Sharuudaha ku Qorista Musharaxa

Qof kasta oo raadiya doorasho, balse magaciisa aan lagu soo daabici doonin warqadda cod bixinta, waa in uu seli dhamaystiro kaddibna foomamka u gudbiyo sarkaalka doorashada muddo quman, si loo tiriyo codadkaan kaddibna loo caddeeyo.

Write-In Space - Booska Ku Qorista Liiska

Booska ka banaan warqadda ay cod bixiyeyaasha ku qoraan magacyada musharaxa, waa kuwa aan horay loogu daabiciin warqadda.

Write-In Vote - Cod Bixinta Ku Qorista Liiska

Codka la siiyo musharaxa aan ku qorneen warqadda cod bixinta. Maamulada qaar, cod bixiyeyaasha waxay tani ku samayn karaan marka ay isticmaalaan qalabka calaameynta si ay xullashadooda ugu qoraan warqadda codbixinta ama waxay adeegsan karaan warqadda "keypad", muraayadda la taabto, hab elataroonig kale si ay u geliyaan magaca.

Write-In Voting - Cod Bixinta Ku Qorista Liiska

Si loo fulliyo xullashada qofka aan ku jirin liiska warqadda cod bixinta. Maamulada qaar, cod bixiyeyaasha waxay tani ku samayn karaan marka ay isticmaalaan qalabka calaameynta si ay xullashadooda ugu qoraan warqadda codbixinta ama waxay adeegsan karaan warqadda "keypad", muraayadda la taabto, hab elataroonig kale si ay u geliyaan magaca.

X

X of Y - X ee Y

Waxaa loola jeedaa tirada xaafadaha cod bixinta ee lagu qoray jadwalka lana soo sheegay. Tusaale 8 marka la soo qaado 10 xaafad ayaa la geliyay jadwalka lana soo gudbiyay.

XML Extensible Markup Language - Luqadda Calaameynta la Fidin Karo (XML Extensible Markup Language)

XML waa qoraal ku saleysan luqadda loo isticmaalo in lagu habeeyo iyo lagu soo bandhigo macluumaadka ku jira World Wide Web.

Y

Yard Sign - Calaamadda Dibadda

Calaamad xayasiiso cod gaar ah.

Z

Zero Report - Warbixinta Eber

Warbixinta la soo saaro ka hor inta aan la gelinin jadwalka si loo hubiyo in aysan jirin codadka la keydiyay.